# Yamhill
# Community Care
# Buug-gacmeedka Xubinta
# **2025**

La cusbooneysiiyay Janaayo 1, 2025

## Naga caawi in aan wanaajino buug-gacmeedkani

OHP waxay rabtaa in ay war kaa maqasho! Waxaan rabnaa in xaqiijino in aad hayso macluumaadka aad u baahan tahay. Jawaab celintaadu waxay ka caawin kartaa YCCO iyo OHP in ay wanaajiyaan buug-gacmeedyada xubnaha.

Qaado ra'yi ururinta buug-gacmeedka! Iskaan garee code-ka QR ama booqo www.surveymonkey.com/r/tellOHP si aad uga jawaabto su'aalo dhowr ah.

ISKAAN GAREE SI AAD

# Cusbooneyiinta Buug-gacmeedka

Xubnaha cusub iyo kuwa soo laabanaya ayaa boosta loogu diraa buug-gacmeed marka ay ku soo biiraan Yamhill Community Care (YCCO). Waxaad buug-gacmeedkii ugu dambeeyay ka heli kartaa halkan https://yamhillcco.org/members/member-handbook/. Haddii aad u baahan tahay caawimaad ama hayso su'aalo, Adeega Macmiilka ka wac 855-722-8205 (TTY 711).

# Wax Bilaabida:

Waxaanu kuu soo diri doonaa ra'yi ururin caafimaad si aad uga caawiso YCCO in ay ogaato taageerada aad u baahan tahay. Waxaanu wax kaa weydiin doonaa baahiyahaaga daryeelka caafimaadka jirka, hab-dhaqanka, iyo ilkaha, iyo bulshada. Halkan waxaa ku qoran meesha la sii gelayo 'lin' ee waxa ra'yi ururintu u eg tahay https://yamhillcco.org/members/documents-and-forms/. Si aad waxyaabo dheeraad ah uga ogaato ra'yi ururintan booqo qaybta "Ra'yi ururin ku saabsan caafimaadkaaga" ee ku qoran bogga 30.

Buuxi oo u soo celi ra'yi ururintaada mid ka mid ah siyaabahani:

- Telefoonka: 833-257-2191
- Fax-ka: 503-607-8336
- Boosta: YCCO<br>PO Box 5490<br>Salem, OR 97304
- Email-ka: caremanagement@yamhillcco.org
- Web-ka: https://www.yamhillcco.org

## Talooyin Waxtar leh:

Su'aalaha qaarkood ayaa lagaga jawaabay halkan https://yamhillcco.org/members/faq.
Qaarka mid ah xubnaha YCCO waxay heli karaan faa'iidooyin dheeraad ah sida gaadiid loo raacayo dukaanka cuntada ama waxyaabaha dhanka waxbarashada, wac YCCO aad u ogaato waxyaabo dheeraad ah.

Tixraac dhammaadka buug-gacmeedka wixii la xiriira qeexida erayada ay dhici karto in ay waxtar lahaadaan in la ogaado.
Haddii aad raadinayso:


- Faa'iidooyin. U gudub bogga 34
- Daryeel Bixiyayaasha Aasaasiga ah. U gudub bogga 26
- Oggolaanshaha Hore iyo Gudbinta. U gudub bogga 35
- Xuquuqda iyo Waajibaadka. U gudub bogga 21
- Gaadiid u raacida Daryeelka. U gudub bogga 65
- Isku duwida Daryeelka. U gudub bogga 32
- Daawooyinka la isku qoro. U gudub bogga 71
- Daryeelka Degdega ah. U gudub bogga 75
- Inta ay qaadanayso in la helo daryeel. U gudub bogga 57
- Tabashooyinka, Cabashooyinka iyo Rafcaanada. U gudub bogga 93


- Had iyo jeer kaarkaaga aqoonsiga xubinimo ee OHP iyo YCCO soo qaado.
  - Ogow: Kuwani waxay iman doonaan iyaga oo kala gooni ah, waxaad heli doonta karkaaga Aqoonsiga OHP ka hor kaarkaaga Aqoonsiga xubinimo ee YCCO.

Waxaad heli kartaa kaarkaaga Aqoonsiga YCCO oo ku jira xirmada soo dhaweynta. Kaarkaaga Aqoonsigu wuxuu leeyahay macluumaadka soo socda:

- Magacaaga
- Lambarkaaga Aqoonsiga
- Macluumaadka Qorshahaaga
- Magaca iyo Macluumaadka Daryeel Bixiyahaaga Aasaasiga ah
- Lambarka Telefoonka Adeega Macmiilka
  - Wac Adeega Macmiilka wixii la xiriira Helidda Luqadda

- Daryeel Bixiyahayga Aasaasiga ah waa ________________________________
  - Lambarkiisu waa _________________
- Dhakhtarkayga Daryeelka Aasaasiga ee Ilkuhu waa__________________________________
  - Lambarkiisu waa _________________
- Daryeel bixiyayaasha kale ee aan haysto waa __________________________________
  - Lambarkiisu waa _________________
- Gaadiidkayga caafimaad ee aan degdega ahayn (gaadiid u raacida daryeelka oo lacag la'aan ah) waa WellRide
  - Lambarkoodu waa _844-256-5720____

## Caawimaad lacag la'aan ah oo ku qoran luqaddo iyo qaabab kale ah.

Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu wax ka ogaado barnaamijyada iyo adeegyada YCCO. Xubnaha oo dhan waxay xaq u leeyihiin in ay ogaadaan sida loo isticmaalo barnaamijyadayada iyo adeegyadayada.

Waxaan noocyadani u bixinaa si lacag la'aan ah:

- Turjubaanada luqadda calaamadaha
- Turjubaanada luqadaha lagu hadlo oo u qalma lana aqoonsan yahay
- Waxyaabo qoraal ah oo luqaddo kale ku qoran
- Farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee Braille
- Farta waaweyn
- Cajalada la duubo iyo noocyada kale

Waxaad buug-gacmeedka xubinta ka heli kartaa website-kayaga: https://yamhillcco.org. Haddii aad u baahan tahay caawimaad ama hayso su'aalo, Adeega Macmiilka ka wac 855-722-8205.

**Waxaad heli kartaa macluumaadka oo ku qoran luqad kale ama qaab kale ah.**

Adiga ama wakiilkaagu waxaad heli kartaan waxyaabo qofka xubinta ah leeyahay sida buug-gacmeedkani, ama ogeysiinta CCO oo ku qoran luqaddo kale, farta waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee Braille, ama qaabka kasta oo aad doorbidayso. Waxaad macluumaad ku heli doontaa muddo 5 maalmood gudahood ah laga bilaabo marka aad codsato. Caawimaadani waa mid lacag la'aan ah. Tusaalooyinka macluumaadka qofka xubinta ah waa:

- Buug-gacmeedkani
- Liiska daawooyinka caymiskooda la bixiyo

- Liiska daryeel bixiyayaasha
- Warqadaha, sida ogeysiisyada cabashada, diidmada, iyo rafcaanka

Isticmaalkaaga faa'iidooyinka, cabashooyinka, rafcaanada, ama dacwad dhageysiga lama diidi doono ama lama xaddidi doono iyada oo lagu saleynayo baahida aad u qabto luqad kale ama qaab kale.

**YCCO waxay kuu soo diri kartaa macluumaad.**

Waad codsan kartaa adiga oo buuxinaya foomka xiriirka sugan oo laga helayo website-kayaga https://yamhillcco.org/contact-us/. Fadlan nala soo socodkii dokumentiyada aad jeclaan lahayd in boosta laguugu soo diro. Waxaad buug-gacmeedka xubinta ka heli kartaa website-kayaga: https://yamhillcco.org/members/member-handbook/
Haddii aad u baahan tahay caawimaad ama hayso su'aalo, Adeega Macmiilka ka wac 855-722-8205.

**Waxaad yeelan kartaa turjubaan.**

Adiga, wakiilkaaga, xubnaha ka tirsan qoyska, iyo daryeel bixiyayaashu waxay codsan karaan turjubaanka daryeelka caafimaadka oo u qalma lana aqoonsan yahay Waxaad sidoo kale codsan kartaa turjubaanada luqadda calaamadaha iyo qoraalka ama caawimaad dheeraadka ah iyo adeegyo. Adeegyadan waa kuwo lacag la'aan ah.

U sheeg xafiiska daryeel bixiyahaaga haddii aad u baahan tahay turjubaan marka la joogo booqashadaada. U sheeg luqadda ay tahay iyo qaabka aad u baahan tahay. Ogow waxyaabo dheeraad oo ku saabsan Turjubaanada Daryeelka Caafimaadka ee la aqoonsan yahay oo laga helo Oregon.gov/OHA/OEI.

Haddii aad u baahan tahay caawimaad, fadlan naga soo wac 855-722-8205 ama Adeega Macmiilka OHP ka wac 800-273-0557 (TTY 711).

Haddii aadan caawimaada turjubaanka ee aad u baahan tahay ka helin YCCO, isku duwaha Barnaamijka Adeegyada Helidda Luqadda ee gobolka ka wac 844-882-7889, TTY 711 ama email u dir: LanguageAccess.Info@odhsoha.oregon.gov.

| English |
| --- |
| You can get this handbook in other languages, large print, Braille or a format you prefer. You can also ask for an interpreter. This help is free. Call 855-722-8205 or TTY 711. We accept relay calls.<br><br>-<br><br>You can get help from a certified and qualified health care interpreter. |
| **Spanish** |
| Puede obtener este documento en otros idiomas, en letra grande, braille o en un formato que usted prefiera. También puede recibir los servicios de un intérprete. Esta ayuda es gratuita. Llame al servicio de atención al cliente 855-722-8205 o TTY 711. Aceptamos todas las llamadas de retransmisión.<br><br>-<br><br>Usted puede obtener ayudar de un intérprete certificado y calificado en atención de salud. |
| **Russian** |
| Вы можете получить это документ на другом языке, напечатанное крупным шрифтом, шрифтом Брайля или в предпочитаемом вами формате. Вы также можете запросить услуги переводчика. Эта помощь предоставляется бесплатно. |

Звоните по тел. 855-722-8205 или TTY 711. Мы принимаем звонки по линии трансляционной связи.

-

Вы можете получить помощь от аккредитованного и квалифицированного медицинского переводчика.

Vietnamese

Quý vị có thể nhận tài liệu này bằng một ngôn ngữ khác, theo định dạng chữ in lớn, chữ nổi Braille hoặc một định dạng khác theo ý muốn. Quý vị cũng có thể yêu cầu được thông dịch viên hỗ trợ. Sự trợ giúp này là miễn phí. Gọi 855-722-8205 hoặc TTY (Đường dây Dành cho Người Khiếm thính hoặc Khuyết tật về Phát âm) 711. Chúng tôi chấp nhận các cuộc gọi chuyển tiếp.

-

Quý vị có thể nhận được sự giúp đỡ từ một thông dịch viên có chứng nhật và đủ tiêu chuẩn chuyên về chăm sóc sức khỏe.

Arabic

يمكنكم الحصول على هذا وثيقة بلغات أخرى، أو مطبوعة بخط كبير، أو مطبوعة على طريقة برايل أو حسب الصيغة المفضّلة لديكم. كما يمكنكم طلب مترجم شفهي. إن هذه المساعدة مجانية. اتصلو على 855-722-8205 أو المبرقة الكاتبة 711. نستقبل المكالمات المحولة.

-

يمكنكم الحصول على المساعدة من مترجم معتمد ومؤهل في مجال الرعاية الصحية.

Somali

Waxaad heli kartaa warqadan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee Braille ama qaabka aad doorbidayso. Waxaad sidoo kale codsan kartaa turjubaan. Taageeradani waa lacag la’aan. Wac 855-722-8205 ama TTY 711. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta.

-

Waxaad caawimaad ka heli kartaa turjubaanka daryeelka caafimaadka oo xirfad leh isla markaana la aqoonsan yahay.

## Simplified Chinese

**您可**获取本文件的其他语言版、大字版、盲文版或您偏好的格式版本。您还可要求提供口译员服务。**本帮助免**费。致电 855-722-8205 **或** TTY 711。**我**们会接听所有的转接来电。

-

**您可以从**经过认证且合格的医疗口语翻译人员那里获得帮助。

## Traditional Chinese

您可獲得本**信**息函的其他語言版本、大字版、盲文版或您偏好的格式。您也可申請口譯員。以上協助均為免費。請致電 855-722-8205 或聽障專線 711。我們接受所有傳譯電話。

-

您可透過經認證的合格醫療保健口譯員取得協助。

## Korean

이문서은 다른 언어, 큰 활자, 점자 또는 선호하는 형식으로 받아보실 수 있습니다. 통역사를 요청하실 수도 있습니다. 무료 지원해 드립니다. 855-722-8205 또는 TTY 711 에 전화하십시오. 저희는 중계 전화를 받습니다.

-

공인 및 자격을 갖춘 의료서비스 전문 통역사의 도움을 받으실 수 있습니다.

## Chuukese

| |
|---|
| En mi tongeni angei ei taropwe non pwan ew fosun fenu, mese watte mak, Braille ika pwan ew format ke mwochen. En mi tongeni pwan tingor emon chon chiaku Ei aninis ese fokkun pwan kamo. Kokori 855-722-8205 ika TTY 711. Kich mi etiwa ekkewe keken relay.<br><br>-<br><br>En mi tongeni kopwe angei aninis seni emon mi certified ika qualified ren chon chiaku ren health care. |
| Ukrainian |
| Ви можете отримати цей довідник іншими мовами, крупним шрифтом, шрифтом Брайля або у форматі, якому ви надаєте перевагу. Ви також можете попросити надати послуги перекладача. Ця допомога є безкоштовною. Дзвоніть по номеру телефону 855-722-8205 або телетайпу 711. Ми приймаємо всі дзвінки, які на нас переводять.<br><br>-<br><br>Ви можете отримати допомогу від сертифікованого та кваліфікованого медичного перекладача. |
| Farsi |
| می‌توانید این نامه را به زبان‌های دیگر، درشت‌خط، بریل یا قالب ترجیحی دیگری دریافت کنید. می‌توانید مترجم شفاهی نیز درخواست کنید. این کمک رایگان است. با 855-722-8205 یا TTY 711 تماس بگیرید. تماس‌های رله را می‌پذیریم.<br><br>-<br><br>می‌توانید از یک مترجم شفاهی دارای گواهی و باکفایت در زمینه بهداشت و |
| Swahili |
| Unaweza kupata herufi hii kwa lugha zingine, kwa herufi kubwa, kwa lugha ya maandishi kwa vipofu au namna yeyote unayopendelea. |

Unaweza pia kuomba mkalimani. Msaada huu ni wa bure. Piga 855-722-8205 au TTY 711. Tunakubali simu za kupitisha ujumbe.

-

Unaweza pata usaidizi kutoka kwa mkalimani wa huduma ya afya aliyeidhinishwa na aliyehitimu.

## Burmese

ဤစာကို အခြားဘာသာစကားများ၊ ပုံနှိပ်စာလုံးကြီး၊ မျက်မမြင်များအတွက် ဘေရးလ် သို့မဟုတ် သင်ပိုမိုနှစ်သက်သည့် ပုံစံဖြင့် ရယူနိုင်ပါသည်။ သင်သည် စကားပြန်တစ်ဦးလည်း တောင်းဆိုနိုင်ပါသည်။ ဤအကူအညီသည် အခမဲ့ဖြစ်ပါသည်။ 855-722-8205 သို့မဟုတ် 711 ကို ဖုန်းဆက်ပါ။ ထပ်ဆင့်ခေါ်ဆိုမှုများကို ကျွန်ုပ်တို့ လက်ခံပါသည်။

-

သင်သည် သင်တန်းဆင်းလက်မှတ်ရနှင့် အရည်အချင်းရှိသည့် ကျန်းမာရေး စောင့်ရှောက်မှု စကားပြန်ထံမှလည်း အကူအညီရယူနိုင်ပါသည်။

## Amharic

ይህንን ደብዳቤ በሌሎች ቋንቋዎች፣ በትልቅ ህትመት፣ በብሬይል ወይም እርሶ በሚመርጡት መልኩ ማግኘት ይችላሉ። በተጨማሪም አስተርጓሚ መጠየቅም ይችላሉ። ይህ ድጋፍ የሚሰጠው በነጻ ነው። ወደ 855-722-8205 ወይም TTY 711 ይደውሉ። የሪሌይ ጥሪዎችን እንቀበላለን።

-

ፍቃድ ካለው እና ብቃት ካለው የጤና እንክብካቤ አስተርጓሚ ድጋፍ ማግኘት ይችላሉ።

## Romanian

Puteți obține această scrisoare în alte limbi, cu scris cu litere majuscule, în Braille sau într-un format preferat. De asemenea, puteți solicita un interpret. Aceste servicii de asistență sunt gratuite. Sunați la 855-722-8205 sau TTY 711. Acceptăm apeluri adaptate persoanelor surdomute.

-

Puteți obține ajutor din partea unui interpret de îngrijire medicală certificat și calificat.

## Siyaasadayada aan kala takoorka ku dhisnayn

Takoorku wuxuu ka soo horjeedaa sharciga. YCCO waa in ay raacdaa sharciyada xuquuqda madaniga ah ee gobolka iyo federaalka. Dadka ulama dhaqmi karno (xubnaha ama xubnaha imaan kara) si aan caddaalad ahayn mid kasta oo ka mid ah barnaamijyadayada ama hawlaha iyada oo sababtu tahay qofka:

- Da'diisa
- Naafanimadiisa
- Dalka uu ka soo jeedo, luqaddiisa koowaad, iyo aqoontiisa luqadda Ingiriisiga
- Jinsigiisa
- Diintiisa
- Midabkiisa
- Jinsiyadiisa, sifooyinkiisa jinsi, dookhiisa galmo, aqoonsigiisa jinsi, iyo fikradaha qaldan ee laga qabo jinsigiisa
- Uur lahaanshaheega iyo xaaladaha la xiriira
- Xaaladiisa caafimaad ama baahiyaha uu u qabo adeegyada

Haddii aad dareento in laguula dhaqmay si aan caddaalad ahayn mid ka mid ah sababaha kor ku xusan waxaad sameyn kartaa cabasho. Tani waxaa sidoo kale loo yaqaanaa gudbinta cabasho jirta.

Samee (ama ugu gudbi) cabasho YCCO mid ka mid ah siyaabahani:

- Telefoonka: Isku-duwaha Qaybtayada 1557 ka wac 833-257-2192 (TTY 711)
- Fax-ka: 503-765-9675
- Boosta: YCCO<br>PO Box 5490<br>Salem, OR 97304
- Email-ka: complaints@yamhillcco.org
- Web-ka: https://yamhillcco.org/members/documents-and-forms/

Waxaad nidaamkayaga cabashada ka akhriyi kartaa https://yamhillcco.org/contact-us/

Haddii aad leedahay naafanimo, YCCO ayaa haysa noocyadan caawimaad oo lacag la'aan ah:

- Turjubaannada luqadda calaamadaha oo la aqoonsan yahay
- Macluumaad qoraal ah oo ku qoran farta waaweyn, cajalada la duubo, ama qaabab kale
- Wax ka beddel macquul ah oo kale

Haddii aad u baahan tahay caawimaad luqaddeed, YCCO ayaa haysa noocyadan caawimaad oo lacag la'aan ah:

- Turjubaano la aqoonsan yahay
- Macluumaad qoraal ah oo ku qoran luqaddo kale

Caawimaad ma uga baahan tahay gudbinta cabasho? Ma u baahan tahay caawimaad luqaddeed ama wax ka beddel macquul ah? Adeega Macmiilka ka wac 855-722-8205 si aad u hesho caawimaad ama waxaad codsan kartaa magaca iyo lambarka telefoonka qof takhasus u leh caafimaadka dadka isku faca ah, ama hagaha caafimaadka shakhsi ahaaneed. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay in aad cabasho u gudbiso mid ka mid ah ururadani:

**Oregon Health Authority (OHA) Civil Rights**

- Telefoonka: 844-882-7889, TTY 711
- Web-ka: www.oregon.gov/OHA/EI
- Email-ka: OHA.PublicCivilRights@odhsoha.oregon.gov
- Boosta: Office of Equity and Inclusion Division
  421 SW Oak St., Suite 750
  Portland, OR 97204

**Bureau of Labor and Industries Civil Rights Division**

- Telefoonka: 971-673-0764
- Web-ka: https://www.oregon.gov/boli/civil-rights
- Email-ka: BOLI_help@boli.oregon.gov
- Boosta: Bureau of Labor and Industries Civil Rights Division
  800 NE Oregon St., Suite 1045
  Portland, OR 97232

**U.S. Department of Health and Human Services Office for Civil Rights (OCR)**

- Web-ka: https://ocrportal.hhs.gov/ocr/smartscreen/main.jsf
- Telefoonka: 800-368-1019, TDD: 800-537-7697
- Email-ka: OCRComplaint@hhs.gov
- Boosta: Office for Civil Rights
  200 Independence Ave. SW, Room 509F, HHH Bldg.
  Washington, DC 20201

# Waxaan macluumaadkaaga ka dhignaa mid astursan.

Waxaan kaliya diiwaannadaada la wadaagnaa dadka u baahan inay arkaan. Tani waxay noqon kartaa daaweyn ahaan iyo sababo lacag bixineed. Waad yarayn kartaa dadka arka diiwaannada

caafimaad.  Qoraal ahaan noogu sheeg haddii aadan rabin qof in uu arko diiwaannadaada **ama** haddii aad rabto in aan diiwaannadaada la wadaagno qof. Waxaad naga codsan kartaa liiska cidda aan la wadaagnay diiwaannadaada.

Haddii aad rabto in aan diiwaannadaada iyo macluumaadkaaga la wadaagno qof, fadlan buuxi foomka Oggolaanshaha Bixinta wuxuu ku jiraa website-kayaga halkan https://yamhillcco.org/members/documents-and-forms/. Haddii aad rabto in nuqul laguu soo diro wac Adeega Macmiilka oo codso iyaga in ay kuu soo diraan foomka.   Noogu soo dir foomka aad buuxisay mid ka mid ah siyaabahani:

- Fax-ka: 503-765-9675
- Boosta: YCCO<br>PO Box 5490<br>Salem, OR 97304
- Email-ka: info@yamhillcco.org

Haddii aad rabo in aad joojiso codsi in aad wadaagto diiwaannadaada ama macluumaadkaaga ama rabto in aad qof ka joojiso in uu arko diiwaannadaada waxaad noo soo diri kartaa warqad fadlan xaqiiji in aad soo raaciso magacaaga oo buuxa, taariikhdaada dhalasho, iyo lambarka Aqoonsiga OHP.   Noogu soo dir warqadaada mid ka mid ah siyaabahani:

- Fax-ka: 503-765-9675
- Boosta: YCCO<br>PO Box 5490<br>Salem, OR 97304
- Email-ka: info@yamhillcco.org

Sharci loo yaqaan Xeerka Federaalka ee Haynta Macluumaadka Caafimaad iyo Masuuliyadda (HIPAA) ayaa dhawra diiwaannadaada caafimaad kaasi oo ka dhiga kuwo gaar ah. Tani waxaa loo yaqaanaa qarsoodinimada. Waxaan leenahay warqad loo yaqaan Ogaysiiska Dhacdooyinka Asturan taasi oo sharaxaad ka bixinaysa habka aan u isticmaalno macluumaadka shakhsi ee xubnahayaga.  Waan kuu soo diri doonaa haddii aad codsato.  Kaliya wac Adeega Macmiilka oo codso in laguu soo diro Ogaysiiskayaga Dhacdooyinka Asturan. Waxaad sidoo kale ka arki kartaa https://yamhillcco.org/privacy-policy/.

# Diiwaannada caafimaad

Diiwaanka caafimaad wuxuu hayaa xaaladahaaga caafimaad iyo adeegyada aad isticmaashay. Wuxuu sidoo kale muujinayaa gudbinta laguu sameeyay.

**Maxaad ku sameyn kartaa diiwaannada caafimaad?**

- Codsato in diiwaankaaga loo diro daryeel bixiye kale.
- Codsato in la hagaajiyo ama la saxo diiwaannadaada.
- Hesho nuqulka diiwaannadaada, oo ay mid yihiin, balse aanan ku koobnayn:
  - Diiwaannadaada caafimaad oo ka socda daryeel bixiyahaaga
  - Diiwaannada ilkaha oo ka socda bixiyahaaga daryeelka ilkaha
  - Diiwaannada ka socda YCCO

Waxaa dhici karta in lagaa qaado qaddar lacageed oo macquul oo ah nuqulka diiwaannada la codsaday.

**Waxaa jiri kara waqtiyo uu sharciga xaddidayo helitaankaaga.**
Qoraalada iyo diiwaannada daaweynta maskaxda ee loo diyaariyay kiisaska maxkamadda lama wadaagi karo.

Daryeel bixiyayaashu sidoo kale ma wadaagi karaan diiwaannada marka, iyada oo la eegayo xukunkooda xirfadeed, wadaagista diiwaannadu ay waxyeelo la taaban karo u keeni karaan adiga ama qof kale.

Haddii daryeel bixiye u diido adiga ama wakiilkaaga la oggol yahay nuqulada diiwaannadaada caafimaad, daryeel bixiyuhu waa in uu ku siiyaa ogeysiin qoraal ah. Ogeysiintu waa in ay sharraxdaa sababta codsiga loo diiday oo sharraxaysaa xuquuqdaada in aad yeelato daryeel bixiye kale oo dib u eega diidmada. Ogeysiintu waxay sidoo kale kuu sheegi doontaa sida cabasho loogu sameeyo daryeel bixiyaha ama Xoghayaha Caafimaadka iyo Adeegyada Dadweynaha.

# Waxyaabaha ay ka kooban yihiin

Naga caawi in aan wanaajino buug-gacmeedkani .................................................. 2

Cusbooneyiinta Buug-gacmeedka ................................................................ 2

Wax Bilaabida: ........................................................................................ 2

Talooyin Waxtar leh: ................................................................................ 2

Caawimaad lacag la'aan ah oo ku qoran luqaddo iyo qaabab kale ah. ..................... 4

*Waxaad heli kartaa macluumaadka oo ku qoran luqad kale ama qaab kale ah. ..... 4*
*Waxaad yeelan kartaa turjubaan.............................................................. 5*

Siyaasadayada aan kala takoorka ku dhisnayn .................................................. 11

Waxaan macluumaadkaaga ka dhignaa mid astursan. .......................................... 12

Diiwaannada caafimaad .............................................................................. 13

Ku soo dhowoow YCCO! ............................................................................. 19

*How OHP and YCCO work together ........................ **Error! Bookmark not defined.***

Nala soo xiriir Xafiiska YCCO wuxuu furan yahay Isniinta ilaa Jimcaha, laga bilaabo 8:00 subaxnimo ilaa 5:00 galabnimo. ................................................................ 21

*Lambarrada telefoonka oo muhiim ah ....................................................... 21*
*La xiriir Qorshaha Caafimaadka Oregon ..................................................... 22*

Xuquuqdaada iyo Waajibaadkaaga ............................................................... 23

*Xuquuqdaada xubin ka tirsan OHP ahaan. .................................................. 24*
*Waajibaadkaaga xubin ka tirsan OHP ahaan ................................................ 26*

Xubnaha ka tirsan Hindida Maraykanka iyo Dhaladka Alaska .................................. 28

Xubnaha cusub ee isla markiiba u baahan adeegyo ............................................. 29

Daryeel bixiyayaasha aasaasiga ah (PCP-yada) .................................................. 29

*Daryeel bixiyayaasha ka tirsan qorshe caafimaad 'in-network providers' ............. 31*
*Buuga tilmaamaha daryeel bixiyaha ......................................................... 31*
*Ballan sameyso .................................................................................. 32*
*Ballamaha laga maqnaaday ..................................................................... 32*
*Beddelaada PCP-gaaga Waqti kasta ayaad beddeli kartaa PCP-gaaga. ............... 32*
*Isbeddelada daryeel bixiyayaasha YCCO ..................................................... 33*

Ra'yiga labaad ....................................................................................... 33

Ra'yi ururin ku saabsan caafimaadkaaga ........................................................ 33

Xubnaha uurka leh .................................................................................. 34

Hel caawimaad la xiriirta habeynta daryeelka aad la leedahay Isku duwida Daryeelka. 36

*Xubnaha leh Medicare ........................................................................... 38*

Faa'iidooyinkaaga .................................................................................... 38

*Sida Oregon u go'aamiso waxa OHP caymiskiisa bixin doonto ............................ 38*

*Helitaanka Tooska ah ........................................................................................ 39*
*Looma baahan gudbin ama oggolaansho hore ................................................... 39*
*Helitaanka oggolaansho hore (oo mararka qaarkood loo yaqaan "prior authorization") 40*
*Ma jiro oggolaansho hore oo looga baahan yahay adeegyadani ......................... 41*
*Gudbinta daryeel bixiyaha iyo is gudbinta shakhsi ahaaneed ............................... 41*
*Adeegyada u baahan gudbin ........................................................................ 41*
*Adeegyada aad adigu isku gudbin karto: ........................................................ 42*
*Astaanta furaha ee jaantusyada faa'iidooyinka ................................................. 43*
*Faa'iidooyinka caafimaadka jirka .................................................................. 43*
*Faa'iidooyinka daryeelka caafimaadka hab-dhaqanka......................................... 54*
*Faa'iidooyinka ilkaha......................................................................................... 56*
*Xubnaha Barnaamijka Ilkaha ee Halgamaha Ururka Xorta ah Iskutagay (COFA). 62*
*OHP Bridge waxaa loogu talagalay dadka waaweyn ee dhakhligoodu sarreeyo .. 63*
*Baahiyaha Bulsho ee La Xiriira Caafimaadka ..................................................... 63*
*Adeegyada ay OHP lacagtooda bixiso................................................................. 64*
*Diidmada damiir ahaaneed iyo diimeed ............................................................. 66*

Helitaanka daryeelka aad u baahan tahay.............................................................. 66

*Inta ay qaadanayso in la helo daryeel.................................................................. 69*

Faa'iidooyinka dhammeystiran iyo ka hortagga ee loogu talagalay xubnaha da'doodu ka yar tahay 21 jir.......................................................................................................... 71

*EPSDT wuxuu bixiyaa caymiska:......................................................................... 71*
*Caawimaada helida adeegyada EPSDT ............................................................. 72*
*Baaritaanada ................................................................................................... 72*
*Gudbinta EPSDT, ogaanshaha, iyo daaweynta ................................................... 73*

Shaqaalaha Caafimaadka Dhaqan ahaaneed (THW) ............................................ 74

*Macluumaadka Lagala soo  xiriirayo THW:.......................................................... 75*

Adeegyada dheeraadka ah.................................................................................... 76

*Adeegyada La xiriira Caafimaadka ..................................................................... 76*

Gaadiid raacid lacag la'aan ah oo lagu aadayo daryeelka Gaadiid raacid lacag la'aan ah oo lagu aadayo ballamaha loogu talagalay dhammaan xubnaha YCCO. ................ 78

*Qorsheyso gaadiid raacid ................................................................................. 78*
*Waxa la filayo marka aad soo wacdo................................................................... 78*
*Soo qaadida iyo dejinta........................................................................................ 79*
*Waxaad leedahay xuquuq iyo waajibaad gaadiid raace ahaan: ........................... 80*
*Joojinta ama beddelaada gaadiid raacidaada ...................................................... 80*
*Marka aadan iman ............................................................................................ 81*
*Tilmaamaha Gaadiid Raacaha............................................................................. 81*

Ku helida daryeelka ee muuqaal ahaan ama telefoon ahaan ................................. 82

*Sida loo helo bixiyayaasha telehealth ................................................................. 83*
*Goorta la isticmaalayo telehealth ........................................................................ 83*
*Booqashooyinka telehealth waa kuwo gaar ah ................................................... 84*
*Waxaad xaq u leedahay in aad:.......................................................................... 84*

Daawooyinka la isku qoro....................................................................................... 85

*Daawooyinka la isku qoro ee caymiskooda la daboolo ........................................ 85*
*Weydiisashada YCCO in ay daboosho daawooyinka la isku qoro ........................ 86*
*Farmashiyaha boosta lagu dalbado ..................................................................... 86*
*OHP waxay bixisaa lacagta daawooyinka caafimaadka hab-dhaqanka ................ 86*
*Caymiska daawada la isku qoro oo loogu talagalay xubnaha leh Medicare .......... 87*
*Helitaanka daawooyinka la isku qoro ka hor safar .............................................. 87*

Isbitaalada .............................................................................................................. 87

Daryeelka degdega ah.............................................................................................. 88

*Daryeelka jirka ee degdega ah ........................................................................... 89*
*Xarumaha daryeelka degdega ah iyo xarumaha caafimaad ee la imaan karo balan la'aanta 'walk-in' ee ku yaala degaanka YCCO: ........................................................................ 89*
*Daryeelka ilkaha ee degdega ah.......................................................................... 90*

Daryeelka degdega ah.............................................................................................. 91

*Xaaladaha degdega ah ee jireed ......................................................................... 91*
*Xaaladaha ilkaha ee degdega ah.......................................................................... 91*
*Dhibaatada caafimaadka hab-dhaqanka iyo xaaladaha degdega ah .................... 92*
*Ka hortagga isdilka ............................................................................................. 94*
*Daryeelka daba socda kii hore ka dib xaalad degdeg ah. .................................... 94*

Daryeelka laga fog yahay guriga ............................................................................ 95

*Daryeelka la qorsheeyay ee ka baxsan gobolka ................................................. 95*
*Daryeelka degdega ah ee laga fog yahay guriga ................................................. 95*

Biilasha loogu talagalay adeegyada ........................................................................ 96

*Haddii daryeel bixiyahaagu uu kuu soo diro biil, ha bixin iyada. ........................... 97*
*Waxaa dhici karta in lagaa codsado in saxiixdo foomka Heshiiska Bixinta Lacagta98*
*Biilasha loogu talagalay daryeelka degdega ah ee laga fog yahay guriga ama ka baxsan gobolka 99*
*Talooyin muhiim ah oo ku saabsan bixinta lacagta adeegyada iyo biilka ............ 100*

Xubnaha leh OHP iyo Medicare ............................................................................ 101

Beddelaada CCO iyo daryeelka guuritaanka........................................................ 102

*Waxaad xaq u leedahay in aad beddesho CCO-yada ama ka tegto CCO. ......... 102*
*Sida loo beddelo ama looga tego CCO-gaaga.................................................. 104*
*YCCO waxay kaa codsan kartaa in uga baxdo sababaha qaarkood.................. 104*

Daryeelka inta aad beddelayso ama ka baxayso CCO ........................................ 105

*Marka aad u baahan tahay daryeelka isku mid ah inta la beddelayo qorshayaasha106*

Go'aanada soo afjarida nolosha .......................................................................... 107

*Dardaaranka caafimaadka.................................................................................. 107*
*Waa maxay farqiga u dhexeeya  POLST iyo dardaaranka waalidka? ................. 110*

Soo sheegida Musuqmaasuqa, Hanti luminta, iyo Ku tagri falida.......................... 111

*Sida loo sameeyo soo sheegida musuqmaasuqa, hanti luminta, iyo ku tagri falida.112*

Cabashooyinka, Tabashooyinka, Rafcaanada iyo Dacwad Dhageysiga Caddaalada ah 113

*Waxaad sameyn kartaa cabasho ........................................................................ 114*
*Waxaad naga codsan kartaa in aan beddelno go'aan aan qaadanay.  Tani waxaa loo yaqaan rafcaan. ......................................................................................................... 115*
*Ogow waxyaabo dheeraad oo ku saabsan tallaabooyinka lagu codsado rafcaan ama dacwad dhageysi .............................................................................................................. 116*
*Su'aalaha iyo jawaabaha ku saabsan rafcaanada iyo dacwad dhageysiga......... 119*

Ereyada ay tahay in la Ogaado ........................................................................ 121

## Ku soo dhowoow YCCO!

Waanu ku faraxsanahay in aad qayb ka tahay YCCO.  YCCO waxay ku faraxsan tahay in ay kaa caawiso caafimaadkaaga. Waxaanu rabnaa in aanu ku siino daryeelka ugu wanaagsan ee aan karno.  Waxaan la shaqeynaa ururo kale si gacan looga geysto maareynta qaybo ka mid ah faa'iidadaada, tusaale ahaan ilkaha iyo gaadiidka.  Liiska buuxa ee ururada iyo daawooyinka la isku qoro ee adeegyada ay bixiyaan fiiri bogga 20.

Waa muhiim in la ogaado sida loo isticmaalo qorshahaaga.  Buug-gacmeedkani wuxuu wax kaaga sheegayaa shirkadayada, sida loo helo daryeel, iyo sida loo helo faa'iidooyinkaaga ugu badan.

Aragtidayada:

*"Bulsho caafimaad qabta oo mideysan oo xusta fayo-qabka jireed, maskaxeed, dareen, shucuureed, iyo bulsho."*

Hadafkayaga:
*"In la wada shaqeeyo si kor loogu qaado tayada nololeed iyo caafimaadka xubnaha Yamhill Community Care iyada oo la isku duwayo daryeel waxtar leh."*

## Sidee OHP iyo YCCO u wada shaqeyn karaan

Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) waa caymiska daryeelka caafimaad oo lacag la'aan ah oo loogu talagalay dadka reer Oregon.   OHP waa barnaamijka Medicaid ee Oregon. Waxay dabooshaa caymiska adeegyada daryeelka jirka, ilkaha, bulshada, iyo caafimaadka hab-dhaqanka (daaweynta caafimaadka dhimirka iyo daaweynta dhibaatooyinka isticmaalka mukhaadaraadka).  OHP waxay sidoo kale gacan ka geysan doontaa daawooyinka la isku qaro iyo gaadiid u raacida daryeelka.

OHP waxay leedahay qorshaha caafimaadka degaanka oo kaa caawiya in aad isticmaasho faa'iidooyinkaaga. Qorshayaashani waxaa loo yaqaan daryeelka urruradu iska kaashadeen ama CCO-yada. YCCO waa CCO. YCCO waxay u adeegtaa Yamhill iyo qaybaha degaannada Polk iyo Washington.

Waxaan la shaqeynaa ururo kale si gacan looga geystomaareynta qaarka mid ah faa'iidadaada, sida adeegyada ilkaha iyo gaadiid u raacida daryeelka.   Liiska buuxa ee ururadani iyo adeegyadani, fadlan fiiri, qaybta "Contact Us".


CCO-yadu waxay qabanqaabiyaan oo bixiyaan lacagta daryeelka caafimaadkaaga.  Waxaanu si kala duwan lacag u siinaa dhakhaatiirta ama daryeel bixiyayaasha si kor loogu qaado daryeelka aad hesho.  Tani waxay ka caawisaa in la xajiijiyo in daryeel bixiyayaashu diiradda saaraan kor u qaadida caafimaadkaaga guud.  Waxaad xaq u leedahay in aad wax ka weydiiso sidaan lacagta u siino daryeel bixiyayaasha.   Lacag bixinta daryeel bixiyaha ama abaalmarino lacageed 'incentives' ma beddeli doonto daryeelkaaga ama sida aad u hesho faa'iidooyinka. Wixii macluumaad dheeraad ah, Adeega Macmiilka ka wac 855-722-8205. Marka aad codsado

macluumaadkani, waxaan ku soo diri doonaa muddo 5 maalmo shaqo ah.

Dhammaan CCO-yadu waxay bixiyaan faa'iidooyinka OHP oo isku mid ah. Qaar ayaa bixiya adeegyo dheeraad ah sida alaabta ilmaha cusub iyo xubinimada jimicsiga. Ogow waxyaabo dheeraad oo ku saabsan faa'iidooyinka YCCO ee ku jira qaybaha "Faa'iidooyinkaaga" iyo "Adeegyada Dheeraadka ah"

Marka aad ka diiwaan gashan tahay OHP, waxaad heli doontaa kaarka Aqoonsiga Oregon Health. Tani waxaa laguugu soo diray warqadaada caymiska. Xubin kasta oo OHP oo ka tirsan qoyskaaga ayaa hela kaarka Aqoonsiga.

**Kaarkaaga Aqoonsiga ee Oregon Health wuxuu u ekaan doonaa sidani:**




Marka aad ka diiwaan gashan tahay CCO, waxaad sidoo kale heli doontaa kaarka Aqoonsiga CCO. Kaarkani waa mid aad u muhiim ah. Wuxuu muujinayaa in aad tahay xubinta YCCO waxaana ku qoran liiska macluumaad kale sida lambarrada telefoonka oo muhiim ah. Daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah (PCP) ayaa sidoo kale lagu qori doonaa Kaarkaaga Aqoonsiga.

Xaqiiji in aad tusto kaarkaaga Aqoonsiga YCCO waqti kasta oo aad tagto ballan ama farmashiye.

Warqadaada caymiska iyo kaarka Aqoonsiga YCCO ayaa kuu sheegi doona CCO-ga aad ka diiwaan gashan tahay. Waxay sidoo kale kuu sheegi doontaa waxay uu yahay heerka daryeelka ee qorshahaaga YCCO caymiskiisa bixiyo. Isticmaal kaarkaaga Aqoonsiga iyo shaxanka hoose si aad u aragto nooca daryeelka ee caymiskiiga lagaa bixinayo adiga.

| **CCO ama OHP:** Yaa qabanqaabiya oo bixiya lacagta daryeelkaaga? | | | |
|---|---|---|---|
| **Nooca caymiska** | **Caafimaadka jirka** | **Caafimaadka ilkaha** | **Caafimaadka hab-dhaqanka** |
| **CCO-A** | YCCO | YCCO | YCCO |
| **CCO-B** | YCCO | OHP | YCCO |
| **CCO-E** | OHP | OHP | YCCO |
| **CCO-F*** | Aan la daboolin | YCCO | Aan la daboolin |

| | | | |
|---|---|---|---|
| **CCO-G** | OHP | YCCO | YCCO |
| **Kaar furan**** | OHP | OHP | OHP |

*CCO-F waxay kaliya dabooshaa caymiska daryeelka caafimaadka ilkaha.

**Kaarka furan waxaa sidoo kale loo yaqaanaa kharashka adeega ‘fee-for-service’.

Ogow waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan habeynta daryeelkaaga ee ku jira qaybta “Isku duwida Daryeelka” ama arag nooca faa’iidooyinka caymiskooda la daboolaya ee ku jira qaybta “Faa’iidooyinkaaga”.

# Nala soo xiriir

Xafiiska YCCO wuxuu furan yahay Isniinta ilaa Jimcaha, laga bilaabo 8:00 subaxnimo ilaa 5:00 galabnimo.

Waanu xiranahay Maalinta U Horeysa Sanadka Cusub (01/01/25), Maalinta Martin Luther King Jr (01/20/25), Maalinta Madaxweynayaasha (02/17/25), Maalinta Xasuusta ‘Memorial Day’ (05/27/25), Maalinta Xoriyadda (07/04/25), Maalinta Shaqaalaha (09/01/25), Maalinta Mahadnaqa ‘Thanksgiving Day’ (11/27/25), Jimcaha ka dambeeya Maalinta Mahadnaqa (11/28/24) iyo Ciida Masiixiga (12/25/25).

Haddii YCCO ay leedahay xiritaanka xafiiska xaalada degdega ah, waxaan cusbooneysiinaa farriimahayaga telefoonka iyo website-kayaga si aanu kuugu sheegno waxa la sameynayo iyo sida naloola soo xiriirayo:

Goobta uu ku yaalo xafiiskagu waa:

YCCO
807 NE Third Street
McMinnville, OR 97128

Wac khadka bilaashka ah: 855-722-8205, TTY 711, wixii la xiriira helidda luqadda wac 855-722-8205.
Fax-ka: 503-857-0767
Dhanka internet-ka: https://www.yamhillcco.org
Cinwaankaaga boostada:

YCCO
PO Box 5490
Salem, OR 97304

# Lambarrada telefoonka oo muhiim ah

- Faa’iidooyinka caafimaad iyo daryeelka

Wac Adeega Macmiilka YCCO: 855-722-8205. Dadka isticmaala TTY, fadlan wac 711.
Saacadaha: Isniinta ilaa Jicmaha, 8:00 subaxnimo ilaa 5:00 galabnimo.
Waxyaabo dheeraad ah ka ogow qaybta faa'iidooyinka "Caafimaadka Jirka".

- Faa'iidooyinka farmashiyaha
  Adeega Macmiilka Farmashiyaha: 877-216-3644. Dadka isticmaala TTY, wac 711
  Saacadaha: Isniinta ilaa Jicmaha, 8:00 subaxnimo ilaa 5:00 galabnimo.
  Waxyaabo dheeraad ah ka ogow qaybta "Daawooyinka La isku qoro".

- Caafimaadka hab-dhaqanka, ku tiirsanaanta mukhaadaraadka, aalkolada, ama faa'iidooyinka iyo daryeelka daaweynta dhibaatooyinka isticmaalka mukhaadaraadka
  Adeega Macmiilka: 855-722-8205. Dadka isticmaala TTY, fadlan wac 711.
  Saacadaha: Isniinta ilaa Jicmaha, 8:00 subaxnimo ilaa 5:00 galabnimo.
  Waxyaabo dheeraad ah ka ogow qaybta faa'iidooyinka "Daryeelka Caafimaadka Hab-dhaqanka".

- Faa'iidooyinka ilkaha iyo daryeelka
  Adeega Caafimaadka Capitol Dental Care ka wac 800-525-6800. Dadka isticmaala TTY, fadlan wac 711.
  Saacadaha: Isniinta ilaa Jicmaha, 8:00 subaxnimo ilaa 5:00 galabnimo.
  Waxyaabo dheeraad ah ka ogow qaybta faa'iidooyinka "Ilkaha".

- Faa'iidooyinka aragga iyo daryeelka
  Adeega Macmiilka: 855-722-8205. Dadka isticmaala TTY, fadlan wac 711.
  Saacadaha: Isniinta ilaa Jicmaha, 8:00 subaxnimo ilaa 5:00 galabnimo.
  Adeega Macmiilka: 855-722-8205. Dadka isticmaala TTY, fadlan wac 711.

- Gaadiid raacid lacag la'aan ah oo lagu aado daryeelka jirka, daryeelka ilkaha, ama daryeelka caafimaadka hab-dhaqanka.
  Waxaad heli kartaa gaadiid raacid lacag la'aan ah oo lagu aadayo booqashooyinka daryeelka jirka, daryeelka ilkaha, iyo daryeelka caafimaadka hab-dhaqanka. Wac WellRide 844-256-5720 si aad u dejiso gaadiid raacid. Dadka isticmaala TTY, fadlan wac 711.
  Saacadaha: Isniinta ilaa Jicmaha, 7:30 subaxnimo ilaa 6:00 galabnimo. Xarunta wicitaanta ee WellRide way xiran tahay Maalinta U Horeysa Sanadka Cusub, Maalinta Xasuusta 'Memorial Day', Afarta Luulyo, Maalinta Shaqaalaha, Maalinta Mahadnaqa 'Thanksgiving Day', iyo Maalinta Ciida Masiixiga.
  Waxyaabo dheeraad ah ka ogow qaybta "Gaadiid u raacida Daryeelka".

## La xiriir Qorshaha Caafimaadka Oregon

Adeega Macmiilka OHP wuxuu gacan ka geyskan karaa:

- Isbeddelka cinwaanka, lambarka telefoonka, xaalada qoyska ama macluumaadka xaalada kale

- Beddelaada kaarka Aqoonsiga Oregon Health ee luma
- Caawimaad la iska siiyo codsiga ama dib u cusbooneysiinta faa'iidooyinka
- Caawimaad dhanka degaanka ah oo laga helo hawl wadaagaha bulshada

**Sida loola xiriiro Adeega Macmiilka OHP.**

- Wac: 800-699-9075 khadka bilaashka ah (TTY 711)
- Web-ka: www.OHP.Oregon.gov
- Email-ka: Isticmaal email-ka bogga sugan ee https://secureemail.dhsoha.state.or.us/encrypt si email loogu diro OHP.
    - Wixii la xiriira su'aalaha ama isbeddelada ku saabsan kiiskaaga OHP, email u dir Oregon.Benefits@odhsoha.oregon.gov.
    - Wixii la xiriira su'aalaha CCO-yada ama sida loo isticmaalo caafimaadkaaga, email u dir Ask.OHP@odhsoha.oregon.gov.
    - U sheeg OHP magacaaga oo buuxa, taariikhdaada dhalasho, lambarkaaga Aqoonsiga Oregon Health, cinwaankaaga iyo lambarkaaga telefoonka.

# Xuquuqdaada iyo Waajibaadkaaga

Xubin ka tirsan YCCO ahaan waxaad leedahay xuquuq.  Waxaa sidoo kale jira mas'uuliyado ama waxyaabo ay tahay in aad sameyso marka aad hesho OHP.   Haddii aad hayso wax su'aalo ah oo ku saabsan xuquuqda ama waajibaadka ku qoran halkan, Adeega Macmiilka ka wac 855-722-8205.

Waxaad xaq u leedahay in aad gudato xuquuqdaada xubinimo iyada oo aysan jirin jawaab xun ama takoorid.     Waxaad sameyn kartaa cabasho ama tabasho haddii aad dareento in aan xuquuqdaada la ixtiraamin.  Ogow waxyaabo dheeraad oo ku saabsan sameynta cabashooyin oo ku qoran bogga 93.  Waxaad sidoo kale Qareenka Difaaca ee Maamulka Caafimaadka Oregon ka wici kartaa 77-642-0450 (TTY 711). Waxaad ku diri kartaa iyaga email sugan www.oregon.gov/oha/ERD/Pages/Ombuds-Program.aspx.

Waxaa jira wakhtiyo marka dadka da'doodu ka yar tahay 18 jir (dadka yar yar) laga yaabo in ay rabaan ama u baahdaan adeegyada daryeelka caafimaad oo ay iskood u helaan.   Dadka yar yar ee da'doodu tahay 15 jir iyo ka weyn waxay heli karaan daryeelka caafimaadka iyo ilkaha iyada oo aan la haysan oggolaanshaha waalidka.     Si aad u ogaato waxyaabo dheeraad ah, akhri "Xuquuqda Dadka yar yar":   Helidda iyo Oggolaanshaha Daryeelka Caafimaad."  Buug-yarahani wuxuu kuu tilmaamayaa noocyada adeegyo ee dadka yar yar ee jinsi kasta leh iskood u heli karaan iyo sida ay dhici karto in diiwaannadooda caafimaad loo wadaago.  Waxaad ka akhriyi kartaa www.OHP.Oregon.gov. Riix halka ay ku qoran tahay "Xuquuqda dadka yar yar iyo helidda daryeelka." Ama booqo: https://sharedsystems.dhsoha.state.or.us/DHSForms/Served/le9541.pdf

# Xuquuqdaada xubin ka tirsan OHP ahaan.

| Waxaad xaq u leedahay in laguula dhaqmo sidan oo kale |
|---|
| • In laguula dhaqmo si xushmad iyo qadarin ku jirto, iyo tixgelinta waxyaabaha kuu gaarka ah.<br>• In ay daryeel bixiyayaashu ula dhaqmaan sida ay ula dhaqmaan dadka kale ee raadinaya daryeelka caafimaad.<br>• In aad xiriir degan aad la leedahay kooxda daryeelka ee mas'uulka ka ah maamulka daryeelkaaga guud.<br>• In aan hoos laguu dhigin ama aan lagaa fogayn dadka sababta oo ah in ay u sahlanaan doonto in:<br>• Lagu daryeelo,<br>• Lagu ciqaabo, ama<br>• Lagaa dhigo in aad samayso wax aadan rabin in aad samayso. |
| **Waxaad xaq u leedahay in aad hesho macluumaadkan** |
| • Waxyaabo lagu sharxay hab iyo luqad aad fahmi karto. (Fiiri bogga 3)<br>• Waxyaabo, sida buug-gacmeedkani, oo wax kaaga sheegaya CCO-yada iyo sida loo isticmaalo nidaamka daryeelka caafimaadka.<br>• Waxyaabo qoraal ah oo kuu sheegaya xuquuqdaada, waajibaadkaaga, faa'iidooyinkaaga, sida loo helo adeegyo, iyo waxa la sameyn karo marka ay jirto xaalad deg deg ah.<br>• Macluumaadka ku saabsan xaaladaada, daaweynta iyo waxyaabaha beddelka ah, waxa la daboolayo, iyo waxa aan la daboolayn. Macluumaadkan wuxuu kaa caawin doonaa in aad gaarto go'aano wanaagsan oo ku saabsan daryeelkaaga. Hesho macluumaadkan oo ku qoran luqad iyo qaab kuu shaqeynaya.<br>• Diiwaan caafimaad oo la socda xaaladahaaga, adeegyada aad hesho, iyo gudbinta. (Fiiri bogga 12) Waxaad:<br>  ○ Heli kartaa diiwaannadaada caafimaad<br>  ○ Diiwaannadaada caafimaad la wadaagi kartaa daryeel bixiye.<br>• Ogeysiin qoraal ah oo boosta laguugu soo diro diidmada ama isbeddelka gargaarada ka hor inta aysan dhicin. Waxaa dhici karta in aad helin ogeysiin haddii aysan farayn xeerarka federaalka iyo gobolka.<br>• Ogeysiin qoraal ah oo boosta laguugu soo diro oo ku saabsan daryeel bixiyayaasha aanan hadda ka dib ka tirsanayn qorshe caafimaad 'in-network'. In-network wuxuu ka dhigan yahay daryeel bixiyayaasha ama dad takhasus leh oo la shaqeeya YCCO. Fiiri bogga 29)<br>• In haddii ballan la joojiyay laguugu sheego waqtigii loogu talagalay. |
| **Waxaad xaq u leedahay in aad hesho daryeelkan** |

- Daryeelka iyo adeegyada kaa dhiga in aad noqoto udub dhexaadka. Hesho daryeel ku siiya doorasho, madax banaani iyo sharaf. Daryeelkani wuxuu ku saleysnaan doonaa baahiyahaaga caafimaad wuxuuna buuxin doonaa heerarka lagu dhaqmo.
- Adeegyo tixgelin siinaya baahiyahaaga dhaqan iyo luqaddeed oo u dhow halka aad ku nooshahay. Haddii la heli karo, waxaad adeegyada ku heli kartaa goob aan caadi ahayn sida dhanka internet-ka. (Fiiri bogga 68).
- Isku diwida daryeelka, daryeel bulshada ku saleysan, iyo caawimaad la iska siiyo ka gudbida daryeelka kaasi oo ah hab la shaqeynaya dhaqankaaga iyo luqaddaada. Tani waxay kaa caawin doontaa in ay kaa ilaaliso in aad isbitaalka aado ama xarunta.
- Adeegyada loo baahan yahay si loo ogaado xaalada caafimaad ee aad qabto.
- Caawimaada isticmaalka idaamka daryeelka caafimaad. Hel taageerada dhaqan ama luqaddeed ee aad u baahan tahay. (Fiiri bogga 3). Tani waxay noqon kartaa:
    - Turjubaanada daryeelka caafimaadka oo u qalma ama la aqoonsan yahay
    - Shaqaalaha caafimaadka dhaqan ahaaneed oo la aqoonsan yahay.
    - Shaqaalaha caafimaadka bulshada.
    - Dad takhasus u leh caafimaadka dadka isku faca ah ‘peer wellness specialists’,
    - Dad takhasus u leh taageerada dadka isku faca ah.
    - Doulas.
    - Hagayaasha caafimaadka shakhsi ahaaneed.
- Caawimaad laga helo shaqaalaha CCO oo si buuxda loogu tababaray siyaasadaha iyo nidaamyada CCO.
- Adeegyada ka hortagga ee la daboolo. (Fiiri bogga 31).
- Adeegyada dhakhsaha iyo degdega ah oo ah 24 saacadood maalintii, 7 maalmood toddobaadkii iyada oo aan la haysan ansixin ama oggolaansho. (Fiiri bogga 75).
- Isku gudbinta daryeel bixiyayaasha gaarka ah oo loogu talagalay adeegyada la isku duway ee caymiskooda la daboolo ee loo baahan yahay iyada oo lagu saleynayo caafimaadkaaga. (Fiiri bogga 32).
- Taageero dheeraad ah oo laga helo Qareenka Difaaca OHP (fiiri bogga 64).

## Waxaad xaq u leedahay in aad sameyso waxyaabahani

- In aad doorato daryeel bixiyayaashaada oo beddesho doorashooyinkaasi. (Fiiri bogga 27)

- In aad hesho ra'yi labaad. (Fiiri bogga 29)
- In aad lahaato saaxiib ama xubin ka tirsan qoyska, ama qof wax taageera oo yimaada balamahaaga.
- In aad si firfircoon uga qayb qaadato sameynta qorshahaaga daaweyn.
- In aad oggolaato ama diido adeegyada. Ogow waxa dhici kara ee ku saleysan go'aankaaga. (Adeeg ay maxkamaddu amartay lama diidi karo.)
- U gudbinta naftaada ee adeegyada caafimaadka hab-dhaqanka ama qorshaynta qoyska iyada oo aan la haysan oggolaansho ka socda daryeel bixiye.
- In aad sameyso qoraal doonista daaweyn. Tani waxay ka dhigan tahay rabitaankaaga in aad oggolaato ama diido daaweyn caafimaad, qalliin, ama caafimaadka hab-dhaqanka. Waxay sidoo kale ka dhigan tahay in aad sameyso dardaaranka caafimaad oo bixiso awoodda qareenka oo loogu talagalay daryeelka caafimaad, ee ku qoran ORS 127. (Fiiri bogga 88)
- In aad sameyso cabasho ama codsato rafcaan. In aad jawaab ka hesho YCCO marka aad sameyso tani. (Fiiri bogga 93)
  - Ka codsato gobolka in uu dib u eego haddii aadan ku raacsanayn go'aanka YCCO. Tani waxaa loo yaqaan dacwad dhageysi.
- Helida turjubaanada daryeelka caafimaadka oo u qalma ama la aqoonsan yahay oo loogu talagalay luqadda aan ahayn Ingiriisiga iyo luqadda calaamadaha. (Fiiri bogga 3)

## Waajibaadkaaga xubin ka tirsan OHP ahaan

### Waa in aad dadka kale ula dhaqanto habkan

- In aad shaqaalaha YCCO, daryeel bixiyayaasha, iyo dadka kale u la dhaqanto si ixtiraam leh.
- In aad daacad u ahaato daryeel bixiyayaashaada si ay kuu siin karaan daryeelka ugu wanaagsan.

### Waa in aad macluumaadkani u soo sheegto OHP

Haddii aad hesho OHP, waa in aad soo sheegto isbeddelada qaarkood ee ku saabsan adiga iyo qoyskaaga. Warqadaada oggolaanshaha OHP ayaa kuu sheegaysa waxa ay tahay in aad soo sheegto iyo goorta.

Waxaad isbeddelada ku soo sheegi kartaa mid ka mid ah siyaabahani:

- Isticmaal koontadaada dhanka internet-ka ee ONE https://one.oregon.gov/ to report changes online.

- Booqo mid kasta oo ka mid ah Xafiiska Waaxda Adeega Dadweynaha ee Oregon ee ku yaala Oregon. Waxaad liiska xafiisyada ka heli kartaa: https://www.oregon.gov/odhs/Pages/office-finder.aspx
- La xiriir OHP degaanka-hawl wadaagaha bulshada oo la aqoonsan yahay. Waxaad hawl wadaagaha bulshada ka heli kartaa: https://healthcare.oregon.gov/Pages/find-help.aspx
- Maalmaha shaqada Adeega Macmiilka OHP ka wac 1-800-699-9075 (TTY 711)
- Fax u dir 503-378-5628
- Boosta ugu dir ONE customer Service Center, PO Box 14015, Salem, OR 97309

Waxaa jira xuquuqo iyo waajibaadyo kale oo aad leedahay xubin ka tirsan OHP ahaan. OHP ayaa wadaagtay kuwani markii aad codsatay. Waxaad nuqul ka heli kartaa https://www.oregon.gov/odhs/benefits/pages/default.aspx, halka la sii gelayo ee hoos timaada "Xuquuqda iyo Waajibaadka ".

## Waa in aad gacan uga geysataa daryeelkaaga siyaabahani

- In aad doorato ama gacan ka geysato doorashada daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah ama xaruntaada caafimaadka.
- In aad hesho baaritaannada sanadlaha ah, booqashooyinka fayo-qabka, iyo daryeelka ka hortagga si lagaaga dhigo qof caafimaad qaba.
- In aad ballamaha timaado waqtiga loogu talagalay. Haddii aad soo daahi doonto, hore u sii wac ballantaada haddii aadan imaan karin.
- In aad kaararkaaga Aqoonsiga ee caafimaad u soo qaadato ballamaha. In aad u sheegto xafiiska in aad leedahay OHP iyo wixii caymis caafimaad ee kale ah. La socodsii iyaga haddii aad ku dhaawacantay shil.
- In aad ka caawiso daryeel bixiyahaaga sameynta qorshahaaga daaweyn. In aad raacdo qorshaha daawo siduu heshiisku ahaa oo aad si firfircoon uga qayb qaadato daryeelkaaga caafimaad.
- Raac tilmaamaha ka socda daryeel bixiyayaashaada ama codso doorasho kale.
- Haddii aadan fahmin, weydiiso su’aalo ku saabsan xaaladaha, daaweynta, iyo arrimaha kale ee khuseeya daryeelka.
- In aad isticmaasho macluumaadka aad ka hesho daryeel bixiyayaasha iyo kooxaha daryeelka si lagaaga caawiyo in aad gaarto go’aano laga warqabo oo ku saabsan daaweyntaada.
- In aad u isticmaasho daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah baaritaanada iyo baahiyaha daryeel ee kale, haddii aysan ka ahayn xaalad degdeg ah.

- In aad isticmaasho dad ku takhasus leh 'in-network' ama la shaqeeya daryeel bixiyahaaga wixii la xiriira oggolaanshaha haddii aad rabto ama u baahan tahay qof aan la shaqeynayn YCCO.
- In aad sida ku habboon u isticmaasho adeegyada dhakhsaha ama degdega ah. In aad daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah ugu sheegto muddo 72 saacadood gudahood ah haddii aad isticmaasho adeegyadani.
- In aad daryeel bixiyayaasha ka caawiso in ay helaan diiwaankaaga caafimaad. Waxaad saxiixi kartaa foom loogu talagalay tani.
- In aad u sheegto YCCO haddii aad qabto wax dhibaato ah, cabashooyin ah, ama u baahan tahay caawimaad.
- In aad bixiso lacagta aysan caymiskooda bixin OHP.
- Haddii aad hesho lacag dhaawac dartiis, ka caawi YCCO in la siiyo lacagta aan ku siinay dhaawacaasi dartiis.

# Xubnaha ka tirsan Hindida Maraykanka iyo Dhaladka Alaska

Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alaska waxay xaq u leeyihiin in ay doortaan meesha ay ka helayaan daryeelka. Waxay isticmaali karaan daryeel bixiyayaasha aasaasiga ah iyo daryeel bixiyayaasha kale ee aan qayb ka ahayn CCO-yaga, sida:

- Xarumaha caafimaad qabka qabiilka.
- Xarumaha caafimaadka ee Adeegyada Caafimaadka Hindida Maraykanka ah (IHS). Xarun caafimaad ka hel https://www.ihs.gov/findhealthcare/ .
- Ururka Dhaqancelinta Hindida Maraykanka ah ee Northwest (NARA). Ogow waxyaabo dheeraad ah ama xarun caafimaad ka hel https://www.naranorthwest.org

Waxaad isticmaali kartaa xarumaha kale ee caafimaad ee ka tirsan nidaamkayaga. Ogow waxyaabo dheeraad oo ku saabsan gudbinta iyo oggolaanshaha hore oo ku qoran (bogga 28).

**Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alaska uma baahna in la gudbiyo ama oggolaansho si ay daryeel uga helaan daryeel bixiyayaashani.** Daryeel bixiyayaashani waa in ay biilka u diraan YCCO. Waxaanu kaliya bixin doonaa lacagta adeegyada caymiskooda la daboolay. Haddii adeeg u baahan yahay oggolaansho, daryeel bixiyuhu waa in uu codsadaa marka hore.

Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alaska waxay xaq u leeyihiin in waqti kasta ka baxaan YCCO oo ka dhigaan Kharashka Adeega 'Fee-for-Service' (FFS) ee OHP in ay bixiso lacagta daryeelkooda. Ogow waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan ka bixida ama beddelaada CCO-gaaga oo ku qoran bogga 84.

Haddii aad rabto in YCCO ay ogaato in aad tahay Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alaska, Adeega Macmiilka OHP kala xiriir 800-699-9075 (TTY 711) ama gal koontadaada internet-ka ee ONE.Oregon.gov si aad u soo sheegto tani.

Waxaa dhici karta in laguu qoondeeyo xaalada qabiilka oo loo qalmo haddii mid ka mid ah kuwa soo socdaa uu run yahay. Su'aalahani sidoo kale waxaa la isku weydiiday codsiga OHP:

- Aad tahay xubin ka diiwaan gashan qabiil ay Dawladda Federaalku Aqoonsan tahay ama tahay qof saami ku leh Shirkadda Gobolka oo Dhaladka Alaska leeyihiin.
- Aad adeegyo ka hesho Adeegyada Caafimaadka Hindida, Xarumaha Caafimaadka Qabiilka, Xarumaha Caafimaadka Hindida Maraykanka ah ee Magaalooyinka.
- Aad leedahay waalid ama awoowe/ayeeyo ka diiwaan gashan qabiil ay Dawladda Federaalku Aqoonsan tahay ama tahay qof saami ku leh Shirkadda Gobolka oo Dhaladka Alaska leeyihiin ama Tuulo.

## Xubnaha cusub ee isla markiiba u baahan adeegyo

Xubnaha ku cusub OHP ama YCCO waxaa dhici karta in ay sida ugu dhakhsaha badan ugu baahdaan daawooyinka la isku qoro, agab, waxyaabo ama adeegyo kale. Haddii aadan arki karin daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah (PCP) ama dhakhtarkaaga daryeelka aasaasiga ee ilkaha (PCD) 30-kaaga maalmood ee ugu horreeya ee aad la leedahay YCCO-ga:

- Inta aad sugayso ballan, waxaad Isku duwida Daryeelka ka wici kartaa 833-257-2191. Waxay kaa caawin karaan in aad hesho daryeelka aad u baahan tahay. Isku duwida daryeelku waxay caawin kartaa xubnaha ka tirsan OHP ee leh Medicare, sidoo kale. (Fiiri qaybta Isku duwida Daryeelka si aad u ogaato waxyaabo dheeraad ah)
  - Haddii aad noqonayso isku diiwaan geliyaha Medicare oo cusub, fiiri qaybta Xubnaha leh OHP iyo Medicare si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.
- Ballan sida ugu dhakhsaha badan ula sameyso PCP-gaaga. Waxaad magacooda iyo lambarkooda ka heli kartaa kaarkaaga Aqoonsiga YCCO.
- Adeega Macmiilka ka wac 855-722-8205 haddii aad hayso su'aalo oo aad rabto in aad wax ka ogaato faa'iidooyinkaaga. Waxay kaa caawin karaan waxa aad u baahan tahay.

## Daryeel bixiyayaasha aasaasiga ah (PCP-yada)

**Daryeel bixiye aasaasi ah waa ka aad arki doonto booqashada caadiga ah, daawooyinka la isku qoro iyo daryeelka. Waxaad dooran kartaa mid, ama anaga ayaa kaa caawin doona in aad mid doorato.**

Daryeel bixiyayaasha aasaasiga ah (PCP-yadu) waxay noqon karaan dhakhaatiir, kalkaalisooyinka sare iyo kuwo dheeraad ah. Waxaad xaq u leedahay in aad doorato PCP ka jira nidaamka YCCO gudihiisa. Haddii aadan ku dooran daryeel bixiye muddo 90 maalmood gudahood ah ee noqoshada xubin, YCCO ayaa kuu qoondayn doonta xarun caafimaad ama kuu xuli doonta PCP. YCCO-ga ayaa PPC-gaaga la socodsiin doonta qoondeynta oo kuu soo diri doonta warqad ay la socdaan macluumaadka daryeel bixiyahaaga.

Si aad u doorato PCP-gaaga:

- Mid ka soo dooro Buuga Tilmaamaha Daryeel Bixiyaha ee ku jira website-ka halkan https://yamhillcco.org/members/find-a-provider/
- Adeega Macmiilka ka wac 855-722-8205 ama TTY 711.

Si aad beddesho PCP-gaaga:
Adiga iyo wakiilkaaga ayaa beddeli kara PCP-gaaga:

- Waqti kasta
- Haddii lagaa saaro xarun caafimaad ama daryeel bixiye

Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan beddelaada ama rabto in aad beddesho PCP-gaaga waxaad wici kartaa Adeega Macmiilka si aad u hesho caawimaad 855-722-8205 ama TTY 711. Marka aad wacdo si aad u beddesho PCP-gaaga, PCP-ga cusub waa mid shaqeynaya maalintaasi. Ka dib marka aad doorato PCP, waxaanu boosta kuugu soo diri doonaa kaarka cusub ee Aqoonsiga oo muujinaya magaca PCP-ga ama Xarunta caafimaadka ee aad daarato.

PCP-gaagu wuu kula shaqeyn doonaa si uu kaaga caawiyo in aad caafimaad qabto intii suurtagal ah. Waxay la socdaan dhammaan baahiyahaaga daryeelka aasaasiga ah iyo kuwa gaarka ah. PCP-gaagu wuxuu:

- Baran doonaa adiga iyo taariikhdaada caafimaad.
- Bixin doonaa daryeelkaaga caafimaad.
- Diiwaannadaada caafimaad ka dhigi doonaa kuwo cusub oo hal meel la iskugu keenay.

PCP-gaaga ayaa kuu gudbin doona qof takhasus leh ama ku dhigi doona isbitaal haddii loo baahdo.

Xubin kasta oo ka tirsan qoyskaaga oo ku jira OHP waa in uu doortaa PCP. Qof kastaa wuxuu yeelan karaa PCP kala duwan.

**Ha ilaawin in aad YCCO weydiiso waxyaabo ku saabsan dhakhtarka ilkaha, daryeel bixiyaha caafimaadka dhimirka iyo farmashiyaha.**

Si aad u doorato dhakhtarkaaga ilkaha, daryeel bixiyahaaga caafimaadka dhimirka, iyo farmashiyahaaga:

- Mid ka soo dooro Buuga Tilmaamaha Daryeel Bixiyaha ee YCCO ee ku jira website-ka halkan https://yamhillcco.org/members/find-a-provider/.
- Adeega Macmiilka ka wac 855-722-8205 ama TTY 711.

YCCO ma qoondeyso dhakhtarka daryeelka aasaasiga ee ilkaha. Si aad u doorato dhakhtarka ilkaha oo cusub, mid ka soo dooro buuga tilmaamaha halkan https://yamhillcco.org/members/find-a-provider/ ama Adeega Macmiilka Ilkaha ka wac 800-525-6800 ama TTY 711 waxayna kaa caawin doonaan in aad hesho dhakhtarka ilkaha. Waxaad aadi doontaa PCD-gaaga inta badan baahiyahaaga daryeelka ilkaha ah. PCD-gaaga ayaa kuu diri doona qof takhasus leh haddii aad u baahan tahay in aad mid aado.

PCD-gaagu waa mid muhiim ah sababta oo ah:

- Waxaad tahay halka u horreysa ee lala soo xiriirayo marka aad u baahan tahay daryeelka ilkaha.
- Waxay maamulaan adeegyadaada caafimaadka ilkaha iyo daaweynta.
- Isku duba ridaan daryeelkaaga gaarka ah.

Fadlan Adeega Macmiilka ka wac 855-722-8205 Isniinta ilaa Jicmaha, 8:00 subaxnimo ilaa 5:00 galabnimo. (TTY 711) haddii aad jeclaan lahayd in aad beddesho PCP-gaaga, PCD-gaaga ama daryeel bixiyayaasha kale. Waxaad bilaabi kartaa in aad aragto PCP-gaaga, PCD-gaaga ama daryeel bixiyayaasha kale maalinta la sameeyo isbeddelkani.

## Daryeel bixiyayaasha ka tirsan qorshe caafimaad 'in-network providers'

YCCO waxay la shaqeysaa daryeel bixiyayaasha qaarkood, laakiin dhammaantood maaha. Daryeel bixiyayaasha aan la shaqeyno waxaa loo yaqaan 'in-network' ama adeeg bixiyayaasha ka qayb qaadanaya. Daryeel bixiyayaasha aynaan la shaqeyn waxaa loo yaqaan daryeel bixiyayaasha ka baxsan degaanka caymiska laga bixiyo 'out-of-network'. Waxaa dhici karta in aad aragto daryeel bixiye ka baxsan degaanka caymiska laga bixiyo 'out-of-network' haddii loo baahdo, laakiin waa in ay la shaqeeyaan Qorshaha Caafimaadka Oregon.

Waxaa dhici karta in aad aragto daryeel bixiye ka baxsan degaanka caymiska laga bixiyo 'out-of-network' oo loogu talagalay daryeelka aasaasiga ah haddii aad:

- Beddelayso CCO-yada ama ka wareegayso Kharashka Adeega 'Fee-for-Service' (FFS) ee OHP oo u soo wareegayso CCO (fiiri bogga 28)
- Tahay Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alaska (fiiri bogga 26)

## Buuga tilmaamaha daryeel bixiyaha

Waxaad PCP-gaaga, PCD-gaaga, ama daryeel bixiyayaasha kale ka soo dooran kartaa buuga tilmaamaha daryeel bixiyaha oo laga helo: https://yamhillcco.org/members/find-a-provider/. Waxaad sidoo kale wici kartaa Adeega Macmiilka si aad u hesho caawimaad, buuxin kartaa foomka xiriirka guud ee dhanka internet-ka halkan https://yamhillcco.org/contact-us/, ama email u dir YCCO info@yamhillcco.org.

Halkan waxaa ku qoran tusaalooyinka macluumaad aad ka heli karto Buuga Tilmaamaha Daryeel Bixiyaha:

- Haddii daryeel bixiye qaadanayo bukaano cusub.
- Nooca daryeel bixiye (caafimaad, ilkaha, caafimaadka hab-dhaqanka, farmashiye, iwm).
- Sida loola xiriiro.
- Kala doorashooyinka daryeelka muuqaalka iyo telefoonka (telehealth).
- Caawimaada luqaddeed (oo ay ku jiraan turjumaado iyo fasiraado).
- Qorshayaal loogu talagalay dadka qaba naafanimada jireed.

Waxaad heli kartaa nuqulka warqada ee buuga tilmaamaha. Waxaad heli kartaa iyada oo u qoran qaab kale (sida luqaddo, farta waaweyn, ama farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee Braille) oo lacag la'aan ah. Adeega Macmiilka ka wac 855-722-8205.

## Ballan sameyso

**Waxaad ballan la sameysan kartaa daryeel bixiyahaaga isla marka aad doorato mid.** PCP-gaagu waa inuu noqdaa qofka u horreeya ee aad wacayso marka aad u baahan tahay daryeel. Waxay kuu samayn doonaan ballan ama lagaa kaalmeyn doonaa sidii aad u heli lahayd daryeelka aad u baahan tahay. PCP-gaagu wuxuu sidoo kale kuu gudbin karaa adeegyo ama ilo kale oo caymiskooda la daboolo. U toos ah u wac iyaga si aad ballan u sameysato.

Haddii aad ku cusub tahay PCP-gaaga, ballan sameyso si laguu baaro. Sidani waxay ogaan karaan waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan adiga iyo taariikhdaada caafimaad ka hor inta aadan yeelan dhibaato ama walwal. Waxay sidaan kaa caawinaysaa in ay dibu dhac ku timaad marka u horreyso aad isticmaalayso faa'idooyinkaaga.

Ballantaada ka hor, qor:

- Su'aalaha laga yaabo in aad u hayso PCP-gaaga ama iyo daryeel bixiyayaasha kale
- Dhibaatooyin caafimaad ah ee qoysku leeyahay.
- Daawooyinka la isku qoro, oo ay ku jiraan daawooyinka meel kasta laga iibsan karo iyo fiitamiinka ama daawooyinka beddelka ah ee aad qaadato.

Soo wac ballanta waqtiga saacadaha shaqada ee xafiiska oo u sheeg:

- In aad tahay xubin ka tirsan YCCO.
- Magacaaga iyo lambarka Aqoonsiga YCCO.
- Nooca ay tahay ballan aad u baahan tahay.
- Haddii aad u baahan tahay turjubaan iyo luqadda aad u baahan tahay.

La socodsii iyaga haddii aad jiran tahay oo aad maalintaasi doonayso in aad aragto qof.

**Waxaad heli kartaa gaadiid raacid lagu aadayo ballantaada.** Ogow waxyaabo dheeraad oo ku saabsan gaadiid raacid lacag la'aan ah oo lagu aadayo daryeelka oo ku qoran bogga 65.

## Ballamaha laga maqnaaday

Isku day in aadan ka maqnaan ballamaha. Haddii aad u baahato in aad ka maqnaato mid, wac PCP-gaaga oo isla markiiba jooji. Waxay kuu dejin doonaan booqasho kale. Haddii aadan xafiiska daryeel bixiyahaaga ugu soo sheegin waqti hore, waxaa dhici karta in aysan oggolaanin in ay mar kale ku arkaan.

**Daryeel bixiye kastaa wuxuu leeyahay xeerar u gaar ah oo ku saabsan ballamaha laga maqnaaday. Wax ka weydii xeerarkooda.**

## Beddelaada PCP-gaaga

Waqti kasta ayaad beddeli kartaa PCP-gaaga.

Adiga iyo wakiilkaaga ayaa beddeli kara PCP-gaaga:

- Waqti kasta
- Haddii lagaa saaro xarun caafimaad ama daryeel bixiye

Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan beddelaada ama rabto in aad beddesho PCP-gaaga waxaad wici kartaa Adeega Macmiilka si aad u hesho caawimaad 855-722-8205 ama TTY 711. Marka aad wacdo si aad u beddesho PCP-gaaga, PCP-ga cusub waa mid shaqeynaya maalintaasi. Ka dib marka aad doorato PCP, waxaanu boosta kuugu soo diri doonaa kaarka cusub ee Aqoonsiga oo muujinaya magaca PCP-ga ama Xarunta caafimaadka ee aad daarato.

### Isbeddelada daryeel bixiyayaasha YCCO

Waxaanu kuu sheegi doonaa marka mid ka mid ah daryeel bixiyayaashaada caadiga ah uu joojiyo la shaqeynta YCCO. Waxaad heli doontaa warqad 30 maalmood ka hor inta uusan isbeddelku dhicin. Haddii isbeddelkan horeba loo sameeyay, waxaanu warqad kuugu soo diri doonaa muddo 30 maalmood gudahood ah isbeddelka ka dib.

## Ra'yiga labaad

Waxaad xaq u leedahay in aad hesho ra'yi labaad oo ku saabsan xaaladaada ama daaweyntaada. Ra'yiga labaad waa kuwo lacag la'aan ah. Haddii aad rabto ra'yi labaad, wac Adeega Macmiilka YCCO oo noo sheeg in aad rabto in aad aragto daryeel bixiye kale.

Haddii uusan jirin daryeel bixiye u qalma oo ka tirsan nidaamkayaga oo aad rabto in aad aragto daryeel bixiye ka baxsan nidaamkayaga si aad u hesho ra'yi labaad, la xiriir adeega macmiilka YCCO si aad u hesho caawimaad. Waxaanu qorsheyn doonaa ra'yiga labaad iyada oo lacag la'aan ah.

## Ra'yi ururin ku saabsan caafimaadkaaga

Wax yar ka dib marka aad isqorto iyo haddii aad yeelato isbeddel la xiriira caafimaadka, YCCO waxaa dhici karta in ay kuu soo dirto ra'yi ururin ku saabsan caafimaadkaaga. Ra'yi ururintan waxaa loo yaqaan Qiimeynta Khatarta Caafimaad.

Waxaad ra'yi ururinta ku buuxin kartaa boosto ahaan ama telefoon ahaan. Waxaad ra'yi ururinta YCCO ee ku saabsan Qiimeynta Khatarta Caafimaad ka heli kartaa dhanka internet-ka https://yamhillcco.org/members/documents-and-forms/ ama wac 833-257-2191 si aad u yeelato xubin ka tirsan kooxda isku duwida daryeelka oo kaa caawiya buuxinta.

Ra'yi ururintu waxay weydiinaysaa su'aalo ku saabsan caafimaadkaaga guud iyada oo hadafku yahay in la iska caawiyo yarenta khataraha caafimaad, joogteynta caafimaadka, iyo ka hortagga cudurka.

Ra'yi ururintu waxay wax kaa weydiinaysaa:

- Helitaankaaga cunto iyo guri.
- Caadooyinkaaga (sida jimicsiga, caadooyinka wax cunista, iyo haddii aad sigaar cabto ama cabto aalkolo).

- Sida aad dareemayso (si loo arko in aad leedahay niyad jab ama u baahan tahay daryeel bixiyaha caafimaadka dhimirka).
- Fayo-qabkaaga guud, caafimaadkaaga ilkaha iyo taariikhdaada caafimaad.
- Luqaddaada koowaad.
- Baahiyaha daryeelka caafimaad oo gaar ah oo kasta, sida uur lahaanshaha halista sare leh, xaaladaha caafimaad ee soo jireenka, xanuunka caafimaadka dhimirka, iyo naafanimada, iwm.
- Haddii aad rabto taageero aad ka hesho kooxda isku duwida daryeelka.

Jawaabahaagu waxay naga caawiyaan in aan ogaano:

- Haddii aad u baahan tahay wax baaritaano caafimaad ah, oo ay ku jiraan baaritaanada indhaha ama ilkaha.
- Haddii aad leedahay baahiyaha daryeelka caafimaad oo joogto ah ama gaar ah.
- Xaaladahaaga caafimaad ee soo jireenka ah.
- Haddii aad u baahan tahay adeegyada iyo taageerada daryeelka muddada fog
- Walwalka dhanka ammaanka.
- Dhibaatooyinka aad ku qabi karto helitaanka daryeelka.
- Haddii aad caawimaad dheeraad ah uga baahan yahay Isku duwida Daryeelka. Fiiri bogga 32 wixii la xiriira Isku duwida Daryeelka.

Xubin ka tirsan kooxda isku duwida daryeelka ayaa eegi doona ra'yi ururintaada. Wuu ku soo wici doonaa si uu kaala hadlo baahiyahaaga oo kaa caawin doonaa in aad fahamto faa'iidooyinkaaga.

Haddii aynaan helin ra'yi ururintaada, waan la xiriiri doonaa si gacan looga siiyo xaqiijinta in lagu dhammeystiray muddo 90 maalmood gudahood ah ee diiwaangelinta, ama ka soo horreysa haddii loo baahdo. Haddii aad rabto in aan kuu soo dirno ra'yi ururin waxaad Adeega Macmiilka YCCO ka wici kartaa 855-722-8205, waxaanan kuu soo diri doonaa mid.

Ra'yi ururintaada waxaa lala wadaagi doonaa dhakhtarkaaga ama daryeel bixiyayaasha kale si loo yareeyo inta jeer ee lagu weydiiyo su'aalahan. Wadaagista ra'yi ururintaada waxay sidoo kale gacan ka geysataa isku duwida daryeelkaaga iyo adeegyadaada.

## Xubnaha uurka leh

Haddii aad uur leedahay, OHP waxay bixisaa adeegyo dheeraad ah si adiga iyo ilmahaaga looga caawiyo in aad caafimaad qabtaan. Marka aad uurka leedahay, YCCO ayaa kaa caawin karta in aad hesho daryeelka aad u baahan tahay. Waxay sidoo kale dabooli kartaa caymiska dhalmadaada iyo daryeelkaaga muddo sanad ah ka dib uur lahaanshahaaga. Waxaanu dabooli doonaa caymiska faa'iidooyinka uur lahaanshaha muddo sanad buuxa ah.

Halkan waxaa ku qoran waxa aad u baahan tahay in aad sameyso marka aad ogaato in aad uur leedahay:

- ☐ **U sheeg OHP in aad uur leedahay isla marka aad ogaato.** Wac 800-699-9075 (TTY 711) ama gal koontadaada internet-ka ee ONE.Oregon.gov.
- ☐ **U sheeg OHP taariikhda dhalmadaada.** Ma aha in aad ogaato taariikhda saxda ah hadda. Haddii aad diyaar u tahay in aad dhasho, isla markiiba na soo wac.
- ☐ **Wax naga weydii faa'iidooyinkaaga uur lahaanshaha.** YCCO waxay leedahay waxyaabaha dhanka waxbarashada, oo loogu talagalay xubnaha uurka leh. Maamulka Daryeelka ayaa kaa caawin doona in aad hesho waxyaabahani. Wac Adeega Macmiilka oo codso in aad la hadasho iyaga.
- ☐ **Doorashooyinka Daryeelka Uurka** Waxaad THW Doula ama Umuliso ka heli kartaa buuga tilmaamaha daryeel bixiyaha halkan https://yamhillcco.org/members/find-a-provider/ waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan THW-yada oo ku jira website-kayaga https://yamhillcco.org/community-programs/traditional-health-workers/.

Ka dib marka uur lahaanshahaagu dhamaado:

- ☐ **Wac OHP ama ka codso isbitaalka in uu ogeysiinta ilmaha cusub ee dhasha u soo diro OHP.**
  OHP ayaa bixin doona caymiska ilmaha laga soo bilaabo dhalashada. Ilmahaagu wuxuu sidoo kale yeelan doonaa YCCO.
- ☐ **Hel booqashada guriga ee kalkaalisada oo lala leeyahay barnaamijka Family Connects Oregon.** Waa barnaamijka booqashada guriga ee kalkaalisada oo lacag la'aan u ah dhammaan qoysaska haysta carruurta cusub ee dhalata. Kalkaaliso ayaa kuu iman doonta si aad u hesho baaritaan, talooyinka ilmaha cusub ee dhasha, iyo ilo.

# Ka hortagga Dhibaatooyinka Caafimaad waa muhiim

Waxaan rabnaa in laga hortaggo dhibaatooyinka caafimaad inta aanay dhicin ka hor. Tani waxaad ka dhigi kartaa tani qayb muhiim ah oo ka mid ah daryeelkaaga. Fadlan hel baaritaanada caafimaad iyo ilkood oo joogto ah si loo ogaado sida uu caafimaadkaagu yahay.

Tusaalooyinka qaarkood ee adeegyada ka hortagga:

- Irbadaha lagu duro carruurta iyo dadka waaweyn
- Baaritaannada ilkaha iyo nadiifinta
- Baaritaanada naasaha (raajatada naasaha)
- Baaritaanka ilmo galeenka
- Daryeelka uurka iyo ilmaha cusub ee dhasha
- Baaritaannada fayo-qabka
- Baaritaanka kansarka qanjidhka manida ee ragga

- Baaritaannada sanadlaha ah
- Baaritaanka daryeelka ka hortagga 'well-child'

Af caafimaad leh wuxuu sidoo kale wadnahaaga iyo jirkaaga ka dhigaa mid caafimaad qaba.

Haddii aad hayso wax su'aalo ah, fadlan naga soo wac 855-722-8205, ama 711 (TTY).

## Hel caawimaad la xiriirta habeynta daryeelka aad la leedahay Isku duwida Daryeelka.

YCCO waxay gacan ka geysan kartaa habeynta daryeelkaaga. YCCO waxay leedahay shaqaale qayb ka ah kooxdaada isku duwida daryeelka. Shaqaalaha YCCO waxaa ka go'an ka taageerida xubnaha ee baahiyahooda daryeel waxayna kaa caawin karaan in aad hesho daryeelka caafimaadka jirka, ilkaha, hab-dhaqanka iyo bulshada meesha iyo goorta aad u baahan tahay.

Waxaa dhici karta in aad Isku duwida Daryeelka ka hesho daryeel bixiyayaasha aasaasiga ee bukaanka ku saleysan (PCPCH), daryeel bixiyaha aasaasiga ah, YCCO, ama kooxaha kale ee daryeelka aasaasiga ah. Adiga, daryeel bixiyayaashaada ama qof adiga kuu hadlaya ayaa wax ka weydiin kara Isku duwida Adeega sabab kasta ha aheetee, gaar ahaan haddii aad leedahay baahi daryeel oo cusub ama baahiyahaaga oo aan la buuxin. Waxaad wici kartaa lambarka hoos ku qoran ama booqo https://yamhillcco.org/members/benefits-and-rights/ wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan Isku duwida Daryeelka.

## Hadafka Isku duwida Adeega waa in caafimaadkaaga guud laga dhigo mid wanaagsan.

YCCO waa in ay leedahay nidaamyo jira oo naga caawinaya in aan helno baahiyahaaga daryeelka caafimaad. Waxaan kaa caawin doonaa in aad la wareegto mas'uuliyada caafimaadkaaga iyo fayo-qabkaaga. Kooxdaada isku duwida daryeelku waxay:

- Kaa caawin doontaa in aad fahamto faa'iidooyinkaaga iyo sida ay u shaqeeyaan.
- Isticmaali doontaa barnaamijyada daryeelka si ay kaaga caawiyaan in aad maareyso xaaladaaha caafimaad ee soo jireenka ah sida sonkorowga, cudurada wadnaha iyo neefta.
- Gacan ka geysan doontaa dhibaatooyinka caafimaadka hab-dhaqanka iyo dhibaatada isticmaalka mukhaadaraadka.
- Kaa caawin doontaa in aad hesho siyaabo lagu helo adeegyada iyo ilaha saxda ah si loo xaqiijiyo in aad dareento ku qanacsanaan, badbaado, iyo in lagu daryeelay.
- Kaa caawin doontaa in aad aqoonsato dadka ka tirsan noloshaada ama bulsho noqon karta taageero.
- Kaa caawin doontaa in aad doorato daryeel bixiye aasaasi ah (PCP).
- Ku siin doontaa daryeel iyo talo si fudud loo raaci karo.
- Kaa caawin doontaa dejinta ballamaha caafimaadka iyo baaritaanada.
- Kaa caawin doontaa dejinta gaadiidka lagu aadayo ballamaha dhakhtarkaaga.
- Kaa caawin doontaa u wareegida daryeelkaaga marka loo baahan yahay.
- Kaa caawin doontaa in aad daryeel ka hesho daryeel bixiyayaasha gaarka.

- Kaa caawin doontaa xaqiijinta in daryeel bixiyayaashaadu uu midba midka kale kala hadlo baahiyahaaga daryeelka caafimaad.
- Kaa caawin doontaa sameynta qorshe daryeel oo lagula leeyahay oo buuxinaya baahiyahaaga caafimaad.

Kooxdaada isku duwida daryeelka ayaa kaa caawin karta in aad raadiso oo aad hesho ilaha kale ee bulshadaada, sida caawimaada loogu talagalay baahiyaha aan caafimaadka ahayn. Tusaalooyinka qaarkood waa:

- Iska caawinta helida guri.
- Iska caawinta ijaarka iyo adeegyada ‘utilities’.
- Adeegyada nafaqada.
- Gaadiid raacida.
- Tabarada iyo fasallada.
- Taageerada qoyska.
- Adeegyada bulshada.
- Qalabka loogu talagalay xaaladaha cimilada aadka u daran.

## Ka wada shaqeynta daryeelkaaga

Kooxdaada isku duwida daryeelka ayaa si dhow kuula shaqeyn doonta. Kooxdan waxay yeelan doontaa dad kala duwan oo ka wada shaqeyn doona sidii loo buuxin lahaa baahiyahaaga, sida daryeel bixiyayaasha, dad takhasus leh, iyo barnaamijyada bulshada ee aad la shaqeyso. Kooxdu waxay kugu xiri doontaa ilaha taageerada bulshada iyo bulsho ahaaneed oo ay dhici karto in uu ku caawiyaan. Shaqada kooxdaada daryeelku waa in la xaqiijiyo in dadka sax ah qayb ka yihiin daryeelkaaga si lagaaga caawiyo in aad gaarto hadafkaaga. Waxaan dhammaanteen ka wada shaqeyn doonaa sidii laguu taageeri lahaa.

## Waxaa dhici karta in aad u baahato qorshe daryeel

Adiga iyo kooxdaada daryeelka ayaa go’aamin doona haddii qorshe daryeel loo baahan yahay. Qorshahani wuxuu gacan ka geysan doonaa in la buuxiyo baahiyahaaga iyo in lala sameeyay adiga, kooxdaada daryeelka iyo daryeel bixiyayaasha. Qorshahaagu wuxuu qori doonaa taageerada iyo adeegyada loo baahan yahay si lagaaga caawiyo in aad gaarto hadafkaaga. Qorshahani wuxuu wax ka qabanayaa baahiyaha caafimaadka, ilkaha, dhaqanka, horumarinta, hab-dhaqanka iyo bulsho si aad u hesho natiijooyin caafimaad iyo fayo-qab oo wanaagsan.

Qorshahani waxaa dib loo eegi doonaa oo la cusbooneysiin doonaa ugu yaraan sanadkiiba, iyo hadba sida baahiyahaagu isku beddelaan ama haddii codsato dib u eegis iyo cusbooneysiin. Adiga, wakiilkaaga iyo daryeel bixiyayaashaadu waxaad heli doontaan nuqulka qorshahaaga daryeelka.

Adiga, wakiilka la oggol yahay ama daryeel bixiye waxaad codsan kartaa nuqulka ama codsan kartaa horumarinta qorshe daryeel adiga oo isku duwahaaga daryeelka, Waaxda Maamulka Daryeelka ka wacaya 833-257-2191 ama email u diraya caremanagement@yamhillcco.org.

## Saacadaha Isku duwida Daryeelka iyo macluumaadka la iskala soo xiriirayo

Adeegyada Isku duwida Daryeelka waxaa la heli karaa Isniinta ilaa Jicmaha 8:00 subaxnimo ilaa 5:00 galabnimo.

- YCCO ka wac 833-257-2191 haddii uu jiro isbeddel ku yimaada caafimaadkaaga, baahiyahaaga ama cida aad la shaqeynayso si ay YCCO kaaga caawin karto in aad isku duba rido daryeelkaaga.
- Maamulka Daryeelka YCCO ka wac 833-257-2191 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Isku duwida Daryeelka.
- Maamulka Daryeelka YCCO ayaa ku soo wici doona ama boosta kuugu soo diri doona warqada wakiilka xubnaha si laguula socodsiiyo cidda, ka socoto kooxdaada isku duwida daryeelka, ee marka koowaad ka mus'aal ka ah isku duba ridida daryeelkaaga iyo adeegyadaada iyo sidoo kale sida qofka xubinta ah loo ogeysiin doono haddii wakiilka la qoondeeyay isbeddelo. Haddii uu jiro isbeddel ku yimaada qofkani, waxaanu boosta kuugu soo diri doonaa warqad ama waan ku soo wici doonaa si aan kuugu sheegno.

## Xubnaha leh Medicare

Waxaad sidoo kale heli doontaa caawimaad la xiriirta OHP aad leedahay iyo faa'iidooyinka Medicare. Xubin ka tirsan shaqaalaha oo ka socda kooxda isku duwida daryeelka YCCO ayaa la shaqeeya adiga, daryeel bixiyahaaga, qorshahaaga Medicare Advantage iyo/ama daryeel bixiyayaasha. Waxaanu iskaashi la yeelanay dadkani si laguugu helo adeegyo bulsho iyo taageero, sida adeegyo bulshada ku saleysan oo dhaqan ahaan u gaar ah.

# Faa'iidooyinkaaga

## Sida Oregon u go'aamiso waxa OHP caymiskiisa bixin doonto

Adeegyo badan ayaad heli kartaa xubin ka tirsan OHP ahaan. Sida Oregon u go'aamiso adeegyada ay tahay in ay lacagtooda bixiso waxaa lagu saleeyaa **Liiska Muhiimada la siiyay ee Adeegyada Caafimaadka** Liiskan waxa uu ka kooban yahay xaalado caafimaad oo kala duwan (called diagnoses) iyo noocyada habraaca oo lagu daaweeyo xaaladaha. Koox khubaro caafimaad ah iyo muwaadiniin caadi ah ayaa ka wada shaqeeya sidii horumarin lahaa liiska. Kooxdan waxaa loo yaqaan Guddiga Dib u eegista Caddeynta Caafimaad (HERC) ee Oregon. Waxaa soo magacaabay guddoomiyaha gobolka.

Liisku wuxuu leeyahay isku darka dhammaan xaalada iyo daaweyntooda. Kuwan waxaa loo yaqaan xaalada/daaweynta la isku daray.

Xaalada/daaweynta la isku daray ayaa darajo loogu kala yeelaa liiska iyada oo la eegayo sida ay xaalad kastaa halis u tahay iyo sida ay waxtar u leedahay daawo kastaa.

**Xubnaha da'doodu tahay 21 jir iyo ka weyn:**
Xaalada/daaweynta la isku geeyay oo dhan caymiskooda ma bixiyo OHP. Waxaa jirta meel la joogsado liiska oo loo yaqaan "the line" ama "the funding level." Kuwa la isku daray 'pairs' ee ka sarreeya xariiqdu waa kuwo caymiskooda la bixinayo, iyo kuwa la isku daray 'pairs' iyada oo kuwa ka hooseeya xariiqdu aysan sidaasi ahayn. Xaaladaha iyo daaweynta qaarkood ee ka

sarreeya xariiqda waxay leeyihiin xeerarka qaarkood waxaana dhici karta in aa caymiskooda la bixin.

**Xubnaha da'doodu ka yar tahay 21 jir:**
Dhammaan adeegyada caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah ama caafimaad ahaan ku habboon waa in caymiskooda la bixiyaa, iyada oo lagu saleynayo baahidaada gaar ahaaneed iyo taariikhdaada caafimaad. Tani waxaa ka mid ah waxyaabaha ka hooseeya xariiqda "below the line" ee ku jira Liiska Muhiimada la siiyay iyo sidoo kale adeegyada aan ka soo muuqan Liiska Muhiimada la siiyay, sida Qalabka Caafimaad ee Waara. Fiiri bogga 50 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan caymiska loogu talagalay xubnaha da'doodu ka yar tahay 21 jir.

Ogow waxyaabo dheeraad oo ku saabsan Liiska Muhiimada la siiyay oo laga helayo:
https://www.oregon.gov/oha/hsd/ohp/pages/prioritized-list.aspx

## Helitaanka Tooska ah

Uma baahnid gudbin ama oggolaansho hore oo loogu talagalay adeegyada qaarkood. Tani waxaa loo yaqaan "direct access". Jaantusyada hoose ka fiiri adeegyada ah helitaan toos ah ee aanan u baahnayn gudbin ama oggolaansho hore.

### Looma baahan gudbin ama oggolaansho hore

Uma baahnid gudbin ama oggolaansho hore oo loogu talagalay adeegyada qaarkood. Tani waxaa loo yaqaan helitaanka tooska ah.

- **Adeegyada degdega ah (Oo la helayo 24 saacadood maalintii, 70 maalmood toddobaadkii)**
  Oo loogu talagalay caafimaadka jirka, ilkaha ama hab-dhaqanka
- **Adeegyada Daryeelka Degdega ah (Oo la helayo 24 saacadood maalintii, 70 maalmood toddobaadkii)**
  Oo loogu talagalay caafimaadka jirka, ilkaha ama hab-dhaqanka
- **Adeegyada Caafimaadka Haweenka**
  Oo loogu talagalay daryeelka joogtada ah iyo daryeelka ka hortagga
- **Baaritaanada Xadgudubka Galmada**
- **Adeegyada Qiimeynta iyo Qiyaasta Caafimaadka Hab-dhaqanka**
- **Adeegyada Bukaan-socodka iyo Caafimaadka Hab-dhaqanka ee ay Bixiyaan-Dadka isku faca ah**
  Ee laga helo daryeel bixiyaha ka tirsan qorshe caafimaad 'in-network provider'

Fiiri Jaantusyada Faa'iidooyinka ee ku qoran bogga 37 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah

## Helitaanka oggolaansho hore (oo mararka qaarkood loo yaqaan “prior authorization”)

Adeegyada qaarkood, sida qalliinka, ama adeegyada bukaan-jiifka, waxay u baahan yihiin oggolaansho ka hor inta aadan helin iyaga. Tani waa in la xaqiijio in daryeelku yahay mid caafimaad ahaan loo baahan yahay oo uu kugu habboon yahay. Daryeel bixiyahaaga ayaa qaban doona tani waxaana dhici karta in ay noo soo gudbiyaan macluumaadka si lagaaga taageero helida adeega. Xataa haddii aan daryeel bixiyaha looga baahnayn in uu noo soo diro macluumaad, YCCO waxaa dhici karta in ay weli u baahan tahay in ay dib u eegto xaaladaada sababa la xiriira caafimaadka.

Waa in aad og tahay in go’aanadani ay kaliya ku saleysan yihiin haddii daryeelka ama adeegu uu yahay mid kugu habboon iyo haddii ay caymiskaaga daboolayso YCCO. YCCO daryeel bixiyayaasha ama qof kasta oo kale kuma abaalmariso soo saarida diidmada ee loogu talagalay caymis ama daryeel. Lacag dheeraad ah marnaba lama siiyo qof kasta oo gaara go’aan si uu maya u dhaho codsiga daryeel. Wac Adeega Macmiilka YCCO kala xiriir 855-722-8205 haddii aad:

- Hayso su’aalo
- U baahan tahay in aad la soo xiriirto Waaxda Maareynta Isticmaalka
- U baahan tahay nuqulka tilmaamaha caafimaad

Waxaa dhici karta in aadan helin adeega haddii aanan la oggolaanin. Waxaan codsiyada oggolaanshaha hore dib ugu eegnaa sida ugu dhakhsaha badan ee uu caafimaadkaagu u baahan yahay. Inta badan go’aanada adeega waxaa lagu sameeyaa muddo 14 maalmood gudahood ah. Mararka qaarkood go’aanadu waxay qaadan karaan ilaa 28 maalmood. Tani waxay kaliya dhacdaa marka aan sugayno macluumaad dheeraad ah. Haddii adiga ama daryeel bixiyahaaga aad dareento in waqtiga caadiga ah ee la qabtay uu khatar gelin karo noloshaada, caafimaadkaaga, ama awoodda aad u leedahay in aad shaqeyso, waxaan gaari karnaa go’aan degdeg ah oo loo yaqaan “expedited service authorization”. Go’aanada adeega la soo dedejiyay waxaa lagu gaaraa muddo 72 saacadood gudahood ah, laakiin waxaa jiri kara kordhin ah 14-maalmood. Waxaad xaq u leedahay in aad cabasho gudbiso haddii aadan ku raacsanayn go’aanka muddo kordhinta. Fiiri page 93 wixii la xiriira sida loo gudbiyo cabasho.

Haddii aad u baahan tahay oggolaansho hore oo loogu talagalay daawo la isku qoro, waxaanu go’aan ku gaari doonaa muddo 24 saacadood gudahood ah. Haddii aad u baahanahay macluumaad dheeraad ah si aanu u gaarno go’aan, waxay qaadan kartaa 72 saacadood.

Fiiri bogga 71 si aad wax uga ogaato daawooyinka la isku qoro.

Uma baahnid oggolaansho loogu talagalay adeegyada degdega ah ama dhakhsaha ah ama loogu talagalay adeegyada degdega ah ee daryeelka ka dib. Fiiri bogga 75 si aad wax uga

ogaato adeegyada degdega ah.

## Ma jiro oggolaansho hore oo looga baahan yahay adeegyadani

- **Adeegyada caafimaadka hab-dhaqanka ee bukaan-socodka ama adeegyada ay bixiyaan-dadka isku faca ah (in network)**
- **Adeegyada qiimeynta iyo qiyaasta Caafimaadka Hab-dhaqanka**
- **Daaweynta La isku caawiyo Daawada ee loogu talagalay Dhibaatada Isticmaalka Mukhaadaraadka** (30-ka maalmood ee ugu horreeya)
- **Daaweynta Bulshada ee Wanaagsan (ACT) iyo Adeegyada buuxa** (baaritaan ayaa loo baahan yahay).

Fiiri Jaantusyada Faa'iidooyinka ee ku qoran bogga 37 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

# Gudbinta daryeel bixiyaha iyo is gudbinta shakhsi ahaaneed

Si aad daryeel uga hesho daryeel bixiyaha saxda ah waxaa dhici karta in loo baahdo in la is gudbiyo. **Gudbintu** waa amar qoraal ah oo ka socda daryeel bixiyahaaga oo xusaya baahida loo qabo adeeg.

Tusaale ahaan: Haddii PCP-gaagu aanu ku siin karin adeegyada aad u baahan tahay, waxay kuu gudbin karaan qof takhasus leh. Haddii oggolaansho hore looga baahan yahay adeega, daryeel bixiyahaaga wuxuu YCCO ka codsan doonaa oggolaansho.

Haddii uusan jirin qof takhasus leh oo u dhow halka aad ku nooshahay ama qof takhasus leh oo la shaqeeya YCCO (oo sidoo kale loo yaqaano 'in-network'), waxaa dhici karta in ay la shaqeeyaan Kooxda Isku duwida daryeelka si ay kuugu helaan daryeel ka baxsan nidaamka caymiska 'out-of-network'. Si loo arko daryeel bixiye ka baxsan degaanka caymiska laga bixiyo 'out-of-network', waa in ay la shaqeeyaan Qorshaha Caafimaadka Oregon. Ma jiro kharash dheeraad haddii tani ay dhacdo.

Marar badan ayuu PCP-gaagu sameyn karaa adeegyada aad u baahan tahay. Haddii aad u maleynayso in aad u baahan karto in laguu gudbiyo qof ku takhasusay daryeelka caafimaadka, ka codso PCP-gaaga. Uma baahnid gudbin haddii aad yeelato xaalad degdeg ah.

## Adeegyada u baahan gudbin

- **Daaweynta La isku caawiyo Daawada ee loogu talagalay Dhibaatada Isticmaalka Mukhaadaraadka**
- **Adeegyada Qofka Takhasuska leh**
  Haddii aad qabto baahiyaha daryeelka caafimaad oo gaar ah, kooxdaada daryeelka caafimaadka ayaa si wadajir ah uga wada shaqeyn kara sidii aad u heli lahayd dad takhasus leh is gudbin la'aan.
- **Adeegyada Buuxa**
- **Haddii aad isticmaasho bixiyaha daryeelka ilkaha oo aan ahayn dhakhtarkaaga daryeelka aasaasiga ee ilkaha, waxaa dhici karta in aad u baahato isku gudbin loogu talagalay adeegyadani:**
  - Baaritaanada afka
  - Ilkaha qayb ahaan ama dhammaan macmalka ah
  - Saarida ilkaha
  - Daaweynta buuxinta salka gawska

Fiiri Jaantusyada Faa'iidooyinka ee ku qoran bogga 39 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

**Adeegyada qaarkood uma baahna gudbin ka socota daryeel bixiyahaaga. Tani waxaa loo yaqaan 'self-referral'.[1Is gudbinta shakhsi ahaaneed** waxay ka dhigan tahay in aad eegi karto buuga tilmaamaha daryeel bixiyaha si aad u hesho nooca daryeel bixiye ee aad jeclaan lahayd in aad aragto. Waxaad wici kartaa daryeel bixiyahaasi si loo dejiyo booqasho is gudbin la'aan. Ogow waxyaabo dheeraad oo ku saabsan Buuga Tilmaamaha Daryeel Bixiyaha oo ku qoran bogga 28.

| **Adeegyada aad adigu isku gudbin karto:** |
| --- |
| ○ Booqashooyinka aad la leedahay PCP-gaaga<br>○ Daryeelka loogu talagalay cudurada galmada la iskugu gudbiyo (STI-yada)<br>○ Tallaalada (irbadaha)<br>○ Adeegyada shaqaalaha caafimaadka dhaqan ahaaneed<br>○ Bixiyayaasha adeega aragga joogtada ah ee ka tirsan nidaamka<br>○ Bixiyayaasha adeega ilkaha ee ka tirsan nidaamka<br>○ Adeegyada qorshaynta qoyska (oo uu ku jiro qorshe ka baxsan nidaamka caymiska 'out-of-network')<br>○ Adeegyada caafimaadka dhimirka oo loogu talagalay dhibaatooyinka lagu qabo aalkolada ama mukhaadaraadka kale<br>○ Daaweynta Bulshada ee Wanaagsan<br>○ Adeegyada Caafimaadka hab-dhaqanka (in network) |

Fiiri Jaantusyada Faa'iidooyinka ee ku qoran bogga 39 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

**Oggolaansho hore ayay dhici karta in weli looga baahdo adeega marka aad isticmaasho is gudbinta shakhsi ahaaneed. La hadal PCP-gaaga ama la xiriir Adeega Macmiilka haddii**

**aad hayso su’aalo ku saabsan haddii aad u baahan tahay oggolaansho hore si aad u hesho adeeg.**

| Astaanta furaha ee jaantusyada faa’iidooyinka | | |
|---|---|---|
| **Adeegyada u baahan oggolaansho hore**<br>Adeegyada qaarkood waxay u baahan yihiin oggolaansho ka hor inta aadan helin adeega. Daryeel bixiyahaagu waa in uu CCO-ga weydiistaa oggolaansho. Tani waxaa loo yaqaan oggolaansho hore. | **Adeegyada u baahan gudbin**<br>Gudbintu waa amar qoraal ah oo ka socda daryeel bixiyahaaga oo xusaya baahida loo qabo adeeg. Waa in aad daryeel bixiye ka codsataa is gudbin. | **Looma baahan gudbin ama oggolaansho hore**<br>Uma baahnid gudbin ama oggolaansho hore oo loogu talagalay adeegyada qaarkood. Tani waxaa loo yaqaan helitaanka tooska ah. |

## Faa’iidooyinka caafimaadka jirka

Hoosta ka fiiri liiska faa’iidooyinka caafimaad oo aad ku heli karto lacag la’aan. Fiiri tiirka “Adeega” si aad u aragto inta jeer ee aad adeeg kasta ku heli karto lacag la’aan. Fiiri tiirka “Sida loo helo” si aad u aragto haddii aad u baahan tahay in aad hesho gudbin ama oggolaansho hore loogu talagalay adeeg. YCCO ayaa si lacag la’aan ah iskugu duwi doonta adeegyada haddii aad u baahan tahay caawimaad.

Haddii aad ku aragto * jaantusyada faa’iidada, tani waxay ka dhigan tahay in adeega ay dhici karto in la daboolo wax ka baxsan xadka loogu talagalay xubnaha da’doodu ka yar tahay 21 jir haddii uu caafimaad ahaan lagama maarmaan yahay oo ku habboon yahay.


Wixii la xiriira soo koobida faa’iidooyinka OHP iyo caymiska, fadlan booqo OHP.Oregon.gov/Benefits

Waxaad heli kartaa nuqul warqad ama elektaroonik ah ee soo koobida adiga oo wacaya 800-273-0057.


| Adeega | Sida loo helo | Cidda heli karta |
|---|---|---|
| **Adeegyada isku duwida daryeelka**<br>Xad malaha. Firii qaybta “Hel caawimaad la xiriirta habeynta daryeelka aad la leedahay” si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.<br>Isku duwida Daryeelka waa caawimaad la bixiyo si caafimaadkaaga guud looga dhigo mid wanaagsan. | (thumbs up) | Xubnaha oo dhan |

| Adeega | Sida loo helo | Cidda heli karta |
|---|---|---|
| Shaqaalaha YCCO ayaa kaa taageeri doona baahiyaha daryeelka oo kaa caawin doona in aad hesho baahiyaha jirka, horumarinta, ilkaha, hab-dhaqanka iyo bulsho meesha iyo goorta aad u baahan tahay.<br>Qaarka ka mid ah caawimaadani waxay noqon kartaa dejinta ballanta caafimaad, doorashada daryeel bixiye aasaasi ah, ama caawimaada fahamka faa'iidooyinkaaga. | | |
| **Daryeelka Raaxada & Adeegyada Hospice**<br>Waa kuwo kooban iyo/ama oggolaansho hore oo ku saleysan tilmaamaha OHP & nooca daryeelka. Wac Adeega Macmiilka ama la hadal daryeel bixiyahaaga.<br><br>Adeegyada lagu dejinayo qof dhimanaya iyo in la caawiyo qoyskiisa. Hospice waa mid dabacsan waxayna noqon kartaa daaweynta xanuun, la talin, iyo daryeelka nasashada. |  | Xubnaha oo dhan |
| **Adeegyada Ogaanshaha Cudurka**<br>Qaadida Dhiiga, Raajatada, Baaritaanka CT Scans waxay u baahan yihiin dalab ka socda daryeel bixiyahaaga oo aan xad lahayn.<br><br>MRI-gu malaha xad balse waxaa loo baahan yahay oggolaansho hore.<br><br>Tijaabo, baaritaano, ama nidaamyo la maro oo lagu ogaanayo xaalad ama dhaawac. Tusaalooyinka waa qaadida dhiiga, baaritaanka CT scan, MRI. Baaritaanka CT scan waa raajato taxane ah oo si wadajir ah la isku daro si loo sameeyo sawirka aagga la sawiray. MRI waa iskaan la isticmaalayo qulqulka korontada iyo hirarka raadiyaha si loo sameeyo sawirro faahfaahsan ee gudaha jirka. | <br> | Xubnaha oo dhan |
| **Qalabka Caafimaad ee Waara**<br>Waa mid kooban iyo/ama oggolaansho ku saleysan tilmaamaha OHP & nooca daryeelka, qalabka, ama agabka. Oggolaansho hore iyo dalab ka socda daryeel bixiyahaaga ayaa loo baahan yahay.<br><br>Qalabka caafimaad ee waara waa nooc qalab oo jira muddo dheer. Looma isticmaalo sida agabka caafimaad. Waxaa ka mid ah qalabka sida kuraasta naafada, qalabka socodka 'walkers', sariiraha | <br> | Xubnaha oo dhan |

| Adeega | Sida loo helo | Cidda heli karta |
| --- | --- | --- |
| isbitaalka, qalabka jirka lagu rakibo ‘prosthetics’ iyo qalabka cagaha/lugaha ‘orthotics’.<br><br>Agabka caafimaadku waa waxyaabaha sida agabka sonkorowga ama agabka kaadida aan la ceshan karin ‘incontinence’. | | |
| **Daryeelka, baaritaannada iyo qiimeynta caafimaadka jirka iyo maskaxda ee xubnaha da’doodu ka yar tahay 21 jir.**<br><br>Tusaale: Booqashooyinka daryeelka ka hortagga, iyo baaritaanka sunta kiimikada Lead-ka. Tani waxaa ku jira caymiska loogu talagalay dhammaan adeegyada caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah ama caafimaad ahaan ku habboon ee loogu talagalay xubnaha da’doodu ka yar tahay 21 jir. Adeegyada Baaritaanka Hore & Xilliyeedka ee Ogaanshaha iyo Daaweynta ee (EPSDT)<br>Baaritaanka daryeelka ka hortagga ‘well-child’ ee loogu talagalay dhallaanka, carruurta, iyo dhallinyarada sida lagu taliyo.<br><br>Baaritaanka jirka ee joogtada ah sida lagu taliyo.<br><br>Tallaalada sida uu ka taliyo daryeel bixiye iyo tallaalada ay OHP caymiskooda bixiso oo kaliya.*<br><br>Caawimaad la iska siiyo naas nuujinta, oo uu ku jiro caaga caanaha la iskaga soo saaro, xad malaha.<br><br>Adeegyada nafaqadu malaha xad.<br><br>Taageerada bulshada malaha xad.<br><br>Baaritaanada indhaha ee joogtada ah, ku kooban 1 baaritaan 12-kii bilood ee kasta. *<br><br>Muraayadaha indhaha (muraadayaha & qolfoofka muraayadaha) oo ku kooban muraayadaha cusub 12-kii bilood ee kasta iyo oggolaansho ku saleysan tilmaamaha OHP. Waa in ay lahaadaan warqada daawada oo sax ah oo ka socota adeeg bixiyaha aragga. *<br><br>Qalabka maqalka kordhiya iyo baaritaanadu waa kuwo kooban iyo/ama oggolaansho ku saleysan tilmaamaha | <br>Ma jiro gudbin ama oggolaansho hore oo loogu talagalay daryeelka caafimaadka ilmaha ‘well child’, baaritaanada iyo qiimeynta qaarkood.<br><br>Gudbinta ama oggolaansho hore ayay dhici kartaa in looga baahdo adeegyada kale.<br> | Xubnaha da’doodu tahay 0-20 jir<br><br>Xubnaha da’doodu tahay 0-20 jir |



| Adeega | Sida loo helo | Cidda heli karta |
|---|---|---|
| OHP & nooca daryeelka /caawimaada. Oggolaansho hore ayaa loo baahan yahay. * <br><br> Fiiri bogga 59 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah. | | |
| **Qalliinada/Nidaamyada La doorto** <br> Qalliinka waa in la qorsheeyaa oo uu kooban yahay iyo/ama oggolaansho ku saleysan tilmaamaha OHP iyo nooca daryeelka. Oggolaansho hore ayaa loo baahan yahay. <br><br> Qalliinada/nidaamyada la doorto hore ayaa loo sii qorsheeyaa kumana jiraan xaalada caafimaad ee degdega ah sida saarista xameetida iyo dhagxaanta kelyaha. |  | Xubnaha oo dhan |
| **Gaadiidka Caafimaad ee Degdega ah** <br> Xad malaha ama waxaa loo baahan yahay oggolaansho hore laakiin waa in loo isticmaalaa adeegyada degdega ah oo kaliya. <br><br> Tusaalaha gaadiidka caafimaad ee degdega waa ambalaaska. Waxaad isticmaashaa noocan gaadiid marka aad u baahan tahay in aad si dhakhso ah u aado isbitaalka. |  | Xubnaha oo dhan |
| **Adeegyada Degdega** <br> Xad malaha tirada booqashooyinku. <br><br> Xaalada degdega ah waxay u baahan tahay fiiro gaar ah oo degdeg ah waxayna khatar gelisaa noloshaada. Wuxuu noqon karaa dhaawac degdeg ah ama jiro lama filaan ah. Tusaalooyinka qaarkood waa lafo jabay, neefsasho adag, ama wadne xanuun imaan kara. |  | Xubnaha oo dhan |
| **Adeegyada Qorshaynta Qoyska** <br> Xad malaha tirada booqashooyinku. Waxaad adeegyadani ka heli kartaa daryeel bixiyayaasha ka baxsan nidaamka caymiska 'out-of-network'. <br><br> Qorshaynta qoysku waa marka aad yeelayo baaritaan loogu talagalay xubnahaaga taranka wuxuuna gacan ka geystaa gaarista go'aano ku saabsan lahaanshaha ama ka hortagga uur qaadida. Tusaalooyinka qaarkood waa xakamaynta dhalmada iyo baaritaanada sanadlaha ah. |  | Xubnaha oo dhan |

| Adeega | Sida loo helo | Cidda heli karta |
| --- | --- | --- |
| **Daryeelka Xaqiijinta Jinsigu**<br>Wuxuu leeyahay xad iyo/ama waa oggolaansho ku saleysan tilmaamaha OHP iyo nooca daryeelka wuxuuna u baahan yahay oggolaansho.<br><br>Daryeelka xaqiijinta jinsigu waa daryeel caafimaad oo loo isticmaalo iska beddelida jinsiga tusaalooyinku waa daaweynta hormoonnada iyo qalliinka dib u habeynta jinsiga. |  | Xubnaha oo dhan |
| **Adeegyada Maqalka***<br>Waa kuwo kooban iyo/ama oggolaansho ku saleysan tilmaamaha OHP & nooca daryeelka/caawimaada waxayna u baahan yihiin oggolaansho.<br><br>Adeegyada maqalku waa baaritaano lagu hubinayo sida wanaagsan ee aad wax u maqasho iyo caawimaad si la iskaga caawiyo maqalka.   Tusaalooyinka qaarkood waa baaritaanka maqalka, sayniska maqalka, iyo qalabka maqalka kordhiya. |  | Xubnaha oo dhan |
| **Adeegyada Caafimaadka Guriga**<br>Waa kuwo kooban iyo/ama oggolaansho ku saleysan tilmaamaha OHP & nooca daryeelka waxaana loo baahan yahay oggolaansho hore.<br><br>Adeegyada caafimaadka guriga waa adeegyada daryeelka caafimaad oo la isku siin karo gurigaaga oo loogu talagalay jiro ama dhaawac, tusaalooyinku waa daryeelka kalkaalisada, daaweynta dhaqdhaqaaqa jirka, daaweynta hadalka. |  | Xubnaha oo dhan |
| **Tallaalada iyo Tallaalada Safarka**<br>Daryeel bixiyuhu ku taliyay iyo tallaalada ay OHP caymiskooda bixiso oo kaliya.<br>Irbadaha (tallaalada) si lagaaga caawiyo in aad noqoto qof caafimaad qaba. Tusaalooyinku waxay noqon karaan tallaalada uu daryeel bixiyahaagu rabo in aad yeelato iyada oo sababtu tahay xaaladaada caafimaad, shaqo, ama safar. |  | Xubnaha oo dhan |
| **Adeegyada Isbitaalka ee Bukaan-jiifka**<br>Waa kuwo kooban iyo/ama oggolaansho ku saleysan tilmaamaha OHP & nooca daryeelka waxaana loo baahan yahay oggolaansho hore. |  | Xubnaha oo dhan |



| Adeega | Sida loo helo | Cidda heli karta |
|---|---|---|
| Daryeelkani waa in aad ku heshaa isbitaalka. | | |
| **Adeegyada Turjumaada**<br>Ma xaddidna adeegyadu.<br><br>Qof kaa caawinaya luqadda lagu hadlo ama luqadda calaamadaha ee aad doorato.  Turjumaadda luqadda (shakhsi ahaaneed, telefoon, ama muuqaal ahaaneed) iyo adeegyada turjumaada luqadda calaamadaha (shakhsi ahaaneed ama muuqaal ahaaneed). |  | Xubnaha oo dhan |
| **Adeegyada Shaybaarka, Raajayada, iyo nidaamyada kale**<br>Qaadida Dhiiga, Raajatada, Baaritaanka CT Scans waxay u baahan yihiin dalab ka socda daryeel bixiyahaaga oo aan xad lahayn.<br><br>Baaritaanka CT scan waa raajato taxane ah oo si wadajir ah la isku daro si loo sameeyo sawirka aagga la sawiray.<br><br>MRI-gu malaha xad balse waxaa loo baahan yahay oggolaansho hore.<br><br>MRI waa iskaan la isticmaalayo qulqulka korontada iyo hirarka raadiyaha si loo sameeyo sawirro faahfaahsan ee gudaha jirka. | <br> | Xubnaha oo dhan |
| **Adeegyada Hooyada**<br>Ma xaddidna booqashooyinka dhalashada ilmaha ka hor, dhalmada ka dib (oo ah daryeel loogu talagalay hooyada ka dib marka uu ilmuhu dhasho) ama caawimaad la iska siiyo naas nuujinta (oo uu ku jiro caaga caanaha la iskaga soo saaro).<br><br>Xadka u yaala foosha iyo dhalmada wuxuu ka saleysan yahay nooca daryeelka iyo dhalmada, la hadal daryeel bixiyahaaga.<br><br>Xadka u yaala adeegyada aragga ee joogtada ah waa hal baaritaan 24-kii bilood ee kasta. |  | Xubnaha uurka leh. |

| Adeega | Sida loo helo | Cidda heli karta |
|---|---|---|
| **Adeegyada Isbitaalka ee  Bukaan-socodka**<br>Waa kuwo kooban iyo/ama oggolaansho ku saleysan tilmaamaha OHP and nooca daryeelka.<br><br>Adeegyada isbitaalka ee b ukaan-socodku waa adeegyo ka dhaca isbitaalka, laakiin ma aha in aad sii joogtid habeenkii.   Tusaalooyinka qaarkood waa isku daaweynta 'Chemo', Shucaaca, iyo Maareynta Xanuunka. |  | Xubnaha oo dhan |
| **Daaweynta Caafimaad**Waa mid kooban iyo/ama oggolaansho hore oo ku saleysan tilmaamaha OHP & nooca daryeelka.   Wac Adeega Macmiilka ama la hadal daryeel bixiyahaaga.<br><br>Daryeelka loogu talagalay xubnaha qaba jirooyin halis ah, oo ay ku jiri karaan adeegyada sida isku duwida daryeelka, adeegyada caafimaadka dhimirka, adeegyada shaqada bulshada, adeegyada daryeelka ruuxiga ah, maareynta astaamaha, iyo telefoonka taageerada caafimaad oo 24 saacadood ah. |  | Xubnaha oo dhan |
| **Adeegyada Daawooyinka (Daawada La isku qoro)**<br>Daawooyin badan ayaa jira marka la isku qoro. Liiska buuxa ee daawooyinka la isku qoro waxaa laga heli karaa liiska daawooyinka la oggol yahay "formulary." Si aad u raadiso search the liiska daawooyinka la oggol yahay 'formulary' ama u daabacato nuqul booqo https://yamhillcco.org/members/pharmacy-drug-list/.<br><br>Daawooyinka aad u baahan tahay si ay kaaga caawiyaan ama kaa dhigaan qof caafimaad qaba. Tusaale: daawada cadaadiska dhiigga.<br><br>Daawooyinka la isku qoro ee caafimaadka dhimirku caymiskooda **ma** bixinayso YCCO-gaaga caafimaadka ama qorshaha caafimaadka dhimirka.  Waxaa caymiskooda bixinaya OHP, farmashiishtahaagu wuu garan doonaa halka uu lacagta biilka u dirayo. | Daawada la isku qoro ee loo baahan yahay | Xubnaha oo dhan |
| **Daaweynta Dhaqdhaqaaqa Jirka, Daaweynta Dhaqdhaqaaqa Jirka, Daaweynta Hadalka**<br>Oggolaanshaha Daaweynta Dhaqdhaqaaqa Jirka (PT) iyo Daaweynta Dhaqdhaqaaqa Jirku (OT) wuxuu ku saleysan yahay tilmaamaha OHP iyo nooca daryeelka. Xaddidaada waa la isku daray (PT, OT, daaweynta |  | Xubnaha oo dhan |

| Adeega | Sida loo helo | Cidda heli karta |
|---|---|---|
| duugida lafaha/murqaha, adeegyada daaweynta irbadaha ‘acupuncture’) oo laga dhigay 30 booqasho bishiiba jadwal sanadeedka. *<br><br>Daaweynta hadalku waa mid kooban iyo/ama oggolaansho ku saleysan tilmaamaha OHP and nooca daryeelka.<br><br>Daaweynta dhaqdhaqaaqa jirku waa daaweyn la adeegsado oo hab jireed loogu daaweeyo cillada ‘deformity’, ama cudurka, ama dhaawaca. Tusaalooyinku waa masaajada, isku daaweynka kulaylka, iyo jimicsiga.<br><br>Daaweynta dhaqdhaqaaqa jirku waa daaweyn loo adeegsado in ay gacan ka geysato ka soo kabashada xanuun jireed ama maskaxeed si loo kordhiyo awooda lagu qabanayo nolol maalmeedka, sida qubeyska iyo aadista iyo ka soo noqoshada sariirta.<br><br>Daaweynta hadalku waa tababar lagu caawinayo dadka qaba dhibaatooyinka hadal iyo luqaddeed si ay ugu hadlaan si cad, kuwani waxay noqon karaa jimicsiyada afka ama hadalka. | | |
| **Adeegyada ka hortagga**<br>Tallaalo, baaritaanka daryeelka ka hortagga ‘well-child’ ee loogu talagalay dhallaanka, carruurta, iyo dhallinyarada sida lagu taliyo.<br><br>Baaritaanka jirka ee joogtada ah, baaritaanka (kansarka, iwm) iyo iskala talinta dhanka nafaqada sida lagu taliyo.<br><br>Baaritaanada naasaha ‘mammograms’ sida lagu taliyo; baaritaanada naasaha ‘mammogram’ ee 3D-ga caymiskiisa lama bixiyo.<br><br>Qorshaynta qoyska, baaritaanada kansarka qanjidhka manida, adeegyada joojinta tubaakada malaha xad.<br><br>Daryeelka joogtada ah iyo baaritaanada si adiga iyo qoyskaaga looga dhigo kuwo caafimaad qaba. Tusaalooyinka qaarkood waa baaritaanada jirka, tallaalada, baaritaanada kansarka, la-talinta nafaqada. |  | Xubnaha oo dhan |

| Adeega | Sida loo helo | Cidda heli karta |
|---|---|---|
| **Booqashooyinka Daryeel Bixiyaha Aasaasiga ah**<br>Malaha xad balse waa in aad aragtaa PCP-gaaga.<br><br>Tusaalooyinka qaarkood ee sabab aad ku aragto PCP-gaagu waa jira sida hargab ama flu, xasaasiyad, ama miisaankaaga. Fiiri bogga 26 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah. |  | Xubnaha oo dhan |
| **Gaadiid u raacida daryeelka. Sidoo kale loo yaqaan Adeegyada Gaadiidka Caafimaad ee Aan Degdega Ahayn (NEMT)**<br>Xad malaha tirada gaadiid raacidu laakiin gaadiid raacida laakiin waa in loo isticmaalaa booqashooyinka caafimaadka aan degdega ahayn ee ay OHP oggolaatay. Fiiri bogga 65 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah. |  | Xubnaha oo dhan |
| **Baaritaanada Xadgudubka Galmada**Looma baahan gudbin ama oggolaansho hore. Xaddidaado ma laha.<br><br>Baaritaanka ka dib xadgudubka galmo, waxaa ku jiri kara soo ururinta caddeynta iyo helidda baaritaanada shaybaarka. |  | Xubnaha oo dhan |
| **Adeegyada Qofka Takhasuska leh**<br>Malaha xad laakiin adeegyadu waa in ay noqdaan kuwo ay caymiskooda bixiso OHP waana in aad aragto daryeel bixiyaha YCCO oo ka tirsan qorshe caafimaad ‘in-network provider’. YCCO uma baahna gudbin, laakiin daryeel bixiye takhasus leh ayay dhici kartaa in uu macluumaad uga baahdo PCP-gaaga ama daryeel bixiye kale.<br><br>Adeegyada qofka takhasuska leh waa adeegyo aad ka hesho bixiyaha caafimaadka oo ku takhasusay meel gaar ah oo daawada ah, tusaalooyinku waa wadnaha, xasaasiyada, ama daryeelka caafimaadka beerka. |  | Xubnaha oo dhan.<br><br>Oo loogu talagalay kuwa qaba baahiyaha daryeelka caafimaad oo joogto ah ama LTSS. La hadal Isku duwida Daryeelka si aad toos ugu hesho dad takhasus leh. |
| **Nidaamyada Qalliinka**<br>Waa kuwo kooban iyo/ama oggolaansho ku saleysan tilmaamaha OHP iyo nooca daryeelka. Oggolaansho hore ayaa loo baahan yahay.<br><br>Si loo beddelo xubnaha ama unugyada jirkaaga iyada oo la jarayo. Sidoo kale loo yaqaan qalliin. |  | Xubnaha oo dhan |

| Adeega | Sida loo helo | Cidda heli karta |
|---|---|---|
| Tusaalooyinka waa soo saarida qumanka ama xameetida. | | |
| **Adeegyada Telehealth**<br>Malaha xad laakiin waa in ay noqdaan kuwo ay caymiskooda bixiso OHP.  Adeegyada qaarkood ma aha kuwo lagu helayo telehealth, weydii daryeel bixiyahaaga haddii kaaga loo sameyn karo sidani.<br><br>Ku helida daryeelka ee telefoon ahaan, muuqaal ahaan, ama dhanka internet-ka.  Tusaalooyinka qaarkood waa: adeegyada telemedical, booqashooyinka dhanka internet-ka, iyo booqashooyinka dhanka email-ka.  Fiiri bogga 68 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah. |  | Xubnaha oo dhan |
| **Adeegyada Shaqaalaha Caafimaadka Dhaqan ahaaneed (THW)**<br>Malaha  xad.<br><br>Adeegyada Shaqaalaha Caafimaadka Dhaqan ahaaneed ama Shaqaalaha Caafimaadka Dhaqan ahaaneed ee Qabiilku waa adeegyo laga helayo Shaqaalaha Caafimaadka Bulshada, Wehelka Dhalmada ‘Birth Doula’, Taageerada Dadka Isku faca ah ama Qof Takhasus u leh Caafimaadka Dadka Isku faca ah, ama Hagaha Caafimaadka Shakhsi Ahaaneed. Fiiri bogga 62 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah. |  | Xubnaha oo dhan |
| **Adeegyada Daryeelka Degdega ah**<br>Malaha xad.<br><br>Dhibaatooyinka degdega ah waxaa loo baahan yahay in la daaweeyo isla markiiba, laakiin aan halis ahaan ku filayn daaweyn degdeg ah oo la isku siiyo qolka gargaarka degdega ah. Tusaalooyinka qaarkood ee adeegyada daryeelka degdega ah waa adeegyada lafo jabay oo fudud iyo dillaaca lafaha faraha iyo lugaha, murgacashada iyo muruqa jirka gala, jeexniinka aanan lahayn dhiig badan laakiin u baahan kara in la tolo.  Fiiri bogga 74 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah. |  | Xubnaha oo dhan |

| Adeega | Sida loo helo | Cidda heli karta |
|---|---|---|
| **Adeegyada Caafimaadka Haweenka (oo ay dheer tahay PCP) o loogu talagalay daryeelka joogtada ah iyo daryeelka ka hortagga**<br>Malaha xad.<br><br>Daryeelka loogu talagalay baahiyaha caafimaadka gaarka ah ee haweenka. Tusaalooyinku waa: Booqashooyinka lagu aadayo daryeel bixiyahaaga ee loogu talagalay baaritaanka ka hortagga ee sanadlaha ah ee uu ka mid noqon karo baaritaanka xubinta taranka haweenka 'pelvic' ama baaritaanka ilmo galeenka, baaritaanka naasaha ama baaritaanka loogu talagalay fayo-qabkaaga. |  | Xubnaha oo dhan |
| **Adeegyada Aragga**<br><br>**Dadka waaweyn ee aan uurka lahayn ee da'doodu tahay (21+) waa kuwo caymiskooda la bixiyo oo loogu talagalay:**<br>• Baaritaanada indhaha ee joogtada ah 24-kii bilood ee kasta<br>• Baaritaanada caafimaadka indhaha marka loo baahan yahay<br>    ○ Muraayadaha wax lagu saxo / qalabka loogu talagalay xaaladaha caafimaadka indhaha qaarkood<br>Adeegyada waa in uu sameeyaa daryeel bixiyaha YCCO oo ka tirsan qorshe caafimaad 'in-network provider'.<br><br>**Xubnaha da'doodu ka yar tahay 21 jir*, dadka waaweyn ee uurka leh, dadka waaweyn ee da'doodu tahay ilaa 12 bilood dhalmada ka dib waa kuwo caymiskooda la bixiyo oo loogu talagalay:**<br>• Baaritaanada caafimaadka indhaha marka loo baahan yahay<br>• Baaritaanada caafimaadka indhaha marka loo baahan yahay<br>• Muraayadaha wax lagu saxo / qalabka marka loo baahan yahay<br>Adeegyada waa in uu sameeyaa daryeel bixiyaha YCCO oo ka tirsan qorshe caafimaad 'in-network provider'. |  | Sida lagula taliyay dadka kale o odhan<br><br>Xubnaha da'doodu ka yar tahay 21 sano, iyo xubnaha uurka leh |

| Adeega | Sida loo helo | Cidda heli karta |
|---|---|---|
| Tusaalooyinka xaaladaha caafimaadka indhuhu waa aphakia, keratoconus, ama qalliinka indho fiiqida caadka ‘cataract surgery’ ka dib.<br><br>Muraayadaha wax lagu saxo waa in ay lahaadaan warqada daawada oo sax ah oo ka socota adeeg bixiyaha aragga. Muraayadaha indhaha waa in la gataa iyada oo la adeegsano SWEEPS. Oggolaanshaha loogu talagalay baaritaanada caafimaadka indhuhu waxay ku saleysan yihiin tilmaamaha OHP. | | |

**Shaxanka sare ma aha liiska buuxa ee adeegyada u baahan oggolaansho hore ama gudbin.** Haddii aad hayso su’aalo, fadlan Adeega Macmiilka YCCO ka wac 855-722-8205.

## Faa’iidooyinka daryeelka caafimaadka hab-dhaqanka

Hoosta ka fiiri liiska faa’iidooyinka caafimaadka hab-dhaqanka oo aad ku heli karto lacag la’aan. Caafimaadka hab-dhaqanka macnihiisu waa caafimaadka dhimirka iyo daaweynta isticmaalka mukhaadaraadka. Fiiri tiirka “Adeega” si aad u aragto inta jeer ee aad adeeg kasta ku heli karto lacag la’aan. Fiiri tiirka “Sida loo helo” si aad u aragto haddii aad u baahan tahay in aad hesho gudbin ama oggolaansho hore loogu talagalay adeeg.

Haddii aad ku aragto * jaantusyada faa’iidada, tani waxay ka dhigan tahay in adeega ay dhici karto in la daboolo wax ka baxsan xadka loogu talagalay xubnaha da’doodu ka yar tahay 21 jir haddii uu caafimaad ahaan lagama maarmaan yahay oo ku habboon yahay. YCCO ayaa si lacag la’aan ah iskugu duwi doonta adeegyada haddii aad u baahan tahay caawimaad.

| Adeega | Sida loo helo | Cidda heli karta |
|---|---|---|
| **Daaweynta Bulshada ee Wanaagsan ACT)**<br>Mala xad. Gudbin ayaa loo baahan yahay.<br>Waa in aad leedahay baahi caafimaad si aad u hesho adeegani.<br><br>ACT waxaa loogu talagalay in lagu dhimo joogida istibaalka ee caafimaadka dhimirka iyo isticmaalka daryeelka xaaladda daran, kor u qaadida xasiloonida guryaha iyo kor u qaadida tayada nololeed ee kuwa qaba dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka oo daran ee adeegyadooda aanan lagu buuxinin adeegyada caafimaadka dhimirka ee caadiga ah. |  | Xubnaha oo dhan |

| Adeega | Sida loo helo | Cidda heli karta |
|---|---|---|
| **Adeegyada Buuxa**<br>Malaha xad.  Gudbin ayaa loo baahan yahay.<br><br>Waa in aad leedahay baahi caafimaad si aad u hesho adeegani. Wraparound waa qorsheyn koox ku-saleysan iyo nidaamka xallinta dhibaatooyinka si loo caawiyo dhallinyarada iyo qoysaskooda la dhibaateysan dhibaatooyinka dareen, maskaxeed, iyo hab-dhaqan. |  | Carruurta iyo dhallinyarada buuxisa shuruudaha caafimaadka |
| **Adeegyada Qiimeynta iyo Qiyaasta Caafimaadka Hab-dhaqanka**<br>Malaha xad. Ma jiro wax oggolaansho ah ama gudbin loogu talagalay adeegyada laga helo YCCO ka tirsan qorshe caafimaad 'in-network provider'.<br><br>Qiimeynta caafimaadka hab-dhaqanku waa su'aalo taxane ah, wareysiyo, iyo baaritaanada maskaxda iyo jirka oo loo adeegsado in la fahmo waxa qofka u baahan yahay. |  | Xubnaha oo dhan |
| **Adeegyada Daaweynta ee Goobta La degan yahay ee Dhimirka ee Caafimaadka Hab-dhaqanka (PRTS)**<br>Malaha xad. Gudbin ayaa loo baahan yahay.<br><br>Daaweynta caafimaadka hab-dhaqanka oo ka jirta heerka xarunta daryeelka oo 24-saacadood ah oo bixisa adeegyada caafimaadka hab-dhaqanka oo aan la isku siin karin bukaan-socod ahaan. |  | Dhallinyarada da'doodu ka yar tahay 21 jir. |
| **Adeegyada Bukaan-jiifka ee Isticmaalka Mukhaadaraadka ee Goobta La degan yahay iyo Sifaynta jirka 'Detox'**<br>Malaha xad. Gudbin ayaa loo baahan yahay.<br>Heerka xarunta daryeelka oo 24-saacadood ah oo loogu talagalay sifaynta jirka 'detox' iyo daaweynta isticmaalka mukhaadaraadka. |  | Xubnaha oo dhan |
| **Daawooyinka La iska caawiyo ee Daaweynta (MAT) ee loogu talagalay Dhibaatada Isticmaalka Mukhaadaraadka (SUD)**<br>Malaha xad, shuruudaha baahida caafimaad ayaa dhici karta in loo baahdo in la buuxiyo si loo helo adeegan. Adeegyada waa in uu sameeyaa daryeel bixiyaha YCCO oo ka tirsan qorshe caafimaad 'in-network provider'. | <br> | Xubnaha oo dhan |

| Adeega | Sida loo helo | Cidda heli karta |
|---|---|---|
| MAT waa isticmaalka daawooyinka oo lagu daray la talin iyo daaweynta hab-dhaqanka oo loogu talagalay daaweynta dhibaatooyinka isticmaalka mukhaadaraadka. | | |
| **Adeegyada bukaan-socodka iyo caafimaadka hab-dhaqanka ee ay bixiyaan-dadka isku faca ah ee laga helo daryeel bixiyaha ka tirsan qorshe caafimaad ‘in-network provider’**<br>Malaha xad. Ma jiro wax oggolaansho ah ama gudbin loogu talagalay adeegyada laga helo YCCO ka tirsan qorshe caafimaad ‘in-network provider’.<br><br>Adeegyada caafimaadka hab-dhaqanka waxaa laga sameeyaa goob bukaan-socod. |  | Xubnaha oo dhan |
| **Adeegyada Qofka Takhasuska leh Caafimaadka Hab-dhaqanka**<br>Malaha xad.<br><br>Adeegyada qofka takhasuska leh caafimaadka hab-dhaqanku waa adeegyo aad ka hesho daryeel bixiyaha caafimaadka hab-dhaqanku oo ku takhasusay meel gaar ah caafimaadka hab-dhaqanka, tusaalooyinku waa daaweynta koox ahaaneed ama baaritaanka nafsiyeed. |  | Xubnaha oo dhan |
| **Adeegyada Dhibaatada Isticmaalka Mukhaadaraadka (SUD)**<br>Malaha xad. Ma jiro wax oggolaansho ah ama gudbin loogu talagalay adeegyada laga helo YCCO ka tirsan qorshe caafimaad ‘in-network provider’. Oggolaansho hore ayay dhici kartaa in looga baahdo daryeel bixiyayaasha ka baxsan degaanka.<br><br>Adeegyada SUD waa adeegyo loo isticmaalo in lagu daaweeyo xadgudubka mukhaadaraadka am aalkolada. |  | Xubnaha oo dhan |

**Shaxanka sare ma aha liiska buuxa ee adeegyada u baahan oggolaansho hore ama gudbin.** Haddii aad hayso su’aalo, fadlan Adeega Macmiilka YCCO ka wac 855-722-8205.

## Faa’iidooyinka ilkaha

Dhammaan xubnaha ka tirsan Qorshaha Caafimaadka Oregon waxay leeyihiin **caymiska ilkaha. OHP waxay bixisaa caymiska nadiifinta, raajatada, buuxinta, iyo adeegyada kale ee**

**ilkahaaga ka dhiga kuwo caafimaad qaba.**

**Ilko caafimaad qabaa waa kuwo muhiim u ah da'kasta. Halkan waxaa ku qoran xaqiiqooyin muhiim ah oo ku saabsan daryeelka ilkaha:**


- Waxay gacan ka geysan kartaa ka hortagga xanuun.
- Ilko caafimaad qabaa waxay wadnahaaga iyo jirkaaga ka dhigaan kuwo caafimaad qaba, sidoo kale.
- Waa in aad aragto dhakhtarkaaga ilkaha hal mar sanadkii.
- Marka aad uur leedahay, in aad ilkahaaga iyo ciridkaaga ka dhigto kuwo caafimaad qaba waxay ilaalin kartaa caafimaadka ilmahaaga.
- Hagaajinta dhibaatooyinka ilkuhu waxay kaa caawin kartaa in aad xakameyso sonkorta dhiiggaaga.
- Carruurtu waa in ay yeeshaan baaritaankooda u horreeya ee ilkaha marka ay gaaraan 1 sano.
- Infekshanka afkaagu wuxuu ku faafi karaa wadnahaaga, maskaxdaada iyo jirkaaga.

**Dhakhtarkaaga daryeelka aasaasiga ee ilkaha (PCD) ayay dhici kartaa in uu kuu gudbiyo qof takhasus u leh noocyada daryeelka qaarkood. Noocyada dadka takhasuska u leh ilkaha waxaa ka mid ah:**

- Dhakhaatiirta gudaha ilkaha 'endodontists' (ee loogu talagalay buuxinta salka gawska 'root canals')
- Dhakhtarka daryeelka ilkaha 'pediodontist' (oo loogu talagalay dadka waaweyn ee qaba baahiyaha gaarka ah, iyo carruurta)
- Periodontist (oo loogu talagalay ciridka)
- Dhakhtarka ilkaha iyo daanka 'orthodontist' (ee xaaladaha daran, oo loogu talagalay biraha lagu xiro ilkaha 'braces')
- Dhakhaatiirta qalliinka afka (oo loogu talagalay saarida iliga ee u baahan seexin ama suuxdin guud).

**Fadlan ka fiiri shaxanka hoose wixii la xiriira adeegyada ilkaha ee caymiskooda la bixiyo.** Adeegyada caymiskooda la daboolo oo dhan waa kuwo lacag la'aan ah. Waa kuwo caymiskooda la bixiyo ilaa iyo inta uu daryeel bixiyahaagu yiraahdo waad u baahan tahay adeegyada. Fiiri tiirka "Adeega" si aad u aragto inta jeer ee aad adeeg kasta ku heli karto lacag la'aan. Fiiri tiirka "Sida loo helo" si aad u aragto haddii aad u baahan tahay in aad hesho gudbin ama oggolaansho hore loogu talagalay adeeg. Haddii aad ku aragto * jaantusyada faa'iidada, tani waxay ka dhigan tahay in adeega ay dhici karto in la daboolo wax ka baxsan xadka liiska ku jira ee loogu talagalay xubnaha da'doodu ka yar tahay 21 jir haddii uu caafimaad ahaan lagama maarmaan yahay oo ku habboon yahay.

Haddii aad ku aragto * jaantusyada faa'iidada, tani waxay ka dhigan tahay in adeega ay dhici karto in la daboolo wax ka baxsan xadka loogu talagalay xubnaha da'doodu ka yar tahay 21 jir haddii uu caafimaad ahaan lagama maarmaan yahay oo ku habboon yahay.

| Adeega | Sida loo helo | Cidda heli karta |
|---|---|---|
| **Daryeelka Ilkaha ee Degdega ama Dhakhsaha ah**<br>Malaha xad.<br><br>Daryeelka ilkaha ee degdega ama dhakhsaha ah waa daryeel loogu talagalay dhibaatada ilkaha oo aanan sugi karin booqasho la qorsheeyay oo aad la leedahay dhakhtarkaaga ilkaha. Tusaalooyinka: xanuun daran ama infekshan, dhiig bax ama barar, dhaawacyo soo gaara ilkaha ama ciridka. |  | Xubnaha oo dhan |
| **Baaritaanada Afka**<br>Xubnaha uurka leh: Laba jeer sanadkii<br>Xubnaha da'doodu ka yar tahay 19 jir: Laba jeer sanadkii*<br>Xubnaha da'doodu tahay 19 jir iyo ka weyn: Hal mar sanadkii*<br>Ma jiro wax oggolaansho ah ama gudbin loogu talagalay adeegyada laga helo YCCO ka tirsan qorshe caafimaad 'in-network provider'.<br><br>Baaritaanada ilkuhu waa baaritaanka ilkaha ama ciridka oo uu sameeyo dhakhtarkaaga daryeelka aasaasiga ee ilkaha si uu fiiriyo in ay dalool yeesheen ama dhibaatooyinka kale ee la xiriira ilkaha. |  | Xubnaha oo dhan |
| **Nadiifinta Afka**<br>Xubnaha da'doodu ka yar tahay 21 jir: Laba jeer sanadkii*<br>Dhammaan xubnaha kale: Hal mar sanadkii<br>Ma jiro wax oggolaansho ah ama gudbin loogu talagalay adeegyada laga helo YCCO ka tirsan qorshe caafimaad 'in-network provider'.<br><br>Nadiifinta afku waa soo saarista wasaqda/huurada 'plaque' ee ilkaha si looga hortaggo in ay ilkuhu dalool yeeshaan. |  | Xubnaha oo dhan |
| **Daawada ilkaha fluoride varnish**<br>Xubnaha ilaa da'da 18 jir: Laba jeer sanadkii*<br>Xubnaha ilaa da'da 18 jir ee leh halis sare: Afar jeer sanadkii*<br>Xubnaha da'doodu tahay 19 jir iyo ka weyn: Hal mar sanadkii*<br>Xubnaha da'doodu tahay 19 jir iyo ka weyn ee leh halis sare: Ilaa afar jeer sanadkii*<br>Ma jiro wax oggolaansho ah ama gudbin loogu talagalay adeegyada laga helo YCCO ka tirsan qorshe caafimaad 'in-network provider'. |  | Xubnaha oo dhan |

| Adeega | Sida loo helo | Cidda heli karta |
|---|---|---|
| Daawada ilkaha fluoride varnish waa daaweynta ilkaha oo dahaar la saaro ilkaha si ay gacan uga geysato ka hortagga ilkaha oo suus yeesha, hoos u dhigida ama joojinta in ay ka sii daraan. | | |
| **Raajatada Afka**<br>Ku kooban hal mar sanadkii. Waxaa dhici karta in kuwo badan caymiskooda la bixiyo haddii ilko ahaan ama caafimaad ahaan ku habboon yihiiin.<br>Ma jiro wax oggolaansho ah ama gudbin loogu talagalay adeegyada laga helo YCCO ka tirsan qorshe caafimaad 'in-network provider'.<br><br>Raajatada afku waa raajato laga qaado ilkaha afka si looga baaro in ilkuhu dalool yeesheen ama dhibaatooyinka kale ee iliga. |  | Xubnaha oo dhan |
| **Dahaarida ilkaha**<br>Dadka da'doodu ka yar tahay 16 jir. Ilkaha Dambe ee Dadka Waaweyn Hal Mar 5-tii Sanaba. Oggolaanshuhu wuxuu ku saleysan tilmaamaha OHP.*<br>Ma jiro wax oggolaansho ah ama gudbin loogu talagalay adeegyada laga helo YCCO ka tirsan qorshe caafimaad 'in-network provider'.<br><br>Dahaarida ilkuhu waa dahaar balaastik khafiif ah oo la kor mariyo ilkaha gadaasha ku yaala si looga ilaaliyo jeermiska oo looga hortaggo in ay ilkuhu dalool yeeshaan. Dahaarida ilkaha waa in la mariyaa iskala marka uu ilmuhu helo ilkihiisa joogtada ah ee gadaasha ku yaala (molars). Ilkaha ugu dambeeya 'molars' oo dhan haddii aysan lahayn suuska ilkaha waa in ay yeeshaan dahaarida ilkaha. Carruurtu waxay u baahan yihiin in dahaar la saaro gawsahooda u soo horreeya 'molars' inta u dhaxaysa da'da 6 iyo 9 jir sidoo kalena dahaar la saaro gawsahooda 'morals' labaad inta u dhaxaysa 10 iyo 14 jir. |  | Xubnaha da'doodu ka yar tahay 16 jir |
| **Buuxinta**<br>Malaha xad.<br>Ma jiro wax oggolaansho ah ama gudbin loogu talagalay adeegyada laga helo YCCO ka tirsan qorshe caafimaad 'in-network provider'. |  | Xubnaha oo dhan* |

| Adeega | Sida loo helo | Cidda heli karta |
|---|---|---|
| Buuxinta waxaa loo isticmaalaa in lagu daaweeyo dalool yar, ama daloolka, ku yaala iliga. Buuxintu waa in ay noqotaa maadada amalgam ama isku dhafan ‘composite’. | | |
| **Ilkaha qayb ahaan ama dhammaan macmalka ah**<br>Qayb ahaanta ah: Hal Mar 5-tii Sanaba<br>Buuxa: Hal Mar 10-kii Sanaba<br>Oggolaanshuhu wuxuu ku saleysan tilmaamaha OHP.<br><br>Ilkaha qayb ahaan macmalka waa saxan leh mid ama ka badan oo ah ilko been ah oo ku yaal si ay beddelaan waxa afka ka maqan, ma beddeli doonaan dhammaan ilkaha ku yaala dhinacyada afka ee sare ama hoose, qaar baa la soo saari karaa, iyada oo qaarna ay leeyihiin biinan ‘clips’ si ay ugu hayaan afka.<br><br>Ilkaha dhammaantood macmalka ah ‘complete dentures’ waa kuwo la soo saari karo oo la beddeli karo oo loogu talagalay afka sare ama hoose marka ilka oo dhan ay maqan yihiin. | Oggolaansho hore ayaa looga baahan yahay dhammaan adeeg bixiyaasha<br><br>Gudbin ayaa loo baahan yahay haddii aan la arkayn dhakhtarka ilkaha oo ka tirsan qorshe caafimaad ‘in-network’ | Xubnaha oo dhan |
| **Kabida ilkaha**<br>Ilka Sare iyo Kuwa Hoose ee Hore Qaarkood. 4 ah Kabida Ilkaha 7-dii Sano ee Kasta. Oggolaanshuhu wuxuu ku saleysan tilmaamaha OHP.*<br>Shuruudaha qaarkood waa in la buuxiyaa si loo helo kabida ilkaha ‘crown’. Faa’iidooyinku waxay ku kala duwan yihiin nooca kabida ilkaha ‘crown’, ilkaha gaarka ah ee u baahan daryeel, da’da, iyo xaalada uur lahaanshaha. La xiriir qorshahaaga caafimaadka ilkaha.<br><br>Kabida ilkuhu ‘crown’ waa ilig leh qaabka daboolka ‘tooth-shaped cap’ oo lagu daboolo iliga si loo hagaajiyo. | Oggolaansho hore ayaa looga baahan yahay dhammaan adeeg bixiyaasha | Xubnaha uurka leh iyo xubnaha da’doodu ka yar tahay 21 jir* |

| Adeega | Sida loo helo | Cidda heli karta |
| --- | --- | --- |
| | Gudbin ayaa loo baahan yahay haddii aan la arkayn dhakhtarka ilkaha oo ka tirsan qorshe caafimaad 'in-network' | |
| **Saarida ilkaha**<br>Malaha xad.  Ma jiro wax oggolaansho ah ama gudbin loogu talagalay adeegyada laga helo YCCO ka tirsan qorshe caafimaad 'in-network provider'.<br><br>Saarida iligu waa marka dhakhtarka ilkuhu uu si buuxda iligaaga uga soo saaro godkiisa. | Gudbin ayaa loo baahan yahay haddii aan la arkayn dhakhtarka ilkaha oo ka tirsan qorshe caafimaad 'in-network' | Xubnaha oo dhan |
| **Daaweynta Buuxinta Salka Gawska**<br>Da'doodu ka yar tahay 21:  Caymiskooda Lama bixinayo Gawsaha Saddexaad (Wisdom Teeth).*<br>Xubnaha uurka leh: Waxaa la bixinayaa caymiska Gawsaha U soo horreeya 'First Molars'<br>Dhammaan xubnaha kale:  Kaliya Ilkaha Hore iyo Gawsaha-Hortiis 'Pre-Molars'.   Oggolaanshuhu wuxuu ku saleysan tilmaamaha OHP. | Oggolaansho hore ayaa looga baahan | Xubnaha oo dhan |

| Adeega | Sida loo helo | Cidda heli karta |
|---|---|---|
| Buuxinta salka gawska ‘root canal’ waa nidaamka qalliinka ilkaha oo ku lug leh soo saarida unugyada jilicsan ee infekshanka yeeshay (dental pulp) ee iliga gudihiisa. Marka la nadiifiyo iliga, kanaalka daloola ayaa laga buuxiyaa waxyaabo joogto ah waxaana dhici karta in lagu daboolo wax lagu kabo ‘crown’. | yahay gawsaha ‘molars’ ee dhammaan adeeg bixiyaasha  Gudbin ayaa loo baahan yahay haddii aan la arkayn dhakhtarka ilkaha oo ka tirsan qorshe caafimaad ‘in-network’ | |
| **Orthodontics**<br>Xaaladaha ay ka mid yihiin dilaaca faruurta iyo palate, ama marka hadalka, wax calalinta iyo shaqooyinka kale uu saameyn ku yeesho. Waxaa la iskaga baahan yahay in aad oggolaansho ka haysato dhakhtarkaaga ilkaha iyo in aadan yeelan wax ilko ah oo dalool yeeshay ama cudurka ciridka.*<br><br>Daaweynta toosinta ilkuhu ‘orthodontics’ waxay isticmaashaa biraha lagu xiro ilkaha ‘braces’ si loo daaweeyo cilladaha ‘irregularities’ ka jira ilkaha iyo daanka si loo hagaajiyo habka ay iskugu toosan yihiin. |  | Xubnaha da’doodu ka yar tahay 21 jir* |

**Shaxanka sare ma aha liiska buuxa ee adeegyada u baahan oggolaansho hore ama gudbin.** Haddii aad hayso su’aalo, fadlan Adeega Macmiilka ka wac 855-722-8205.

## Xubnaha Barnaamijka Ilkaha ee Halgamaha Ururka Xorta ah Iskutagay (COFA)

Haddii aad tahay xubin ka tirsan Barnaamijka Ilkaha ee Qofka soo Halgama ama Barnaamijka Ilkaha COFA (“OHP Dental”), YCCO waxay **kaliya** bixisaa faa’iidooyinka ilkaha iyo gaadiid raacid lacag la’aan ah (NEMT) oo lagu aadayo ballamaha ilkaha.

OHP iyo YCCO ma bixiyaan helitaanka adeegyada caafimaadka jirka iyo caafimaadka hab-dhaqanka ama gaadiid raacid lacag la'aan ah oo loogu talagalay adeegyadani.

Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan caymiska iyo waxa ay yihiin faa'iidooyinka la heli karo Adeega Macmiilka kala xiriir 855-722-8205.

## OHP Bridge waxaa loogu talagalay dadka waaweyn ee dhakhligoodu sarreeyo

OHP Bridge waa xirmada faa'iidada oo cusub oo daboosha caymiska dadka waaweyn ee dhakhligoodu sarreeyo  OHP Bridge waa mid lacag la'aan ah.  Dadka heli kara OHP Bridge waa in ay:

- Yihiin  19 ilaa 64 sano jir
- Yeeshaan dakhli u dhexeeya boqolkiiba 138 iyo boqolkiiba 200 ee qiyaasta heerka saboolnimada ee federaalka u dhigan (FPL);
- Yeeshaan muwaadinimo loo qalmo ama xaalad muhaajirnimo si loogu qalmo; oo,
- Aysan heli karin caymiska caafimaadka la awoodi karo oo kale.

Haddii aad soo sheegto dhakhli sarreeya marka aad dib u cusboonaysiiso OHP aad leedahay, waxaa dhici karta in aad u wareegto OHP Bridge. Waxyaabo dheeraad oo ku saabsan OHP Bridge ka ogow https://www.oregon.gov/oha/hsd/ohp/pages/bridge.aspx.

**OHP Bridge waa mid ku dhawaad ay isku mid yihiin OHP Plus.** Waxaa jira waxyaabo dhowr ah oo OHP Bridge aanay bixin caymiskiisa, oo ay ku jiraan:

- Adeegyada iyo taageerada daryeelka muddada fog (LTSS)
- Baahiyaha bulsho ee la xiriira caafimaadka (HRSN)

## Baahiyaha Bulsho ee La Xiriira Caafimaadka

Baahiyaha Bulsho ee La Xiriira Caafimaadku (HRSN) waa baahiyo bulsho iyo dhaqaale oo saameyn ku yeelanaya awooda aad ku noqonayso qof caafimaad qaba oo caafimaad dareemaya. Adeegyadani waxay caawiyaan xubnaha la kulmaya isbeddelada nololeed oo weyn.    Macluumaad dheeraad ah ka hel: https://www.oregon.gov/OHA/HSD/Medicaid-Policy/Pages/HRSN.aspx

Fadlan ka codso YCCO in aad aragto waxa ay yihiin faa'iidooyinka HRSN ee lacag la'aanta ah ee la heli karo. Faa'iidooyinka HRSN waxaa ka mid ah:

- Adeegyada Guryaha:  Iska caawinta ijaarka iyo adeegyada 'utilities', si loo helo ama loo haysto guryaha, kharashyada guuritaanka, iyo adeegyada si laguu taageero ijaarte ahaan.
- Adeegyada Cimilada: Caawimaada ku aadan qaboojiyayaasha hawada ee caafimaadka la xiriira, qalabka wax diiriya, qalabka sifeynta hawada, agabka korontada oo la qaadan karo iyo qaboojiyayaasha yar yar.
- Adeegyada Nafaqada:  Caawimaad waxaa ku jira la-talinta nafaqada, cuntooyinka caafimaad ahaan ku habboon, kaydka cuntooyinka ama goobaha cuntada, miraha iyo khudaarta la isku qoro.

Waxaa dhici karta in aad hesho qaarka ka mid ah ama dhammaan faa'iidooyinka HRSN haddii aad tahay Xubin ka tirsan OHP, ama mid ama ka badan oo ah kuwa hoos ku qoran:

- Aad tahay guri la'aan ama aad leedahay dakhli ah boqolkiiba ah 30% ama ka yar heerka dakhliga dhexdhexaadka ah ee degaanka ama aadan lahayn nidaamyada ilaha ama taageero si looga hortaggo guri la'aanta.;
- Lagaa saaray Xarun loogu talagalay Cudurka Maskaxda;
- Lagaa sii daayay meel la isku hayay 'incarceration';
- Aad tahay dhallinyaro ka wareegaysa nidaamka daryeelka carruurta;
- Aad tahay Qof Dhallinyaro ah oo Weyn oo qaba Baahiyaha Daryeelka Caafimaad ee Gaarka ah;
- Aad tahay qof u wareegaya laba xaaladood oo lala leeyahay OHP and Medicare; ama

Waa in aad sidoo kale buuxisaa shuruudaha kale. Wixii su'aalo ama si la isku baaro, fadlan la xiriir YCCO. YCCO waxay kaa caawin kartaa in la qorsheeyo ballamo loogu talagalay faa'iidooyinka HRSN.

Fadlan ogow in la is baaro iyo si loo helo faa'iidooyinka HRSN, xogtaada gaar ahaaneed ayay dhici kartaa in la soo ururiyo oo loo adeegsado gudbinta. Waad xaddidi kartaa sida macluumaadkaaga loo wadaago.

Haddii la oggolaado, waxaad dooran kartaa sida aad u hesho faa'iidooyinka HRSN. Faa'iidooyinka HRSN waa kuwo lacag la'aan kuu ah waqti kasta ayaadna go'aansan kartaa in aadan ka qayb qaadan. Haddii aad hesho faa'iidooyinka HRSN, kooxdaada isku duwida daryeelka ayaa kula shaqeyn doonta si loo xaqiijiyo in qorshahaaga daryeelka la cusboonaysiiyay. Ka fiiri bogga 32 Isku duwida Daryeelka iyo qorshayaasha daryeelka.

Xubnuhu waxay xaq u leeyihiin in ay rafcaan ka qaataan diidmada loogu talagalay faa'iidooyinka HRSN.

### Qoraalo Muhiim ah:

- Gaadiid raacida lagu aadayo daryeel looma isticmaalo karo adeegyada HRSN.
- OHP Bridge ma bixiso caymiska adeegyada HRSN.

## Adeegyada ay OHP lacagtooda bixiso

YCCO ayaa bixisa lacagta daryeelkaaga, laakiin waxaa jira adeegyada qaarkood oo aynaan lacagtooda bixin. Kuwani weli waa kuwo la bixinayo caymiskooda waxaan lacagtooda bixin doona barnaamijka Kharashka Adeega 'Fee-For-Service' ee Qorshaha Caafimaadka Oregon (kaarka furan). CCO-yadu waxay mararka qaarkood ugu yeeraan faa'iidooyinka "adeegyada aan la daboolin caymiskooda". Waxaa jira laba nooc oo adeegyo oo OHP lacagtooda si toos ah u bixiso:

1. Adeegyada meesha aad isku duwida daryeelka ka heli karto YCCO.
2. Adeegyada meesha aad isku duwida daryeelka ka heli karto OHP.

## Adeegyada lala leeyahay isku duwida daryeelka YCCO

YCCO waxay weli ku siinaysaa isku duwida daryeelka loogu talagalay adeegyada qaarkood. Isku duwida Daryeelka macnaheedu waa in aad heli doonto gaadiid raacid lacag la'aan ah oo ka socota WellRide oo loogu talagalay adeegyada caymiskooda la daboolo, hawlaha taageero iyo ilo kasta oo aad u baahan tahay oo loogu talagalay adeegyada aan caymiskooda la daboolin.

**Kala xiriir YCCO adeegyada soo socda:**

- Adeegyada Dhalashada Bulshada La Qorsheeyay (PCB) oo uu ku jiro daryeelka dhalashada ilmaha ka hor iyo dhalmada ka dib ee loogu talagalay dadka la kulmaya uur halis hoose leh sida ay go'aamiso Qaybta Nidaamyada Caafimaadka ee OHA. OHA ayaa ka mas'uul ah siinta iyo bixinta lacagta adeegyada aasaasiga ah ee PCP oo ay ku jiraan ugu yaraan, xubnahaasi loo oggolaaday PCP-yada, qiimeynta bilowga ah ee ilmaha cusub ee dhasha, baaritaanka barta dhiigga ee ilmaha cusub ee dhasha, oo ay ku jiraan xirmada baaritaanka, daryeelka foosha iyo dhalmada, booqashooyinka dhalashada ilmaha ka hor iyo daryeelka dhalmada ka dib.
- Adeegyada iyo taageerada daryeelka muddada fog (LTSS) ee aysan lacagtiisa bixin YCCO.
- Adeegyada Family Connects Oregon, kaasi oo bixiya taageero loogu talagalay qoysaska haysta carruurta cusub ee dhalata. Macluumaad dheeraad ah ka hel https://www.familyconnectsoregon.org/.
- Ka caawinta xubnaha ee in ay helaan adeegyada caafimaadka hab-dhaqanka. Tusaalooyinka adeegyadani waa:
    - Daawooyinka qaarkood oo loogu talagalay xaaladaha caafimaadka hab-dhaqanka qaarkood
    - Lacag bixin loogu talagalay daaweynta guryaha koox ahaanta loo degan yahay oo loogu talagalay xubnaha da'doodu ka yar tahay 21 sano jir
    - Daryeelka muddada fog ee dhimirka (caafimaadka hab-dhaqanka) ee loogu talagalay xubnaha da'doodu tahay 18 sano jir iyo ka weyn
    - Daryeelka gaar ahaaneed oo ka jira guryaha daryeelka dadka waayeelka ee loogu talagalay xubnaha da'doodu tahay 18 sano jir iyo ka weyn

Wixii macluumaad dheeraad ah ama liis dhammeystiran oo ku saabsan adeegyadan, Maamulka Daryeelka ka wac 833-257-2191 ama Adeega Macmiilka ka wac 855-722-8205.

## Adeegyada ay OHP lacagtooda bixiso ee ay bixiso isku duwida daryeelka

**Kala xiriir OHP adeegyada soo socda:**

- Adeegyada daryeelka raaxada (hospice) ee loogu talagalay xubnaha ku nool xarumaha dadka lagu xanaaneeyo ee xirfada leh
- Adeegyada dugsiga ku saleysan ee lagu bixiyo sida uu dhigayo Xeerka Waxbarashada Dadka Naafada ah (IDEA). Oo loogu talagalay carruurta adeegyada caafimaad ka hesha dugsiga, sida daaweynta hadalka.
- Baaritaan caafimaad si loo ogaado haddii aad u qalanto barnaamij taageero ama qorsheynta shaqada kiiska
- Adeegyada la siiyo xubnaha Barnaamijka Healthier Oregon
- Iska soo saarista ilmaha iyo nidaamyada kale ee lagu joojinayo uur lahaansho

- Isdilka uu dhakhtar caawimaad ka geysanayo ee la raacayo Xeerka Dhimashada Oregon ee Sharafta leh iyo adeegyada kale

Kooxda Isku duwida Daryeelka Acentra ee OHP kala xiriir 800-562-4620 si aad u hesho macluumaad dheeraad iyo caawimaad lagaa siiyo adeegyadani.

Waxaad heli kartaa gaadiid raacid lacag la'aan ah oo ka socota WellRide oo loogu talagalay mid kasta oo ka mid ah adeegyadani. Fiiri bogga 65 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah. WellRide ka wac 844-256-5720 si aad u qorsheysato gaadiid raacid ama u weydiiso su'aalo.

## Diidmada damiir ahaaneed iyo diimeed

YCCO ma xaddidayso adeegyada iyada oo ku saleysanaysa diidmada damiir ahaaneed iyo diimeed. Waxaa dhici karta in ay jiraan daryeel bixiyayaasha qaarkood oo ka tirsan nidaamkayaga oo leh diidmada damiir ahaaneed iyo diimeed. Fadlan nagala soo xiriir 855-722-8205 haddii aad hayso su'aalo ku saabsan tani. Waxaan kaa caawin karnaa in aad hesho adeeg bixiye bixin kara adeega.

# Helitaanka daryeelka aad u baahan tahay

Helitaanka daryeel caafimaad macnihiisu waa in aad heli karto daryeelka aad u baahan tahay. Waxaad u heli kartaa daryeel hab buuxinaya baahiyahaaga dhaqan iyo luqaddeed. YCCO waxay xaqiijin doontaa in daryeelka la isku dubarido si loo buuxiyo baahiyahaaga helitaanka. Fiiri bogga 32 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Isku duwida Daryeelka. Haddii YCCO aysan la shaqeyn daryeel bixiye buuxinaya baahiyahaaga helitaanka, waxaad adeegyadani ka heli kartaa daryeel bixiyayaasha ka baxsan nidaamka caymiska 'out-of-network'. YCCO waxay xaqiijisaa in adeegyadu u dhow yihiin halka aad ku nooshahay ama u dhow yihiin halka aad ka rabto daryeelka. Tani macnaheedu waa in ay jiraan daryeel bixiyayaal ku filan oo ka jira degaanka waxaana jira noocyada daryeel bixiye oo kala duwan oo aad ka soo dooran karto.

Waan la soconaa daryeel bixiyayaashayada ka baxsan nidaamka si loo xaqiijiyo in aan leenahay daryeelka aasaasiga ah iyo qofka takhasus leh ee aad u baahan tahay. Waxaan sidoo kale xaqiijinaa in aad heli karto dhammaan a deegyada caymiskooda la daboolo oo degaankaaga ka jira.

YCCO waxay raacdaa xeerarka gobolka ee ku saabsan fogaanshaha ay dhici karto in aad u baahato in aad safarto si aad u aragto daryeel bixiye. Xeerarku way kala duwan yihiin iyaga oo ku saleysan daryeel bixiyaha aad u baahan tahay in aad aragto iyo degaanka aad ku nooshahay. Daryeel Bixiyayaasha Aasaasiga ah waa "Tier 1", oo macnihiisu yahay in ay kaaga soo dhawaan doonaan qof takhasus leh sida Dermatology, oo ah "Tier 3". Haddii aad ku nooshahay meel fog, waxay qaadan doontaa waqti dheer in loo tago daryeel bixiye marka loo eego haddii aad ku nooshahay meel magaalo ah. Haddii aad caawimaad uga baahan tahay gaadiid lagu tagayo oo lagaga soo noqonayo ballamo, fiiri bogga 65.

Jaantuska hoose ayaa qoraya liisaska heerarka daryeel bixiyayaasha iyo waqtiga (oo ku qoran daqiiqado) ama masaafada (oo ku qoran mayl) ee halka ay ku yaalaan iyada oo ku saleysan halka aad ku nooshahay.

| | Magaalo Weyn | Magaalo | Miyiga | Degaan leh Tixgelinta Gelitaan Daran |
|---|---|---|---|---|
| Heerka 1 | 10 daqiiqo ama 5 mayl | 25 daqiiqo ama 15 mayl | 30 daqiiqo ama 20 mayl | 40 daqiiqo ama 30 mayl |
| Heerka 2 | 20 daqiiqo ama 10 mayl | 30 daqiiqo ama 20 mayl | 75 daqiiqo ama 60 mayl | 95 daqiiqo ama 85 mayl |
| Tier 3 | 30 daqiiqo ama 15 mayl | 45 daqiiqo ama 30 mayl | 110 daqiiqo ama 90 mayl | 140 daqiiqo ama 125 mayl |

Wixii macluumaad dheeraad ee ku saabsan kuwa ay yihiin daryeel bixiyayaasha dhaca heerar kala duwan, booqo website-ka Nidaamka Ku filnaanshaha OHA ee:
https://www.oregon.gov/oha/HSD/OHP/Pages/network.aspx

Aan hubin nooca aad ku nooshahay?    Fiiri khariidada.

## Noocyada Goobta:


- **Magaalo Weyn (3):** Meelaha Magaalooyinka ah ee La isku daray, sida kor ku qeexan, oo leh qiyaasta isku darka dadka oo ka weyn ama u dhiganta 1,000,000 oo qof iyada oo cufnaanta dadkuna ka weyn tahay ama u dhiganto 1,000 qof halkii mayl ee laba jibaaran.

- **Magaalada (2):** Ka yar ama u dhiganta ilaa 10 mayl laga soo bilaabo bartamaha 40,000 ama ka badan.

- **Miyiga (1):** Ka weyn 10 mayl laga soo bilaabo bartamaha 40,000 ama ka badan oo leh cufnaanta dadka ee degaanka oo ka weyn 10 qof halkii mayl ee laba jibaaran.

- **Degaan leh Tixgelinta Walwalka Gelitaan (4):** Degaannada leh 10 qof ama ka yar halkii mayl ee laba jibaaran.

Aan hubin nooca degaan ee aad ku nooshahay?    Fiiri khariidada:




*Muuqaalka 1: Khariidada deegaan juqraafiyeedka ku yaala Oregon sida lagu qeexay nidaamka ku filnaanshaha. Kala duwanaanshaha degaanka waxaa ka mid ah: Magaalo Weyn, Magaalo, Miyiga, iyo Degaan leh Tixgelinta Gelitaan Daran (CEAC).*

Daryeel bixiyayaashayadu waxay sidoo kale xaqiijin doonaan in aad yeelan doonto gelitaan jireed, qorshayaal macquul ah, qalab la geli karo haddii aad leedahay naafanimo jireed iyo/ama maskaxeed. YCCO ka wac 855-722-8205 si aad u codsato qorshayaal. Daryeel bixiyayaashu

sidoo kale waxay xaqiijiyaan in saacadaha shaqada ee xafiisku ay isku mid u yihiin xubnaha ka tirsan OHP iyo qof kasta oo kale.

## Inta ay qaadanayso in la helo daryeel

Waxaan daryeel bixiyayaasha kala shaqeynaa xaqiijinta in lagu arko, daaweeyo, lagugu gudbiyo waqtiyada hoos ku qoran gudahooda:

| Nooca daryeelka | Waqtiga loo qabtay |
|---|---|
| Caafimaadka jirka | |
| Ballamo joogta ah | Muddo 4 toddobaad gudahood ah |
| Daryeelka degdega ah | Muddo 72 saacadood gudahood ah ama sida lagu tilmaamay baaritaankii bilowga ahaa. |
| Daryeelka degdega ah | Isla markiiba ah ama la isku gudbiyo waaxda xaalada degdega ah iyada oo ku xiran xaaladaada. |
| Daryeelka afka iyo ilkaha oo loogu talagalay carruurta iyo dadka aan uurka lahayn | |
| Ballamada caafimaadka afka ee joogtada ah | Muddo 8 toddabaad gudahood ah aan ka ahayn iyada oo ay jirto sabab caafimaad oo la sugayo muddo dheer. |
| Daryeelka afka ee degdega ah | Muddo 2 toddobaad gudahood ah. |
| Adeegyada ilkaha ee degdega ah | La isku arko ama la isku daaweeyo muddo 24 saacadood gudahood ah |
| Daryeelka afka iyo ilkaha oo loogu talagalay dadka uurka leh | |
| Daryeelka afka ee joogtada ah | Muddo 4 toddabaad gudahood ah aan ka ahayn iyada oo ay jirto sabab caafimaad oo la sugayo muddo dheer. |
| Daryeelka ilkaha ee degdega ah | Muddo 1 toddobaad gudahood ah |
| Adeegyada ilkaha ee degdega ah | La isku arko ama la isku daaweeyo muddo 24 saacadood gudahood ah |
| Caafimaadka hab-dhaqanka | |
| Daryeelka caafimaadka hab-dhaqanka joogtada oo loogu talagalay dadka aan mudnaanta lahayn ‘non-priority’ | Qiimeyn lagu sameynayo muddo 7 maalmood gudahood ah laga bilaabo codsiga, iyada oo ballan labaad la qorsheynayo hadba sida ay caafimaad ahaan ugu habboon tahay. |
| Daryeelka caafimaadka hab-dhaqanka degdega ah oo loogu talagalay dhammaan dadka | Muddo 24 saacadood gudahood ah |

| Nooca daryeelka | Waqtiga loo qabtay |
|---|---|
| Daryeelka caafimaadka hab-dhaqanka gaarka ah oo loogu talagalay dadka mudnaanta leh* | |
| Dadka uurka leh, dadka soo halgama iyo qoysaskooda, dadka leh carruurta, daryeel bixiyayaasha aan lacagta la siinayn, qoysaska, iyo carruurta ay da'doodu tahay 0-5 sano, xubnaha qaba with HIV/AIDS ama qaaxada, xubnaha halista ugu jira xaalada koowaad ee waalida 'psychosis' iyo dadka ah I/DD | Qiimeynta degdega ah iyo gelitaanka. Haddii adeegyo ku meel gaar ah loo baahan yahay iyada oo sababtu tahay iyada oo aysan jirin daryeel bixiyayaal leh booqashooyin, daaweyn gaarsiisan heerka saxda ah ee daryeelka waa in ay ku dhacdaa muddo 120 maalmood gudahood ah laga bilaabo marka bukaanka la geliyo liiska sugitaanka. |
| Isticmaalayaasha mukhaadaraadka IV oo ay ku jirto heroin | Qiimeynta degdega ah iyo gelitaanka.<br><br>Oggolaansho loogu talagalay daryeelka heerka degaanka ayaa la iskaga baahan yahay muddo 14 maalmood gudahood ah ee marka la codsado, ama, la isku geliyo muddo 120 maalmood gudahood ah marka la is geliyo liiska sugitaanka iyada oo sababtu tahay iyada oo aysan jirin daryeel bixiyayaal leh la heli karo. |
| Dhibaatada isticmaalka Opioid | Qiimeyn iyo gelitaan ah muddo 72 saacadood gudahood |
| Daaweynta la isku caawiyo daawada | Sida ugu dhakhsaha badan, balse aan ka badnayn 72 saacadood ee loogu talagalay qiimeynta iyo gelitaanka. |

* Loogu talagalay adeegyada daryeelka caafimaadka hab-dhaqanka gaarka haddii uusan jirin qol ama meel furan:

- Waxaa lagu gelin doonaa liiska sugitaanka.
- Waxaad yeelan doontaa adeegyo kale oo lagugu siiyo muddo 72 saacadood gudahood ah.
- Adeegyadan waxay ahaan doonaan kuwo ku meel gaar ah ilaa inta uu ka jirayo qol ama meel furan.

Haddii aad hayso wax su'aalo ah oo ku saabsan helida daryeelka, Adeega Macmiilka ka wac 855-722-8205.

# Faa'iidooyinka dhammeystiran iyo ka hortagga ee loogu talagalay xubnaha da'doodu ka yar tahay 21 jir

Barnaamijka Baaritaanka Hore iyo Xilliyeedka ee Ogaanshaha iyo Daaweynta ee (EPSDT) wuxuu bixiyaa adeegyada daryeelka caafimaadka oo dhammeystiran iyo ka hortagga oo loogu talagalay xubnaha ka tirsan OHP laga soo bilaabo dhalashada ilaa 21 jir. Barnaamijkani wuxuu ku siiyaa daryeelka aad u baahan tahay ee loogu talagalay caafimaadkaaga iyo korriinkaaga. Adeegyadani waxay waqti hore qaban karaan oo gacan ka geysan karaan walwalka jira, daaweynta jirada, iyo taageerada carruurta naafada ah.

Ma aha in aad si gooni ah iskugu diiwaan geliso EPSDT; haddii da'daadu ka yar tahay 21 jir oo aad ka diiwaan gashan tahay OHP waxaad heli doontaa faa'iidooyinkani. Laga bilaabo sanadka 2025-ka Dhallinyarada Waaweyn ee qaba Baahiyaha Daryeelka Caafimaad ee Gaarka ah (oo da'doodu tahay 19 ilaa 25) ayay sidoo kale dhici kartaa in ay u qalmaan faa'iidooyinka EPSDT. La xiriir YCCO si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

## EPSDT wuxuu bixiyaa caymiska:

- Adeegyo kasta oo loo baahan yahay si loo helo ama loo daaweeyo jiro, dhaawac, ama isbeddelo kale oo ku yimaada caafimaadka.
- Baaritaanada caafimaad ee "Well-child" ama "adolescent well visit" baaritaanada, iyo adeegyada ogaanshaha cudurka si loo go'aamiyo haddii ay jiraan xaaladaha jirka, afka/ilkaha, korriinka iyo caafimaadka dhimirka oo loogu talagalay xubnaha da'doodu ka yar tahay 21 jir.
- Gudbinta, daaweynta, wax daaweynta, iyo tallaabooyinka kale oo lagu caawinayo wixii xaalado ah ee la ogaado.

Marka ay noqoto xubnaha da'doodu ka yar tahay 21 jir, YCCO waa in ay bixisaa:

- Baaritaanada iyo qiimeynta joogtada ah ee la qorsheeyay ee jireed, caafimaadka dhimirka, korriin, caafimaadka afka/ilkaha, kobaca, iyo xaalada nafaqo.
  - Haddii YCCO aysan bixin caymiska caafimaadka afka/ilkaha waxaad weli heli kartaa adeegyadani adiga oo adeegsanaya OHP oo wacaya 1-800-273-0557.
- Dhammaan adeegyada caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah ama caafimaad ahaan ku habboon waa in caymiskooda la bixiyaa ee loogu talagalay xubnaha da'doodu ka yar tahay 21 jir, iyada oo aan la eegayn haddii hore caymiskooda loo bixiyay (tani waxaa ka mid ah waxyaabaha ka hooseeya xariiqda "below the line" ee ku jira Liiska Muhiimada la siiyay). Si aad waxyaabo dheeraad ah uga ogaato liiska Muhiimada la siiyay, fiiri bogga 34.

Sida ku cad EPSDT, YCCO kuumo diidi doonta adeeg iyada oo aan marka la eegayn haddii ay tahay mid caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah ama caafimaad ahaan kugu habboon.

- *Caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah* guud ahaan macnihiisu waa daaweyn u baahan in laga hortaggo, la ogaado ama la daaweeyo xaalad, ama la taageero kobaca, korriinka, madax banaanida, iyo ka qayb qaadashada dugsiga.
- *Caafimaad ahaan ku habboon* guud ahaan macnihiisu waa in daaweyntu tahay mid ammaan ah, waxtar leh, oo kaa caawinaysa in aad ka qayb qaadato daryeelka iyo

hawlaha. YCCO waxaa dhici karta in ay doorato in ay bixiso kala doorashada aan qaaliga ahayn ee kuu shaqeyn doonto adiga.

Waa in aad mar kasta heshaa ogeysiin qoraal ah marka wax la diido, waxaanad xaq u leedahay in aad rafcaan qaadato haddii aadan ku raacsanayn go'aanka. Wixii macluumaad dheeraad ah, fiiri bogga 93.

Tani waxaa ka mid ah adeegyada *oo dhan*:

- Caafimaadka Jirka;
- Caafimaadka Hab-dhaqanka;
- Caafimaadka Ilkaha; iyo
- Baahiyaha Daryeelka Caafimaadka Bulshada.

Haddii adiga ama xubin ka tirsan qoyskaagu u baahan yahay adeegyada EPSDT, la shaqee daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah (PCP) ama la hadal isku duwaha daryeelka adiga oo wacaya 833-257-2191. Waxay kaa caawin doonaan in aad hesho daryeelka aad u baahan tahay. Haddii ay jiraan adeegyo u baahan oggolaansho, way maareyn doonaan. Kala shaqee dhakhtarkaaga daryeelka aasaasiga ee ilkaha wixii adeegyada ilkaha ee loo baahan yahay. Dhammaan EPSDT waa kuwo lacag la'aan ah.

## Caawimaada helida adeegyada EPSDT

- Adeega Macmiilka ka wac 855-722-8205 ama Maamulka Daryeelka 8205 833-257-2191.
- Adeega Macmiilka Ilkaha ka wac 800-525-6800 si aad u dejiso adeegyada ilkaha ama si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.
- Waxaad heli kartaa gaadiid raacid lagu tagayo lagana soo noqonayo booqashooyinka daryeel bixiyaha EPSDT. Wac WellRide 844-256-5720 si aad u dejiso gaadiid raacid ama si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.
- Waxaad sidoo kale weydiin kartaa PCP-gaaga ama booqo website-kayaga: https://yamhillcco.org/members/benefits-and-rights/ si aad u hesho jadwal xilliyeedka. Jadwalkani ayaa kuu sheegaya marka carruurtu baahan tahay in ay arkaan PCP-gooda.

## Baaritaanada

Booqashooyinka baaritaanada la bixiyo caymiskooda waxaa la bixiyaa inta u dhaxaysa da'da ku habboon (kuwani waxaa ka mid ah booqashooyinka caafimaadka ilmaha 'well child' ama booqashooyinka caafimaadka ee dhallinta koraysa 'adolescent well'). YCCO iyo PCP-gaaga waxay raacaan tilmaamaha Akademiyada Carruurta ee Maraykanka iyo Barnaamijka Bright Futures ee loogu talagalay baaritaanada daryeelka ka hortagga booqashooyinka caafimaadka ilmaha 'well child'. Barnaamijka Bright Futures waxaa laga heli karaa: https://www.aap.org/brightfutures. Waxaad isticmaali kartaa Qorsheeyaha Booqashada Caafimaadka si loo diyaariyo baaritaanadani.

PCP-gaaga ayaa kaa caawin doona in aad hesho adeegyadani iyo daaweyntani marka sidaasi u baahan yihiin tilmaamahani.

Booqashooyinka baaritaanka waxaa ku jira:

- Baaritaanka korriinka.
- Baaritaanka kiimikada Lead-ka:
    - Carruurtu waa in ay yeeshaan baaritaanada tijaabada ah ee kiimikada lead-ka ee dhiiga marka ay da'doodu tahay 12 bilood iyo 24 bilood. Ilme kasta oo u dhexeeya da'aha 24 iyo 72 bilood oo aan lahayn diiwaanka baaritaanada tijaabada ah ee kiimikada lead-ka ee dhiiga oo hore waa in uu helaa mid.
    - Dhammeystirka weydiimaha qiimeynta khatartu ma buuxinayaan shuruudaha baaritaanka kiimikada lead-ka ee looga baahan yahay carruurta ka tirsan OHP. Dhammaan carruurta leh ku sumowga maadada lead-ka waxay heli karaan adeegyada maamulka kiiska oo daba socda kii hore.
- Baaritaanada shaybaarka ee kale ee loo baahan yahay (sida baaritaanka dhiig yaraanta, cudurka unugga dhiigga cas oo aan caadiga ahayn 'sickle cell test', iyo kuwa kale) iyada oo ku saleysan da'da iyo khatarta jirta.
- Qiimeynta xaalada nafaqada.
- Baaritaanka guud ee jirka oo aan dharka la xirnayn oo wata baaritaanka ilkaha iyo ciridka.
- Caafimaadka buuxa iyo taariikhda korriinka (oo ay ku jiraan dib u eegida korriinka caafimaadka jirka iyo maskaxda labadoodaba).
- Tallaalada (irbadaha) buuxinaya heerarka caafimaadka:
    - Jadwalka Tallaalka Ilmaha (dhalashada ilaa 18 jir): https://www.cdc.gov/vaccines/schedules/hcp/imz/child-adolescent.html
    - Jadwalka Tallaalka Qofka Weyn (19+): https://www.cdc.gov/vaccines/hcp/imz-schedules/adult-age.html?CDC_AAref_Val=https://www.cdc.gov/vaccines/schedules/hcp/imz/adult.html
- Tilmaamaha caafimaadka iyo waxbarashada oo loogu talagalay waalidiinta iyo carruurta.
- Gudbinta loogu talagalay daaweynta caafimaadka jirka iyo caafimaadka dhimirka ee caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah.
- Baaritaanada maqalka iyo aragga ee loo baahan yahay.
- Iyo kuwo kale.

Booqashooyinka caymiskooda la bixiyo waxaa sidoo kale ka mid ah baaritaanada iyo baarista aan la sii qorsheyn ee dhici karta waqti kasta iyada oo sababtu tahay jiro ama isbeddel ku yimaada caafimaadka ama korriinka.

## Gudbinta EPSDT, ogaanshaha, iyo daaweynta

Daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah ayay dhici kartaa in uu ku gudbiyo haddii uu ogaado xaalada jirka, caafimaadka dhimirka, isticmaalka mukhaadaraadka, ama ilkaha oo jirta. Daryeel bixiye kale ayaa gacan ka geysan doona ogaanshaha waxyaabo dheeraad oo jira iyo/ama daaweynta.

Bixiyaha baaritaanka ayaa sharxi doonaa baahida loo qabo gudbinta ku aadan ilmaha iyo waalidka ama mas'uulka. Haddii aad ku raacsan tahay gudbinta, daryeel bixiyaha ayaa qaban doona hawsha warqada.

YCCO ama OHP ayaa sidoo kale gacan ka geysan doona isku duwida daryeelka, hadba sida loogu baahdo.

Baaritaanadu waxaa dhici karta in lagu ogaado baahi loo qabo adeegyada soo socda, iyo sidoo kale kuwa kale:

- Ogaanshaha iyo daaweynta naafanimada dhanka aragga iyo maqalka, oo ay ku jiraan muraayadaha indhaha iyo qalabka maqalka kordhiya.
- Daryeelka ilkaha, oo ah da'da ugu horreysa hadba sida ay lagama maarmaanka u tahay, ee loo baahan yahay si loo yareeyo xanuunka iyo infekshanka, hagaajinta ilkaha iyo ilaalinta caafimaadka ilkaha.
- Tallaalada (haddii la go'aamiyo waqtiga baaritaanka in tallaal loo baahan yahay oo ay ku habboon tahay in la bixiyo waqtiga baaritaanka, ka dib daaweynta tallaalka waa in la bixiyaa waqtigaasi.).

Adeegyadani waa in la siiyaa xubnaha u qalma ee da'doodu ka yar tahay 21 jir ee u baahan. Daaweynta ka hooseysa xariiqda "below the line" ee ku jira Liiska Muhiimada la siiyay ee Adeegyada Caafimaadka waa kuwo caymiskooda la bixiyo oo loogu talagalay xubnaha da'doodu ka yar tahay 21 jir haddii ay caafimaad ahaan lagama maarmaan u yihiim ama caafimaad ahaan ku habboon yihiin qofka xubinta ah (fiiri macluumaad dheeraad ah oo kor ku qoran).

- Haddii aan kuu sheegno in adeega caymiskiisa aanay bixinin OHP, waxaad weli xaq u leedahay in aad ka doodid go'aankaasi adiga oo gudbinaya rafcaan oo codsanaya dacwad dhageysi. Fiiri bogga 93.

YCCO waxay bixin doontaa gudbin si ay uga caawiso xubnaha ama wakiiladooda adeegyada bulshada, barnaamijyada caafimaadka, barnaamijyada taageerada nafaqada, iyo adeegyada kale.

Wixii macluumaad dheeraad ee ku saabsan caymiska EPSDT, waxaad booqan kartaa www.Oregon.gov/EPSDT oo fiirin kartaa xaashida xaqiiqda ee xubinta. YCCO waxay sidoo kale leedahay macluumaad laga helayo https://yamhillcco.org/members/benefits-and-rights/.

# Shaqaalaha Caafimaadka Dhaqan ahaaneed (THW)

Shaqaalaha Caafimaadka Dhaqan ahaaneed (THW) waxay bixiyaan oo caawimaad ka geystaan su'aalaha aad qabto ee ku saabsan daryeelkaaga caafimaadka iyo baahiyaha bulshada. Waxay gacan ka geystaan wada xiriirka u dhexeeya daryeel bixiyayaashaada caafimaadka iyo dadka kale u lugta leh daryeelkaaga. Waxay sidoo kale kugu xiri karaan dadka iyo adeegyada ka jira bulshada ee ku taageeri kara.

Waxaa jira noocyo dhowr ah oo kala duwan oo ah shaqaalaha caafimaadka dhaqan ahaaneed:

- **Birth Doula:** Oo ah qof dadka iyo qoysaskooda ka caawiya taageerada shakhsi, taageerada aan caafimaadka ahayn. Wuxuu ku caawiyaa ilaa uur lahaanshaha, dhalashada ilmaha, iyo ka dib marka uu ilmuhu dhasho.

- **Shaqaalaha Caafimaadka Bulshada (CHW):** Shaqaalaha caafimaadka bulshadu wuxuu fahamsan yahay dadka iyo bulshada halka aad ku nooshahay. Wuxuu kaa caawiyaa in

aad hesho adeegyada caafimaadka iyo bulshada. Shaqaalaha caafimaadka bulshadu wuxuu kaa caawiyaa in aad bilowdo hab-dhaqan caafimaad leh. Caadi ahaan wuxuu wadaagaa qowmiyaddaada, luqaddaada, ama waaya-aragnimadaada nololeed.

- **Hagaha Caafimaadka Shakhsi Ahaaneed (PHN):** Oo ah qof bixiya macluumaad, qalab, iyo taageero si lagaaga caawiyo in aad gaarto go'aanka ugu wanaagsan ah ee ku saabsan caafimaadkaaga iyo fayo-qabkaaga, iyada oo ku saleysan xaaladaada.

- **Qof takhasus u leh Taageerada Dadka isku faca ah (PSS):** Qof waayo-aragnimo nololeed u leh caafimaadka dhimirka iyo/ama balwada, iyo ka soo kabashada. PSS waxaa dhici karta in uu taageero u ahaa xubin ka tirsan qoys oo leh walwal dhanka caafimaadka dhimirka ah iyo/ama helayo iska daaweynta balwada aalkolada. Wuxuuu taageero, dhiirigelin iyo caawimaad siiyaa kuwa la kulmaya balwadaha iyo dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka.

- **Qof Takhasus u leh Caafimaadka Dadka Isku faca ah (PWS):** Oo ah qof u shaqeeya qayb ka mid ah kooxda guriga caafimaadka oo u hadla adiga iyo baahiyahaaga. Wuxuu taageera caafimaadka guud ee dadka ka tirsan bulshadooda wuxuuna kaa caawin karaa in aad ka soo kabato balwada, caafimaadka dhimirka, iyo xaalada caafimaad.

THW waxay kaa caawin karaan waxyaabo badan sida:

- Kala shaqeynta adiga iyo isku duwahaaga daryeelka in la helo daryeel bixiye cusub.
- Helitaanka daryeelka aad u baahan tahay.
- In uu kugu xiro dadka si ay u sharxaan faa'iidooyinkaaga.
- Bixinta macluumaad ku saabsan caafimaadka dhimirka iyo/ama adeegyada wax ku tiirsanaanta iyo taageerada.
- Macluumaad iyo gudbin ku saabsan ilaha bulshada ee aad isticmaali karto.
- Qof lala hadlo oo ka socda bulshadaada.
- In uu kula aado ballama daryeel bixiyaha.

Waxaad wici kartaa oo email u diri kartaa xiriirkayaga THW si aad u ogaato waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan THW-yada iyo sida loo isticmaalo adeegyadooda. Waxaad kooxdaada daryeelka ama daryeel bixiye weydiin kartaa haddii THW uu waxtar u yeelan karo adiga. Waxaad sidoo kale mid ka soo dooran kartaa buuga tilmaamaha daryeel bixiyaha ee YCCO halkan https://yamhillcco.org/members/find-a-provider/.

## Macluumaadka Lagala soo xiriirayo THW:

Xiriirka YCCO THW
providerrelations@yamhillcco.org
855-722-8205

Haddii aan beddelno macluumaadka la iskala soo xiriirayo ee loogu talagalay xiriirka THW, waxaad macluumaadka cusub ka heli kartaa website-kayaga: https://yamhillcco.org/community-programs/traditional-health-workers/.

# Adeegyada dheeraadka ah

## Adeegyada La xiriira Caafimaadka

Adeegyada La xiriira Caafimaadku (HRS) waa adeegyo dheeraad ah oo YCCO ay bixiso oo aanan ahayn faa'iidooyinka OHP ee caadiga ah. HRS waxay gacan ka geysataa kor u qaadida caafimaadka iyo fayo-qabka xubinta iyo bulshada. HRS waxaa ka mid ah adeegyada dabacsan oo loogu talagalay qorshayaasha faa'iidada xubnaha iyo bulshada ee bulsho weynta. Sababta oo ah HRS ma aha faa'iidooyinka OHPoo caadi ah, xubnuhu ma laha xuquuqda rafcaan qaadashada oo loogu talagalay HRS si la mid ah sida ay u sameeyaan adeegyada caymiskooda la daboolo.

## Adeegyada Dabacsan

Adeegyada dabacsan waa waxyaabo ama adeegyo si looga caawiyo xubnaha in ay ku sugnaadaan caafimaad ama noqdaan kuwo caafimaad qaba. YCCO waxay bixisaa adeegyadan dabacsan:

- Taageerada guryaha
- Waxyaabaha la xiriira jawiga guriga ama nololeed ama wanaajintooda
- Gaadiidka haddii kale aan ka ahayn kuwo ay caymiskooda bixiso OHP, tusaalooyinka qaarkood waa gaadiid raaca lagu tagayo bangiga ama dukaanka cuntada
- Iska caawinta cuntada

Tusaalooyinka adeegyada dabacsan ee kale:

- Taageerooyinka cuntada, sida cuntada la isku keenayo, foojarada cuntada, ama cuntooyinka caafimaad ahaan ku habboon
- Taageerooyinka guriga ee muddada-gaaban, sida lacagta la iska sii dhigo ee ijaarka si la iskaga taageero kharashyada guuritaanka, teegaarada ijaarka ee loogu talagalay waqti yar oo gaaban, ama dejinta khidmadaha adeega 'utility'
- Guryaha ku meel gaarka ah ama hoy inta laga soo kabanayo isbitaal la is dhigay
- Waxyaabaha taageera hab-dhaqanka caafimaadka leh, sida kabaha ciyaaraha ama dharka
- Telefoonada gacanta ama qalabka loogu talagalay gelitaanka telehealth ama app-ka caafimaadka
- Waxyaabaha kale ee kaa dhiga in aad caafimaad qabto, sida qaboojiyaha hawada ama qalabka sifeeyaha hawada.

Waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada la xiriira caafimaadka ka ogow https://sharedsystems.dhsoha.state.or.us/DHSForms/Served/le4329.pdf

### Sida loo helo adeegyo dabacsan oo loogu talagalay adiga ama xubin ka tirsan qoyska

Waxaad la shaqeyn kartaa adeegyada dabacsan, ama waxaad Adeega Macmiilka wici kartaa 855-722-8205 si aad uga hesho caawimaad la xiriirta codsiga adeegyo dabacsan.

Adeega Dabacsan ma aha faa'iido caymiskeeda la daboolo oo loogu talagalay xubnaha oo CCO-

yada loogama baahna in ay bixiyaan iyaga. Go'aanada lagu ansixiyo ama lagu diido codsiyada adeegyada dabacsan waxaa loo gaaraa iyada la eegayo hab ku saleysan xaalada. Waxaad codsigaaga soo raacin kartaa sababta aad ugu baahan tahay adeega, sida uu kuu caawin doono, iyo macluumaad caafimaad oo ka socda dhakhtarkaaga. Haddii adeegaaga dabacsan la diido, waxaad heli doontaa warqad sharraxaysa fursadaha kuu banaan. Rafcaan kama qaadan kartid adeeg dabacsan oo la diiday, laakiin waxaad gudbin kartaa cabasho, laakiin waxaad xaq u leedahay in aad sameyso cabasho. Ogow waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan rafcaanada iyo cabashooyinka oo ku qoran 93.

Haddii aad hadda leedahay OHP oo dhibaato kaa haysato in hesho daryeel, fadlan la xiriir barnaamijka Barnaamijka Mas'uulka Wax u dooda ee OHA. Ombuds waxa wax u doodayaal u dooda xubnaha ka tirsan OHP waxayna sameyn doonaan intii karaankooda ah si ay kuu caawiyaan. Fadlan email u dir OHA.OmbudsOffice@odhsoha.oregon.gov ama farriin ku dhaaf 877-642-0450.

Ilo kale oo loogu talagalay taageerooyinka iyo adeegyada ka jira bulshadaadu waa 211 Info. Wac 2-1-1 ama booqo website-ka www.211info.org wixii caawimaad ah.

## Qorshayaasha Faa'iidada Xubnaha

Qorshayaasha faa'iidada xubnaha waa maalgelin loogu talagalay barnaamijyada iyo bulsho weynta oo ay ku jiraan xubnaha ka tirsan CCO, si kor loogu qaado caafimaadka iyo fayo-qabka bulshada. YCCO waxay kor u qaadaa meelaheena mudnaanta leh ee Qorshaha Kordhinta Caafimaadka Bulshada (CHP) ee ka tirsan qorshayaasha aan doorano. Meelahani waxay kala yihiin guryaha, cuntada, iyo nafaqada, dhallaanka iyo carruurta, caafimaadka dhimirka iyo isticmaalka mukhaadaraadka, u diyaar garowga xaalada degdega ah, helitaanka daryeelka caafimaadka, iyo gaadiidka.

Tusaalooyinka qorshayaasha faa'iidada xubnaha ee kale waa:

- Fasallo loogu talagalay waxbarashada iyo taageerada qoyska
- Barnaamijyada ku saleysan bulshada oo dadka ka caawiya in ay helaan miro iyo khudaar cusub oo la adeegsanayo suuqyada beeralayda
- Barnaamijyada ku saleysan bulshada oo dadka ka caawiya in ay galaan ama joogteeyaan guri ammaan ah oo xasiloon.
- Wanaajinta gaadiidka firfircoon, sida laymanka baaskiilka/buskuleetiga oo ammaan ah iyo waddooyinka lagu lugeeyo
- Barnaamijyada ku saleysan bulshada oo taageera jawi wax daryeelaya si loo wanaajiyo caafimaadka bulsho-dareen ee ardayga iyo barashada tacliimeed
- Tababaro loogu talagalay macallimiinta iyo ururada ku saleysan bulshada ee carruurta u gaarka ah oo ku saabsan dhaqamada ka warqabka dhibaatooyinka naxdinta leh

### Daryeelka Bulshada ee Caafimaadka Afka

Waxaan si sharaf leh u taageernaa xubnaha in ay adeegyada caafimaadka afka ku helaan goobaha bulshada. YCCO waxay la shaqeysaa Capitol Dental si nadiifiyayaasha ilkaha oo haysta oggolaansho gaar ah loogu diro dugsiyada, Haweenka Dhallaanka Carruurta (WIC), Head Start, xafiisyada Caafimaadka, xarumaha daryeelka muddada fog iyo goobaha kale uu bulshada

si ay u dhammeystiraan qiimeyn.  Waxay sidoo kale sameeyaan adeegyada ka hortagga qaarkood inta ay halkaasi joogaan, sida daawada fluoride ama silver fluoride waxayna dadka ka caawiyaan in ay fahman sida loo daryeelo ilkahooda.

Meelaha aynaan lahayn nadaafad-yaqaan si uu u sameeyo tani, waxaan la shaqeynaa ururo kale.   Adeegyada aad ku leedahay bulshada dhexdeedu waa in ay ahaadaan kuwo lacag la'aan kuu ah haddii ay yihiin kuwa lagu daboolayo qorshahaaga.   Haddii aadan hubin, waxaad weydiin kartaa qofka adeegyada sameynaya, ama waxaad wici kartaa Adeegyada Xubnaha.

# Gaadiid raacid lacag la'aan ah oo lagu aadayo daryeelka

## Gaadiid raacid lacag la'aan ah oo lagu aadayo ballamaha loogu talagalay dhammaan xubnaha YCCO.

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo tagida ballan, wac WellRide si aad u hesho gaadiid raaciid lacag la'aan ah.   Waxaad heli kartaa gaadiid raacid lacag la'aan ah oo lagu aadayo booqashada daryeelka jirka, ilkaha, farmashiye, ama caafimaadka hab-dhaqanka taasi oo ay caymiskiisa daboolayso YCCO.

Adiga ama wakiilkaagu waxaad codsan kartaa gaadiid raacid.  Waxaa dhici karta in aan ku siino tigidhka baska, lacag loogu talagalay taxi, ama yeelano darawal ku soo qaada.   Waxaa dhici karta in aan lacagta gaaska siino adiga, xubin ka tirsan qoys, ama saaxiib ku kexeeya.   Ma jiro wax kharash ah oo kaaga baxaya adeegani.  YCCO marnaba kuu soo diro mayso biilka gaadiid raacida lagu aadayo ama lagaga soo noqonayo daryeel caymiskiisa la daboolo.  Adeega Macmiilka ee WellRide ka wac 844-256-5720 (TTY 711) si aad u hesho caawimaad ama macluumaad dheeraad ah.  Wac Adeega Macmiilka ee WellRide in la sameeyo lacag isku soo celinta waxay kuu sheegi doonaan waxa looga baahan yahay codsigaaga.

## Qorsheyso gaadiid raacid

WellRide ka wac 844-256-5720 (TTY 711)
Saacadaha:  Isniinta ilaa Jicmaha, 7:30 subaxnimo ilaa 6:00 galabnimo.  WellRide way xiran tahay Maalinta U Horeysa Sanadka Cusub, Maalinta Xasuusta 'Memorial Day', Afarta Luulyo, Maalinta Shaqaalaha, Maalinta Mahadnaqa 'Thanksgiving Day', iyo Maalinta Ciida Masiixiga.

Fadlan wac ugu yaraan 2 maalmo shaqo ka hor ballanta si aad u qorsheysato gaadiid raacid. Tani waxay ka caawin doontaa in la xaqiijiyo in aan buuxin karno baahiyahaaga gaadiid raacid.

Waxaad heli doontaa gaadiid raacid isla maalintaasi ah ama maalinta xigta ah.  Fadlan wac WellRide.

Adiga ama qof aad garanayso ayaa dejin kara wax ka badan gal gaadiid raacid oo loogu talagalay ballamo badan.  Waxaad qorsheyn kartaa gaadiid raacid loogu talagalay ballamaha mustaqbalka ilaa 90 maalmood oo hore.

## Waxa la filayo marka aad soo wacdo

YCCO waxay leedahay shaqaalaha xarunta wicitaanka oo gacan ka geysanaya gaadiid raacid oo ah luqadda aad doorbidayso iyo hab aad fahmi karto. Caawimaadani waa mid lacag la'aan ah.

Marka ugu horreysa ee aad soo wacdo waxaanu wax kaaga sheegi doonaa barnaamijka oo ka hadli doonaa baahiyahaaga gaadiid raacid. Waxaanu wax kaa weydiin doonaa awoodaada jireed iyo haddii aad u baahan tahay qof kula safra.

Marka aad soo wacdo si aad u qorsheysato gaadiid raacid, waxaanu codsan doonaa:

- Magacaaga oo buuxa.
- Cinwaankaaga iyo lambarkaaga telefoonka.
- Taariikhdaada dhalasho.
- Magaca dhakhtarka ama xarunta caafimaadka ee aad u baahan tahay in aad booqato.
- Taariikhda ballanta.
- Waqtiga ballanta.
- Waqtiga qaadista ballanta ka dib.
- Haddii aad u baahan tahay adeege ku caawiya.
- Wixii baahiyo gaar ah ee kale (sida kursiga naafada ama xayawaanka la adeegsado).

Waxaanu hubin doonaa haddii aad la socoto YCCO iyo haddii ballantaada loogu talagalay adeeg la daboolo. Waxaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan gaadiid raacidaada ku heli doontaa muddo 24 saacadood gudahood ah. Waxaad heli doontaa macluumaad ku saabsan codsigaaga gaadiid raacida ee habka aad u doorato (wicitaan telefoon, email, ama fax).

Haddii aad gaadiid raacid codsato ka yar laba (2) maalmood ka hor waqtiga qaadista ee la qorsheeyay, waxaan ku siin doonaa lambarka telefoonka ee shirkadda qaban qaabin doonta soo qaadistaada. Waxaa dhici karta in aanu ku siino magaca iyo lambarka telefoonka ee darawalka ku soo qaadi doona.

## Soo qaadida iyo dejinta

Waxaad heli doontaa magaca iyo lambarka shirkadda gaadiid raacida ama darawalka ballantaada ka hor. Darawalkaaga ayaa kula soo xiriiri doona ugu yaraan 2 maalmood ka hor gaadiid raacidaada si loo xaqiijiyo faahfaahinta. Wuu ku soo qaadi doonaa marka la joogo waqtigaaga la qorsheeyay. Fadlan waa in aad ku timaadaa waqtigii loogu talagalay. Haddii aad soo daahdo, wuxuu ku sugi doonaa ugu yaraan 15 daqiiqo ka dib waqtigaaga la qorsheeyay. Taasi macnaheedu waa, haddii gaadiid raacidaada la qorsheeyay 10 subaxnimo, wuxuu ku sugi doonaa ilaa 10:15 subaxnimo.

Wuxuu kugu dejin doonaa ballantaada ugu yaraan 15 daqiiqo ka hor inta aysan bilaabmin.

- **Ballanta u horreysa maalinta:** Waxaanu ku dejin doonaa waxaan ka badnayn 15 daqiiqo ka hor inta aan xafiiska la furin.
- **Ballanta u dambeysa maalinta:** Waxaanu ku soo qaadi doonaa muddo aan ka dambeyn 15 daqiiqo ka dib marka xafiiska la xidho aan ka ahayn ballanta oo aan la filayn in ay dhammaato 15 daqiiqo gudaheed xidhitaanka ka dib.
- **Weydiisashada waqti dheeraad ah:** Waa in aad sidoo kale codsataa in lagu soo qaado waqti hore ama lagu dejiyo waqti dambe oo aan ka ahayn waqtiyadani. Wakiilkaaga, waalidka ama mas'uulka ayaa sidoo kale naga codsan kara.

- **Wac haddii darawalkaagu uusan ku iman 10 daqiiqo ka dib waqtiga qaadista:** Haddii darawalkaagu uusan ku iman 10 daqiiqo ka dib waqtigaaga qaadista ee la qorsheeyay, wac shirkadda gaadiid raacida. Shaqaalaha ayaa kula soo socodsiin doona haddii uu darawalku jidka ku soo jiro. Darawaliintu waa in ay u sheegaan hawl-geliyaha inta aysan ka tagin goobta la iska qaadayo.
- **Wac haddii aanad lahayn waqtiga qaadista:** Haddii uusan jirin waqtiga qaadista oo la qorsheeyay oo loogu talagalay safarkaaga soo noqoshada, na soo wac marka aad diyaarka tahay. Darawalkaaga ayaa halkaasi ku iman doona 1 saac gudaheed ka dib wicitaankaaga.

WellRide waa barnaamijka gaadiid raacida la wadaago. Rakaab kale ayay dhici kartaa in la sii qaado ama la dejiyo inta lagu sii jiro jidka. Haddii aad leedahay ballamo dhowr ah, waxaa dhici karta in lagaa codsado in aad qorsheysato isla maalintaasi. Tani waxay naga caawin doontaa in aan sameyno safaro intii hore ka yar.

Waxaa dhici karta in aad haysato saaxiib ama xubin ka tirsan qoyska oo kuu kexeeyaa ballanta. Waxay heli karaan lacag celin (lacag la bixiyo) oo loogu talagalay maylasha ay gaariga wadaan.

## Waxaad leedahay xuquuq iyo waajibaad gaadiid raace ahaan:

### Waxaad xaq u leedahay:

- In aad hesho gaadiid raacid ammaan ah oo la isku halayn karo oo buuxinaya baahiyahaaga.
- In laguula dhaqmo si ixtiraam leh.
- In aad codsato adeegyada turjumaada marka aad la hadlayo adeega macmiilka.
- In aad hesho waxyaabo ku qoran luqad ama qaab buuxinaya baahiyahaaga.
- In aad hesho ogeysiin qoraal ah marka gaadiid raacida la diido.
- In aad gudbiso cabasho ku saabsan waayo-aragnimadaada dhanka gaadiid raacista.
- In aad codsato rafcaan, in aad codsato dacwad dhageysi, ama codsato labadoodaba haddii aad dareento in si aan caddaalad ahayn laguugu diiday adeega gaadiid raacida.

### Waajibaadkaagu waa in aad:

- Darawaliinta iyo rakaabka kale u la dhaqanto si ixtiraam leh.
- Noo soo wacdo sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah si aad u qorsheysato, u beddesho ama u joojiso gaadiid raacid.
- U isticmaasho suumanka gaariga iyo qalabka kale ee badbaadada sida uu baahan yahay sharcigu (tusaale: kuraasta gaariga).
- Codsato wixii meelo dheeraad ah ee la joogsanayo, sida farmashiyaha, waqti hore.

## Joojinta ama beddelaada gaadiid raacidaada

Wac WellRide marka aad ogtahay in aad u baahan tahay in aad joojiso ama dib u qorsheysato gaadiid raacidaada, ugu yaraan 2 saacadood ka hor waqtiga qaadista.

Waxaad WellRide ka wici kartaa Isniinta ilaa Jicmaha, 7:30 subaxnimo ilaa 6:00 galabnimo. Farriin u dhaaf haddii aadan soo wici karin inta lagu jiro saacadaha shaqada. Wac WellRide haddii aad hayso wax su'aalo ah ama isbeddelada gaadiid raacida.

## Marka aadan iman

Oo ah "no-show" waa marka aadan diyaarka u ahayn in lagugu qaado waqtigii loogu talagalay. Darawalkaagu wuxuu sugi doonaa ugu yaraan 15 daqiiqo ka dib waqtiga qaadista ee la qorsheeyay ka hor inta uusan tagin. Waxaa dhici karta in aanu xaddidno gaadiid raacidaada mustaqbalka haddii aad yeelato imaansho la'aan 'no-shows' badan.

Lahaanshaha xaddidnaan waxay ka dhigan tahay in ay dhici karto in aan xaddidno tirada gaadiid raacida aad sameyn karto, kugu soo koobno hal darawal, ama u baahano wicitaan gaadiid raacid kasta ka hor.

## Haddii gaadiid raacidaada la diido

Waxaad heli doontaa wicitaan si laguula socodsiiyo in gaadiid raacidaadii la diiday. Dhammaan diidmada waxaa dib u eegis ku sameeya laba ka mid ah xubnaha shaqaalaha ka hor inta aan laguu soo dirin. Haddii gaadiid raacidaada la diido, waxaanu boosta kuugu soo diri doonaa warqad diidmo ah muddo 72 saacadood gudahood ah ee go'aanka. Ogeysiintu waxay tilmaamaysaa xeerka iyo sababta diidmada.

Waxaad codsan kartaa rafcaan aad la leedahay YCCO haddii aadan ku raacsanayn diidmada. Waxaad haysataa 60 maalmood laga bilaabo taariikhda ogeysiinta diidmada ee lagu codsanayo rafcaan. Rafcaanka ka dib, haddii diidmadu noqoto mid taagan waxaad sidoo kale xaq u leedahay in aad codsato dacwad dhageysiga Gobolka.

Waxaanu daryeel bixiyahaaga boosta ugu diri doonaa warqad sidoo kale, haddii uu daryeel bixiyuhu uu qayb ka yahay nidaamkayaga daryeel bixinta oo ay codsadeen gaadiidka iyaga oo kaa wakiil ah.

Waxaad xaq u leedahay in aad sameyso cabasho ama tabasho waqti kasta, xataa haddii aad cabasho hore u sameysay. Tusaalooyinka qaarkood ee cabashada ama tabashadu waa:

- Walwalka ku saabsan badbaadada baabuurka
- Tayada adeegyada
- Isla macaamilka darawaliinta iyo daryeel bixiyayaasha (sida anshax xumada)
- Adeega gaadiid raacida la codsaday ee aan loo bixin sidii la qorsheeyay
- Xuquuqda macmiilka

Ogow waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan cabashooyinka, tabashooyinka, rafcaanada iyo dacwad dhageysiga oo ku qoran bogga 93.

## Tilmaamaha Gaadiid Raacaha

Tilmaamaha Gaadiid Raacaha WellRide ka hel: https://yamhillcco.org/members/transportation/ . Adiga ama wakiilkaagu waxaad sidoo kale Adeega Macmiilka ka wici kartaa 855-722-8205 si aad u codsato nuqul warqad ah oo lacag la'aan ah. Waxaa lagu soo diri doonaa 5 maalmo shaqo. Nuqulka warqada ah wuxuu ku qornaan karaa luqadda iyo qaabka aad doorbidayso.

Tilmaamaha ayaa leh macluumaad dheeraad ah, sida:

- Caawimaada kuraasta naafada iyo socodka.
- Badbaadada baabuurka.
- Xeerarka iyo waajibaadka darawalka.
- Waxa la sameyn karo marka ay jirto xaalad deg deg ah ama haddii ay jirto cimilo xun.
- Ballamaha masaafada fog,
- Isku soo celinta lacagta cuntada iyo hoyga.


# Ku helida daryeelka ee muuqaal ahaan ama telefoon ahaan

Telehealth (oo sidoo kale loo yaqaan telemedicine and teledentistry) waa hab aad ku hesho daryeel adiga oo aan tagayn xarunta caafimaadka ama xafiiska. Telehealth macnaheedu waa in ballantaada ku yeelan karto wicitaan telefoon ama wicitaanka fiidiyowga. YCCO ayaa dabooli doonta caymiska booqashooyinka telehealth. Telehealth waxay kuu oggolaataa booqashada daryeel bixiyahaaga adiga oo isticmaalaya:

- Telefoon (maqal)
- Telefoon casri ah (maqal/muuqaal)
- Tablet-ka (maqal/muuqaal)
- Kambiyuutar (maqal/muuqaal)

Haddii aadan lahayn gelitaanka internet-ka ama muuqaal, kala hadal daryeel bixiyahaaga waxa kuu shaqeyn doona adiga.

Waxaad heli doontaa daryeel bixiye adiga oo isticmaalaya meeshan la sii geliyo 'link' https://yamhillcco.org/members/provider-search/




# Sida loo helo bixiyayaasha telehealth

Daryeel bixiyayaasha oo dhan ma laha kala doorashooyinka telehealth. Waa in aad wax ka weydiiso telehealth marka aad wacdo si aad u sameysayo ballantaada. Haddii aad baahan tahay in lagaa caawiyo helitaanka bixiyaha telehealth Adeega Macmiilka ama Xarunta Caafimaadka Bulshada ayaa kaa caawin kara in aad labadoodaba kala xiriirto 855-722-8205 (TTY 711). Haddii aad wax dhibaato ah ku qabto maqalka ama muuqaalka ee booqashadaada telehealth, fadlan xaqiiji in aad la shaqeyso daryeel bixiyahaaga.

# Goorta la isticmaalayo telehealth

Xubnaha YCCO ee isticmaalaya telehealth waxay xaq u leeyihiin in ay helaan adeegyada jirka, ilkaha, iyo caafimaadka hab-dhaqanka ee ay baahan yihiin.
Tusaalooyinka qaarkood ee marka aad isticmaali karto telehealth waa:

- Marka uu daryeel bixiyahaagu rabo in uu kula soo booqdo ka hor inta aan dib loo buuxin daawada la isku ku qoro.
- Adeegyada la-talinta.
- Sii dabagalka booqashada shakhsi ahaaneed.
- Marka aad qabto su'aalo caafimaad oo caadi ah.

- Haddii karantiin lagu geliyay ama ku dhaqmayso kala fogeynta bulshada ‘social distancing’ jiro awgeed.
- Haddii aad si ku meel gaar ah uga maqan tahay guriga oo aadan si shakhsi ah ula kulmi karin dhakhtarkaaga.
- Haddii aadan hubin haddii aad u baahan tahay in aad tixgeliso xarunta caafimaadka ama xafiiska.

Telehealth talo ahaan looguma soo jeedinayo xaaladaha degdega ah. Haddii aad dareento in noloshaadu halis ku jirto, fadlan wac 911 ama tag qolka gargaarka degdega ah ee kuugu dhow. Bogga 72 ka fiiri liiska isbitaalada leh qolalka gargaarka degdega ah.

Haddii aadan garanayn waxa ah adeegyada telehealth ama kala doorashooyinka uu daryeel bixiyahaagu hayo, wac iyaga oo weydii.

Si aad u ogaato haddii daryeel bixiye ka tirsan qorshe caafimaad ‘in-network provider’ uu bixiyo booqashooyinka telehealth wac daryeel bixiyaha oo weydii iyaga. Si aad u hesho daryeel bixiyaha ka tirsan qorshe caafimaad ‘in-network provider’ ka fiiri buuga tilmaamaha halkan https://yamhillcco.org/members/find-a-provider/.

## Booqashooyinka telehealth waa kuwo gaar ah

Adeegyada telehealth ee uu bixiyo daryeel bixiyahaagu waa kuwo gaar ah oo sugan. Daryeel bixiye kastaa wuxuu yeelan doonaa nidaam u gaar ah oo loogu talagalay booqashooyinka telehealth, laakiin nidaam kastaa waa in uu raacaa sharciga.

Ogow waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan asturnaanta iyo Xeerka Federaalka ee Haynta Macluumaadka Caafimaad iyo Masuuliyadda (HIPAA) oo ku qoran bogga 12.

Xaqiiji in aad wicitaankaaga ku qaadato qol gaar ah ama meel aan cid kale dhageysan karin ballanta aad la leedahay daryeel bixiyahaaga.

## Waxaad xaq u leedahay in aad:

- Adeegyada telehealth ku hesho luqadda aad u baahan tahay.
- Leedahay daryeel bixiyayaal ixtiraama dhaqankaaga ama baahiyahaaga luqaddeed.
- Hesho adeegyada turjumaada oo u qalma lana aqoonsan yahay oo loogu talagalay adiga iyo qoyskaaga. Waxyaabo dheeraad ah ka ogow bogga 3.
- Hesho booqashooyinka shakhsi ahaaneed, oo kaliya aan ahayn booqashooyinka telehealth.
    - YCCO waxay xaqiijin doontaa in aad leedahay ikhtiyaarka sida aad u heli lahayd booqashooyinkaaga. Daryeel bixiye kaama dhigi karo in aad isticmaasho telehealth aan ka ahayn iyada oo ay jirto xaalad degdega oo lagu dhawaaqay ama xarunta oo adeegsanaysa qorshaheeda musiibada.
- Hesho taageero oo haysato aaladaha looga baahan yahay telehealth.
    - YCCO ayaa gacan ka geysan doonta ogaanshaha qalabka telehealth ee adiga kuu fiican.
    - YCCO waxay xaqiijin doontaa in daryeel bixiyahaagu sameeyo qiimeyn si loo ogaado haddii ay telehealth kugu habboon tahay. Tani waxaa ka mid ah, balse aanan ku koobnayn:

- Baahida loo qabo qaab beddel ah;
- Helitaanka aalada(daha) lagama maarmaanka ah;
- Helitaanka goob gaar ah oo ammaan ah;
- Helitaanka adeega internet-ka;
- Fahamka aaladaha dhijitalka ah;
- Walwalka dhanka dhaqanka.

Kala hadal daryeel bixiyahaaga wax ku saabsan telehealth. Haddii aad u baahan tahay ama doorbidayso booqashooyinka shakhsi ahaaneed, oo uu daryeel bixiyahaaguna yahay bixiyaha telehealth oo kaliya, la socodsii iyaga. Wuxuu kuu gudbin karaa daryeel bixiye kale oo u sheegi karaa YCCO. Waxaad leedahay ikhtiyaarka sida aad u helayso daryeelkaaga iyada oo YCCO ay gacan ka geysan doono isku duwida daryeelka lala leeyahay daryeel bixiye kale. Waxaad sidoo kale Adeega Macmiilka ka wici kartaa 855-722-8205 (TTY 711). Waxaanu furanahay Isniinta ilaa Jimcaha, 8:00 subaxnimo ilaa 5:00 galabnimo.

# Daawooyinka la isku qoro

Si loo buuxiyo daawo la isku qoro, waxaad tagi kartaa farmashiye kasta oo ka tirsan nidaamka YCCO. Waxaad liiska farmashiyayaasha aan la shaqeyno ee ku jira buugayaga tilmaamaha daryeel bixiyaha ka heli kartaa: https://yamhillcco.org/members/find-a-provider/.

Dhammaan daawooyinka la isku qoro ee ay caymiskooda daboolayso YCCO, u soo qaado farmashiyaha:

- Daawada la isku qoro.
- Kaarkaaga Aqoonsiga YCCO, kaarka Aqoonsiga Oregon Health ama caddeynta kale ee caymiska sida kaarka Aqoonsiga Medicare Part D iyo kaarka Caymiska Gaarka ah. Waxaa dhici karta in aad awoodi waydo in aad buuxiso daawo la isku qoro iyaga la'aantood.

## Daawooyinka la isku qoro ee caymiskooda la daboolo

Liiska YCCO ee daawooyinka caymiskooda la bixiyo ayaa laga helayaa: https://yamhillcco.org/members/pharmacy-drug-list/.

- Haddii aadan hubin in daawadaadu ku jirto liiskayaga, na soo wac. Waanu kuu hubin doonaa.

Haddii daawadaadu aysan ku jirin liiska, u sheeg daryeel bixiyahaaga. Daryeel bixiyahaaga ayaa naga codsan kara in aanu bixino caymiskeeda.

- YCCO waxay u baahan tahay in ay oggolaato daawada qaarkeed oo ku jirta liiska ka hor inta uusan farmashiyahaagu buuxin karin iyaga. Daawooyinkani, daryeel bixiyahaaga ayaa naga codsan doona in aanu oggolaano iyada.

YCCO waxay sidoo kale dabooshaa caymiska daawooyinka meel kasta laga iibsan karo (OTC) qaarkood marka daryeel bixiyahaaga ama farmashiyuhu kuu qoro iyaga. Daawooyinka OTC waa

kuwa sida caadiga ah aad ka iibsan lahay dukaan ama farmashiye iyada oo aysan jirin daawo la isku qorayaa, sida aspirin.

## Weydiisashada YCCO in ay daboosho daawooyinka la isku qoro

Marka uu daryeel bixiyahaagu ka codsado YCCO in ay oggolaato ama daboosho caymiska daawo la isku qoro:

- Dhakhaatiirta iyo farmashiyayaasha YCCO ayaa dib u eegi doona codsiga ka socda daryeel bixiyahaaga.
- Waxaanu go’aan ku gaari doonaa muddo 24 saacadood gudahood ah.
- Haddii aad u baahanahay macluumaad dheeraad ah si aanu u gaarno go’aan, waxay qaadan kartaa 72 saacadood.

Haddii YCCO ay go’aansato in aysan daboolin caymiska daawada la isku qoro, waxaad warqad ka heli doontaa YCCO. Warqadu waxay sharrixi doontaa:

- Xuquuqda aad u leedahay in aad racfaan ka qaadato go’aanka.
- Sida loo codsado rafcaan haddii aadan ugu raacsanayn go’aankayaga. Warqadu waxay yeelan doontaa foom aad u isticmaali karto in aad ku codsato rafcaan.

Adeega Macmiilka Farmashiyaha YCCO ka wac 877-216-3644 (TTY 711) haddii aad hayso su’aalo.

## Farmashiyaha boosta lagu dalbado

Adeega Guri-Geynta Daawada ee Farmashiyaha Costco ama Adeega Daawada La isku qoro ee Boosta ayaa daawooyinka qaarkood boosta ugu soo diri kara cinwaanka gurigaaga. Tani waxaa loo yaqaan farmashiyaha boosta lagu dalbado. Haddii aad soo qaadanayso daawooyinkaaga la isku qoro ee yaala farmashiye ay kugu adag tahay, farmashiyaha boosta lagu dalbado ayaa noqon kara kala doorasho wanaagsan. Adeega Macmiilka Farmashiyaha YCCO ka wac 877-216-3644 (TTY 711) si aad

- Waxyaabo dheeraad ah uga ogaato farmashiyaha boosta lagu dalbado oo
- U dejiso farmashiyaha boosta lagu dalbado.

## OHP waxay bixisaa lacagta daawooyinka caafimaadka hab-dhaqanka

YCCO ma bixiso lacagta inta badan daawooyinka loo isticmaalo in lagu daaweeyo xaaladaha caafimaadka hab-dhaqanka. Taasi beddelkeeda OHP ayaa lacagtooda bixisa iyaga. Haddii aad u baahan tahay daawooyinka caafimaadka hab-dhaqanka:

- YCCO iyo daryeel bixiyahaagu waxay kaa caawin doonaan in aad hesho daawooyinka aad u baahan tahay.

- Farmashiyaha ayaa biilka daawada laguu qoray si toos ah ugu dira OHP. YCCO iyo daryeel bixiyahaagu waxay kaa caawin doonaan in aad hesho daawooyinka caafimaadka hab-dhaqanka ee aad u baahan tahay. La hadal daryeel bixiyahaaga haddii aad hayso su'aalo. Waxaad sidoo kale Adeega Macmiilka YCCO ka wici kartaa 855-722-8205 (TTY 711).

## Caymiska daawada la isku qoro oo loogu talagalay xubnaha leh Medicare

YCCO iyo OHP ma daboolaan caymiska daawooyinka ay daboosho Medicare Part D.

Haddii aad u qalanto Medicare Part D laakiin aad dooran weydo in aad isqorto, waxay noqonaysaa in aad bixiso kharashka daawooyinkani.

Haddii aad leedahay Part D, tus kaararkaaga Aqoonsiga Medicare iyo kaarkaaga Aqoonsiga YCCO marka la joogo farmashiyaha.

Haddii Medicare Part D aysan daboolayn caymiska daawadaada, farmashiyahaagu wuxuu biil u diri karaa YCCO. Haddii ay OHP caymiskooda bixiso daawada,YCCO ayaa bixin doonta lacagtiisa.

Ogow waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan faa'iidooyinka Medicare oo ku qoran bogga 33.

## Helitaanka daawooyinka la isku qoro ka hor safar

Haddii aad qorsheynayso in aad u safaro meel ka baxsan gobolka, xaqiiji in aad haysato daawo kugu filan oo loogu talagalay safarkaaga. Si aad tani u sameyso, codso in aad waqti hore hesho buuxinta daawada la isku qoro. Tani waxaa loo yaqaan burinta fasaxa. Fadlan YCCO ka wac 855-722-8205 (TTY 711) si aad u ogaato haddii ay tani kuu tahay kala doorasho wanaagsan.

# Isbitaalada

Waxaan isbitaalada hoose kala shaqeynaa daryeelka isbitaalka. Waxaad daryeelka degdega ah ku heli kartaa isbitaal kasta. Isbitaalada qaarkood waxay bixiyaan qolka gargaarka degdega ah oo buuxa si loo caawiyo qof dareemaya dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka laakiin waxaa dhici karta in aad tagto isbitaal kasta si aad u hesho caawimaad.

Isbitaalada bixiya qolka gargaarka degdega ah oo buuxa oo caawin kara qof dareemaya dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka ayaa lagu tilmaamay *

***McMinnville***

**Willamette Valley Medical Center** *
2700 SE Stratus Ave.
McMinnville, OR 97128
503-472-6131 (TTY 711)

https://willamettevalleymedical.com/

***Newberg***

**Providence Newberg Medical Center**
1001 Providence Dr.
Newberg, OR 97132
503-537-1555 ama 800-562-8964 (TTY 711)
https://oregon.providence.org/location-directory/p/providence-newberg-medical-center/

***Dallas***

**West Valley Hospital**
525 SE Washington St.
Dallas, OR 97338
503-623-8301 (TTY 711)
https://www.salemhealth.org/services/salem-health-west-valley

***Salem***

**Salem Health Hospital ***
890 Oak St. SE
Salem, OR 97301
503-370-5200 ama 800-876-1718 (TTY 711)
https://www.salemhealth.org/

***Tualatin***

**Legacy Meridian Park Hospital**
19300 SW 65th Ave.
Tualatin, OR 97602
503-692-1212 (TTY 711)
https://www.legacyhealth.org/locations/hospitals/legacy-meridian-park-medical-center.aspx

***Oregon City***

**Providence Willamette Falls Medical Center ***
1500 Division St.
Oregon City, OR 97045
503-656-1631 (TTY 711)
https://oregon.providence.org/location-directory/p/providence-willamette-falls-medical-center/

# Daryeelka degdega ah

Dhibaato degdeg ah waa mid halis ahaan ku filan in isla markiiba la daaweeyo, laakiin aan halis ahaan ku filayn daaweyn degdeg ah oo la isku siiyo qolka gargaarka degdega ah.

**Waxaad heli kartaa adeegyada daryeelka degdega ah oo ah 24 saacadood maalintii, 7 maalmood toddobaadkii oggolaansho hore la'aantii.**
Uma baahnid gudbin loogu talagalay daryeelka dhakhsaha ama degdega ah. Liiska xarumaha daryeelka degdega ah iyo xarumaha caafimaad ee la imaan karo balan la'aanta 'walk-in' hoosta ka fiiri.

## Daryeelka jirka ee degdega ah

Tusaalooyinka qaarkood ee daryeelka jirka ee degdega ah waa:

- Jeexniinka aan ku lug lahayn dhiig badan laakiin u baahan kara in la tolo.
- Lafo jabay oo fudud iyo dillaaca lafaha faraha iyo lugaha.
- Murgacashada iyo muruqa jirka gala.

### Haddii aad qabto dhibaato degdeg ah, wac daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah (PCP).

Waxaad soo wici kartaa waqti kasta, maalintii ama habeenkii, toddobaadyada dhammaadkooda iyo maalmaha fasaxa ah. U sheeg xafiiska PCP in aad tahay xubin ka tirsan YCCO. Waxaad heli doontaa talo ama gudbin. Haddii aadan la xiriiri karin PCP-gaaga oo ku saabsan dhibaato degdeg ah ama PCP-gaagu kugu arki waayo waqti dhakhso ah oo kugu filan, waxaad tagtaa xarunta daryeelka degdega ah iyo xarumaha caafimaad ee la imaan karo balan la'aanta 'walk-in'. Uma baahnid ballan. Hoosta ka fiiri liiska daryeelka degdega ah iyo xarumaha caafimaad ee la imaan karo balan la'aanta 'walk-in'. Waxaad buuga tilmaamaha daryeel bixiyaha ka heli kartaa halkan https://yamhillcco.org/members/find-a-provider/.

Haddii aad u baahan tahay caawimaad, Adeega Macmiilka YCCO ka wac 855-722-8205 (TTY 711).

**Haddii aadan garanayn in dhibaatadaadu tahay mid degdeg ah, weli wac xafiiska daryeel bixiyahaaga, xataa haddii uu xiran yahay.** Waxaa dhici karta in aad hesho adeega jawaabista. Farriin u dhaaf oo u sheeg in aad tahay xubin ka tirsan YCCO. Waxaa dhici karta in aad hesho talo iyo gudbinta meel kale oo la wacayo. Waxaad dib u soo wicitaan wakiilka YCCO kaga heli doontaa muddo 30-60 daqiiqo gudahood ah ka dib wicitaankaaga, si looga hadlo tallaabooyinka xiga.

Wixii la xiriira talada aan degdega ahayn iyo ballamaha, fadlan wac inta lagu jiro saacadaha shaqada.

## Xarumaha daryeelka degdega ah iyo xarumaha caafimaad ee la imaan karo balan la'aanta 'walk-in' ee ku yaala degaanka YCCO:

***Degaanka Yamhill***

**BestMed Urgent Care**

1755 SW Baker Street
McMinnville, OR 97128
971-900-4522

***Degaanka Washington***

**Providence Medical Group**
16770 SW Edy Road, Suite 102
Sherwood, OR 97140
503-216-9600 Option 2 (TTY 711)

**Legacy GoHealth Urgent Care**
21430 SW Langer Farms Parkway, Suite 158
Sherwood, OR 97140
971-808-0655 (TTY 711)

**Tuality Medical Group Urgent Care**
7545 SE TV Highway
Hillsboro, OR 97123
503-681-4223 (TTY 711)

***Degaanka Marion***

**Salem Health Urgent Care**
1002 Bellevue Street SE
Salem, OR 97301
503-564-4824 (TTY 711)

## Daryeelka ilkaha ee degdega ah

Tusaalooyinka qaarkood ee daryeelka ilkaha ee degdega ah waxaa ka mid ah:

- Xanuunka iliga oo ku toosiya habeenkii oo adkeeya in wax la calaliyo.
- Ilko go'ay ama jaban.
- Kabida ilkaha 'crown' ama buuxinta ilkaha oo la lumiyay.
- Meel bararsan 'abscess' (xirmo malax ah oo ku jirta iliga oo uu keeno infekshan).

**Haddii aad qabto dhibaatada ilkaha oo degdeg ah wac dhakhtarkaaga daryeelka aasaasiga ee ilkaha (PCD)**

Haddii aadan la xiriiri karin PCD-gaaga ama aadan lahayn mid, Adeega Macmiilka Ilkaha ka wac 800-525-6800. Waxay kaa caawin doonaan in aad hesho daryeelka ilkaha ee degdega ah, iyada oo ku xiran xaaladaada. Waa in aad ballan ku heshaa muddo 2 toddobaad gudahood ah, ama 1 toddobaad haddii aad uur leedahay, oo loogu talagalay xaalada ilkaha ee degdega ah.

# Daryeelka degdega ah

**Wac 911 haddii aad u baahan tahay ambalaas ama tag qolka gargaarka degdega ah marka aad is leedahay halis baad ku jirtaa.** Xaalada degdega ah waxay u baahan tahay fiiro gaar ah oo degdeg ah waxayna khatar gelisaa noloshaada. Wuxuu noqon karaa dhaawac degdeg ah ama jiro lama filaan ah. Xaaladaha degdega waxay sidoo kale waxyeello u keeni karaan jirkaaga. Haddii aad uur leedahay, xaalada degdega ah waxay sidoo kale waxyeello u keeni kartaa ilmahaaga.

**Waxaad heli kartaa adeegyada dhakhsaha iyo degdega ah oo ah 24 saacadood maalintii, 7 maalmood toddobaadkii iyada oo aan la haysan oggolaansho hore. Uma baahnid gudbin.**

## Xaaladaha degdega ah ee jireed

Daryeelka jirka ee degdega ah waa marka aad u baahan tahay daryeel degdega ah, haddii noloshaadu halis ku jirto.

Tusaalooyinka qaarkood ee xaaladaha caafimaad ee degdega ah waxaa ka mid ah:

- Lafo jabay.
- Dhiig bax aan joogsanayn.
- Wadne xanuun imaan kara.
- Miyirka oo la lumiyo.
- Suuxdin.
- Xanuun daran.
- Neefsasho adag.
- Ka falcelinta xasaasiyada.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan daryeelka degdega ah:

- Ku wac PCP-gaaga ama Adeega Macmiilka YCCO muddo 3 maalmood gudahood ah marka aad hesho daryeelka degdega ah.
- Waxaad xaq u leedahay in aad isticmaasho isbitaal ama goob kale oo kasta, oo ku taala Maraykanka gudihiisa.
- Daryeelka degdega ah waxaa ka mid ah adeegyada xasillinta ka dib (daryeelka ka dib). Adeegyada daryeelka ka dib waa adeegyo caymiskooda la daboolo oo la xiriira xaalad degdeg ah. Adeegyadani ayaa lagu siiyaa ka dib marka lagu xasilliyo. Waxay gacan ka geystaan joogteynta xaaladaada la xasilliyay. Waxay gacan ka geystaan kor u qaadida ama hagaajinta xaaladaada.

Fiiri liiska isbitaalada leh qolalka gargaarka degdega ah ee ku qoran bogga 72.

## Xaaladaha ilkaha ee degdega ah

Xaalada dhinaca ilkaha ee degdeg ahi waa marka aad u baahan tahay daryeelka ilkaha oo isla maalintaasi ah. Daryeelkani waa mid la heli karo 24 saacadood maalintii iyo 7 maalmood toddobaadkii. Xaalada dhinaca ilkaha ee degdeg ahi waxay u baahan kartaa daaweyn degdeg ah. Tusaalooyinka qaarkood waa:

- Ilig soo dhacay (oo aan ahayn iliga carruurnimada oo dabacsan “wiggly”).
- Adiga oo leh weji bararsan ama infekshan ku leh afka.

- Dhiig ka socda ciridkaaga oo aan joogsan doonin.

Wixii la xiriira xaalada dhinaca ilkaha ee degdeg ah, fadlan wac dhakhtarkaaga daryeelka aasaasiga ee ilkaha (PCD). Waxaa lagugu arki doonaa muddo 24 saacadood gudahood ah. Xafiisyada qaarkood ayaa leh waqtiyo la imaan karo balan la'aanta 'walk-in' oo ah xaalada degdega ah. Haddii aad qabto xaalada dhinaca ilkaha oo degdeg ah oo dhakhtarkaaga ama PCP-gaagu uusan ku caawin karin, uma baahnid oggolaansho si aad u hesho daryeelka ilkaha ee degdega ah. Waad ka sameyn kartaa qolka gargaarka degdega ah ama Adeega Macmiilka ka wac 800-525-6800. Wixii la xiriira daryeelka ilkaha ee degdega ah.

Haddii kala doorashooyinkan midkoona kuu shaqeynayn, wac 911 ama booqo Qolka Gargaarka Degdega ah**. Haddii aad u baahan tahay raacida ambalaaska, fadlan wac 911.** Fiiri liiska isbitaalada leh qolalka gargaarka degdega ah ee ku qoran bogga 72.

## Dhibaatada caafimaadka hab-dhaqanka iyo xaaladaha degdega ah

**Xaalada degdega ah ee caafimaadka hab-dhaqanka** waa marka aad isla markiiba u baahan tahay caawimaad si aad u dareento badbaado ama ugu sugnaato badbaado. Waa marka adiga ama dad kale aad halis ku sugan tihiin. Tusaale ayaa ah dareemida qofka oo iscelin kari waaya. Waxaa dhici karta in aad dareento ammaankaaga oo halis ku jira ama qabto fikirka ah in aad waxyeello u geysato naftaada ama ta dadka kale.
**Wac 911 ama tag qolka gargaarka degdega ah haddii aad halis ku sugan tahay.**

- Adeegyada xaalada degdega ah ee caafimaadka hab-dhaqanku ama baahna gudbin ama oggolaansho hore. YCCO waxay xubnaha siisaa caawimaada dhibaatada jirta iyo adeegyo ka dib xaalad degdeg ah.
- Daryeel bixiyaha caafimaadka hab-dhaqanka ayaa kaa taageeri kara in aad hesho adeegyo lagu wanaajinayo oo lagu xasillinayo caafimaadka dhimirka. Waxaanu isku dayi doonaa in aan ku caawino oo ku taageerno dhibaatada ka dib.

## Lambarrada degaanka ee loogu talagalay dhibaatooyinka oo 24-saacadood ah, xarumaha dhibaatooyinka ee la imaan karo balan la'aanta 'walk-in' isla markaana wax lagu dhaafi karo 'drop-off'.

### *Waxaad wici kartaa, farriin u diri kartaa ama la sheekaysan kartaa 988. 988 waa khadka samata bixinta Isdilka iyo Dhibaatada oo aad daryeel iyo taageero nasariis leh ka heli karto la taliyayaasha dhibaatooyinka oo tababaran oo ah 24 saacadood maalintii, 7 maalmood toddobaadkii.*

**Degaanka Polk:**
**503-623-9289**
**503-581-5535 ama (800) 560-5535 (Saacadaha shaqada ka dib, Toddobaadyada Dhammaadkooda & Maalmaha Fasaxa)**

**Degaanka Washington:**
**503-291-9111**

**Degaanka Yamhill**
**503-434-7465 ama 844-842-8200 (Saacadaha shaqada ka dib, Toddobaadyada Dhammaadkooda & Maalmaha Fasaxa)**
**503-434-7523 (Waqtiga-maalintii Dadka waaweyn)**
**503-434-7462 (Waqtiga-maalintii Carruurta iyo Dhallinyarada)**

**Dhibaatada caafimaadka hab-dhaqanku** waa marka aad si dhakhso ah ugu baahan tahay caawimaad. Haddii aan la daaweyn, xaaladu waxay noqon kartaa mid degdeg ah. Fadlan wac mid ka ah ah khadadka dhibaatooyinka ee degaanka ee 24-saacadood ee kor ku qoran ama wac 988 haddii aad la kulmayso mid ka mid ah kuwa soo socda ama aadan hubin haddii ay jirto dhibaato. Waxaanu rabnaa in aanu ku caawino oo kaa taageerno ka hortagga xaalad degdeg ah.

**Tusaalooyinka waxyaabaha la fiiriyo haddii adiga ama xubin ka tirsan qoys ay haysato xaalada degdega ah ee caafimaadka hab-dhaqanka ama dhibaato:**

- Ka fikirka is-dilid.
- Iyada oo la maqlayo dhawaaqyo kuu tilmaamaya in aad naftaada dhaawac gaarsiiso ama qof kale.
- Iyada oo dhaawac la gaarsiinayo dad kale, xayawaan, ama hanti.
- Hab-dhaqan khatar ah ama carqalad weyn leh oo ka jira dugsiga, shaqada, asxaabta ama qoyska.

Halkan waxaa ku qoran waxyaabaha qaarkood ay YCCO qabato si ay u taageerto xasillin ka jirta bulshada:

- Khadka dhibaatooyinka ee la waco marka qofka xubinta ahi u baahan yahay caawimaad
- Kooxda dhibaatada ee guur-guurta oo u iman doonta xubin u baahan caawimaad.
- Xarumaha dhibaatooyinka ee la imaan karo balan la'aanta 'walk-in' isla markaana wax lagu dhaafi karo 'drop-off'.
- Dhibaato ka nasashada (daryeel muddo gaaban ah)
- Meelo muddo gaaban ah oo la joogo si loo xasillo
- Adeegyada xasillinta ka dib iyo adeegyada daryeelka degdega ah. Daryeelkani waa mid la heli karo 24 saacadood maalintii iyo 7 maalmood toddobaadkii. Adeegyada daryeelka xasillinta ka dib waa adeegyo caymiskooda la daboolo, oo la xiriira caafimaadka ama xaalada degdega ah ee caafimaadka hab-dhaqanka, oo la bixiyo ka dib marka la xasilliyo xaalada degdega ah iyo in la joogteeyo xasillinta ama xallinta xaalada.
- Adeegyada jawaab ka bixinta dhibaatooyinka, oo ah 24-saacadood maalintii, oo loogu talagalay xubnaha helaya daaweynta caafimaadka hab-dhaqanka ee guriga-dhexdiisa ee degdega ah.

Fiiri waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada caafimaadka hab-dhaqanka oo ku qoran bogga 46.

# Ka hortagga isdilka
Haddii aad qabto xanuunka maskaxda oo aadan daaweyn, waxaa dhici karta in aad halis ugu sugan tahay isdil.   Iyada oo la haysto daawada saxda ah, noloshaadu way fiicnaan kartaa.

## Astaamaha digniinta isdilka ee caadiga ah
Hel caawimaad haddii aad dareento wax calaamado ah oo adiga ama qof aad garanayso ka fikirayo is-dilid.   Ugu yaraan boqolkiiba 80% dadka ka fikiraya inay isdilaan waxay rabaan in la caawiyo.   Waa in aad astaamaha digniinta u qaadataa si dhab ah.

Halkan waxaa ku qoran calaamada digniinta ee isdilka:

- Ka hadalka doonista in la dhinto ama qofku isdilo.
- Qorsheynta hab aad isku disho, sida gadashada hubka.
- Dareenka rajo beel ama aanay jirin sabab lagu sii noolaado.
- Dareenka in lagu xiran yahay meel ama uu ku haysto xanuun aan loo adkaysan karin.
- Ka hadalka in culays lagu yahay dadka kale.
- Bixinta waxyaabo qiimo leh.
- Wax badan laga fikiro oo laga hadlo dhimasho.
- La isticmaalayo aalkolo ama mukhaadaraad badan.
- Loo dhaqmayo si walaac leh ama wax la dhibsanayo.
- Loo dhaqmayo si aan taxaddar lahayn.
- Qalbi jab ama dareemaya takoorid.
- Leh dabeecad si aad ah isku isbeddelaysa.

**Marbana fikirka isdilka ama ka hadalka isdilka ha ka dhigin mid sir ah!**

**Haddii aad rabto in aad la hadasho qofka baxsan YCCO, wac mid kasta oo ka mid ah kuwa soo socda:**

- Fiiri liiska khadadka dhibaatooyinka ee ku qoran bogga 78
- Khadka Qaranka ee Ka hortagga Isdilka: Wac 988 ama booqo 988lifeline.org
- The David Romprey Memorial Warmline: 800-698-2392
- Khadka Farriinta Dhibaatada: Farriin u dir 741741
- Ka hortagga isdilka dhallinyarada:  Khadka Dhallinyarada; 877-968-8491 ama fariin u dir 839863 adigoo isticmaalaya kalmada Teen2Teen
- Waxaad sidoo kale lambarka dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka ee degaankaaga ka raadin kartaa dhanka internet-ka.  Waxay bixin karaan baaritaano oo kaa caawin karaan in aad hesho adeegyada aad u baahan tahay.

# Daryeelka daba socda kii hore ka dib xaalad degdeg ah.
Ka dib xaalad degdeg ah waxaa dhici karta in aad u baahato daryeel daba socda kii hore.  Tani waxaa ku jira wax kasta oo aad u baahan tahay ka dib ka tagida qolka gargaarka degdega ah. Daryeelka daba socda kii hore ma aha xaalad degdeg ah.  OHP ma bixiso caymiska daryeelka daba socda kii hore marka aad ka maqan tahay gobolka.  Wac daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah

ama xafiiska dhakhtarkaaga daryeelka aasaasiga ee ilkaha si loo dejiyo daryeel daba socda kii hore.

- Waa in aad daryeel daba socda kii hore ka hesho daryeel bixiye joogto ah ama dhakhtarka ilkaha oo joogto ah. Waxaad dhakhtarka xaalada degdega ah ka codsan kartaa in uu waco daryeel bixiyahaaga si loo qaban qaabiyo daryeel daba socda kii hore.
- Sida ugu dhakhsaha badan u wac daryeel bixiyahaaga ama dhakhtarkaaga ilkaha ka dib marka aad hesho daryeelka dhakhsaha ama degdega ah. U sheeg daryeel bixiyahaaga ama dhakhtarkaaga halka lagugu daaweeyay iyo sababta.
- Daryeel bixiyahaaga iyo dhakhtarkaaga ilkaha ayaa maamuli doona daryeelkaaga daba socda kii hore isla markaana ballan kuu samayn doona haddii aad u baahan tahay mid.

# Daryeelka laga fog yahay guriga

## Daryeelka la qorsheeyay ee ka baxsan gobolka

YCCO ayaa kaa caawin doonta in aad hesho daryeel bixiye ka baxsan gobolka iyo bixinta lacagta adeega caymiskiisa la daboolo marka aad:

- U baahan tahay adeeg aan laga heli karin Oregon
- Ama haddii adeega kale uu yahay mid qiimo ahaan macquul ah

Si aad waxyaabo dheeraad ah uga ogaato sida aad u heli karto buuxinta daawada la isku qoro ka hor safarkaaga fiiri bogga 72.

## Daryeelka degdega ah ee laga fog yahay guriga

Waxaa dhici karta in aad u baahato daryeel degdeg ah marka aad ka fog tahay guriga ama aad ka baxsan tahay degaanka adeega ee YCCO. **Wac 911 ama tag waaxda xaalada degdega ah oo kasta.** Ugama baahnid oggolaansho hore adeegyada xaalada degdega ah. Adeegyada caafimaadka degdega ah waxaa caymiskooda la daboolaa Maraykanka oo dhan, tani waxaa ka mid ah caafimaadka hab-dhaqanka iyo xaaladaha ilkaha ee degdega ah.

**Ha bixin lacagta daryeelka degdega ah. Haddii aad bixiso biilka qolka gargaarka degdega ah, YCCO looma oggola inay dib kuu siiso lacagta.** Fiiri bogga 80 ee waxa la sameynayo haddii biil laguu soo diro.

### Fadlan raac tallaabooyinka hoos ku qoran haddii aad u baahan tahay daryeelka degdega ah ee laga fog yahay guriga

1. Xaqiiji in aad haysato Kaarkaaga Aqoonsiga ee Oregon Health iyo kaarka Aqoonsiga YCCO oo soo qaadato marka aad u safarto meel ka baxsan gobolka.
2. Tus iyaga kaarkaaga Aqoonsiga YCCO oo ka codso in ay biilka u diraan YCCO.
3. Ha saxiixin wax warqad ah ilaa aad ka ogaanayso in daryeel bixiyuhu uu biilka u diri doono YCCO. Mararka qaarkood YCCO ma bixin karto lacagta biilkaaga haddii foomka heshiiska lagu bixinayo lacagta la saxiixay. Si aad waxyaabo dheeraad ah uga ogaato foomkan fiiri bogga 81.

4. Waxaad qolka gargaarka degdega ah ama xafiiska biilka ee daryeel bixiyaha ka codsan kartaa in ay la xiriiraan YCCO haddii ay rabaan in ay xaqiijiyaan caymiskaaga ama qabaan wax su’aalo ah. 5. Haddii aad u baahan tahay talo ku saabsan waxa la sameynayo ama u baahan tahay daryeelka aan degdega ahayn oo ka fog guriga, wac YCCO si aad u hesho caawimaad.

Waqtiyada lagu jiro xaalada degdega ah tallaabooyinka kor ku qoran had iyo jeer ma aha kuwo suurtagal ah. In la is diyaariyo iyo ogaanshaha waxa ay yihiin tallaabooyinka la qaadayo ee loogu talagalay daryeelka degdega ah ee ka baxsan gobolku waxaa dhici karta in uu hagaajiyo arrimaha biilka inta aad maqan tahay. Tallaabooyinkan waxaa dhici karta in ay kaa ilaashaan in laguu soo diro biilka adeegyada ay YCCO dabooli karto. YCCO ma bixin karto lacagta adeegyada haddii daryeel bixiyuhu uusan noo soo dirin biil.

# Biilasha loogu talagalay adeegyada

**Xubnaha ka tirsan OHP ma bixiyaan lacagta biilasha ee loogu talagalay adeegyada caymiskooda la daboolo**

Marka aad booqashadaada u horreysa la dejiso daryeel bixiye, u sheeg xafiiska in aad ka tirsan tahay YCCO. La socodsii iyaga haddii aad leedahay caymis kale, sidoo kale. Tani waxay ka caawin doontaa daryeel bixiyaha in uu ogaado cidda biilka loo dirayo. Kaarkaaga Aqoonsiga u soo qaado dhammaan booqashooyinka caafimaad. YCCO waxay bixisaa lacagta dhammaan adeegyada caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah ee ku haboon ee la daboolo iyada oo la raacayo Liiska Muhiimada la siiyay ee Adeegyada Caafimaadka.

Daryeel bixiyaha YCCO oo ka tirsan qorshe caafimaad ‘in-network provider’ (oo loogu talagalay liiska daryeel bixiyayaasha ka tirsan qorshe caafimaad ‘in-network providers’ fiiri bogga 28) ama qof u shaqeynaya iyagu kuuma soo diri karo biilka ama iskuma dayi karo in uu soo ururiyo wixii lacag ee ay YCCO wax ku leedahay ee loogu talagalay adeegyada aadan mas’uulka ka ahayn daboolistooda.

## Xubnaha looma diri karo biilka ballamaha laga maqnaaday ama qaladaadka.

- Ballamaha laga maqnaaday ma aha kuwo biilkooda adiga lagu soo dallici karo ama OHP.
- Haddii daryeel bixiyahaagu uusan soo dirin warqadihii saxda ahaa ama uusan helin oggolaansho, ma heli kartid biilka taasi. Tani waxaa loo yaqaan qaladka daryeel bixiyaha.

## Xubnuhu ma heli karaan baaqiga soo hara ‘balance’ ama biil aan la filayn.

Marka uu daryeel bixiye uu diro biilka lacagta inta ka hartay biilka, ka dib marka ay YCCO lacagtiisa bixisay, taasi waxaa loo yaqaan biilka baaqiga ah ‘balance billing’. Waxaa sidoo kale loo yaqaan ama biil aan la filayn ‘surprise billing’. Qaddarka waa farqiga u dhexeeya qaddarka

biil ahaanta loo diray iyo qaddarka ay YCCO bixiso. Tani waxay dhacdaa inta badan marka aad aragto daryeel bixiye ka baxsan degaanka caymiska laga bixiyo 'out-of-network'. Mas'uul kama tihid kharashyadani.

Haddii aad hayso su'aalo, wac Adeega Macmiilka 855-722-8205. Wixii macluumaad dheeraad ee ku saabsan biilka aan la filayn 'surprise billing' booqo https://dfr.oregon.gov/Documents/Surprise-billing-consumers.pdf.

### Haddii daryeel bixiyahaagu uu kuu soo diro biil, ha bixin iyada.

Isla markiiba wac YCCO si aad u hesho caawimaad 855-722-8205, (TTY 711).

Waxaad sidoo kale wici kartaa xafiiska biilka ee daryeel bixiyaha oo xaqiiji in ay ogyihiin in aad leedahay OHP.

## Waxaa dhici karta in ay jiraan adeegyo ay tahay in aad lacagtooda bixiso

Caadiyan, kuwa aad la leedahay leedahay YCCO, ma aha in aad bixiso lacagta biilasha caafimaadka oo kasta. Mararka qaarkood, ma aha in aad bixiso. Marka aad u baahan tahay daryeel, kala hadal daryeel bixiyahaaga waxyaabaha la kala dooran karo. Xafiiska daryeel bixiyaha ayaa kula hubin doona YCCO si loo ogaado haddii aan daaweyn ama adeegyada aan la daboolin. Haddii aad doorato in aad hesho adeeg aan la daboolin, waxaa dhici karta in aad bixiso biilka.

### Waa in aad lacag siisaa adeeg bixiyaha haddii:

- **Aad daryeel joogta ah ka hesho meel ka baxsan Oregon.** Aad adeegyo ka hesho meel ka baxsan Oregon oo ahayn daryeelka dhakhsaha ama degdega ah.

- **Aadan u sheegin daryeel bixiyaha in aad leedahay OHP.** Aadan u sheegin daryeel bixiyaha in aad leedahay YCCO, caymis kale ama siisay magac aanan u dhigmin ka ku yaala Aqoonsiga YCCO marka la joogo waqtiga ama ka dib marka adeega la bixiyay, si uuna daryeel bixiyuhu biil ugu soo dallici karin YCCO. Daryeel bixiyayaashu waa in ay xaqiijiyaan u qalmidaada YCCO marka la joogo waqtiga adeega iyo ka hor biil dirista ama sameynta lacag ururinta. Waa in ay isku dayaan in ay helaan macluumaadka caymiska ka hor inta aysan biil kuu soo dirin.

- **Aad sii wado in aad hesho adeeg la diiday.** Adiga ama wakiilkaagu aad codsatay sii wadida faa'iidooyinka inta lagu jiro rafcaanka iyo nidaamka dhageysi dacwadeed ee dooda la qabo, iyo go'aanka kama dambeys ah oo aanan dhinacaaga u xaglinayn. Waxay noqonaysaa in aad bixiso wixii lacago ee la isku soo dalaco ee yimaada ee loogu talagalay adeegyada la diiday ama taariikhda dhaqan galka ka dib ee ku qoran ogeysiinta tallaabo qaadida ama ogeysiinta xallinta rafcaanka.

- **Aad lacag loogu talagalay adeegyo ka hesho shil.** Haddii lacag bixiye koox-saddexaad ah, sida caymiska gaariga, kuu soo diro jeegag loogu talagalay adeegyo aad

ka hesho daryeel bixiyahaaga oo aadan jeegagan u isticmaalin in aad lacag siiso daryeel bixiyaha.

- **Aynaan la shaqeyn daryeel bixiyahaasi.** Marka aad doorato in aad aragto daryeel bixiye aan ahayn qorshe caafimaad 'in-network' oo lala leeyahay YCCO waxaa dhici karta in aad bixiso adeegyadaada. Ka hor inta aadan arag daryeel bixiye aan ahayn qorshe caafimaad 'in-network' oo lala leeyahay YCCO waa in aad wacdaa Adeega Macmiilka ama la shaqeysaa PCP-gaaga. Oggolaansho hore ayay dhici kartaa in loo baahdo ama waxaa jiri kara daryeel bixiye ka tirsan qorshe caafimaad 'in-network' oo ku habboon baahiyahaaga. Liiska daryeel bixiyayaasha ka tirsan qorshe caafimaad 'in-network providers' fiiri bogga 28.

- **Aad doorato adeegyo aan la daboolin.** Waa in aad bixisa lacagta marka aad doorato in aad yeelato adeegyo uu daryeel bixiyuhu kuu sheego in aysan caymiskooda daboolayn YCCO. Xaaladan oo kale:
  - Adeegu waa wax uusan qorshahaagu daboolayn.
  - Ka hor inta aadan helin adeega, waxaad saxiixdaa foomka Heshiiska Bixinta Lacagta. Ogow waxyaabo dheeraad oo ku saabsan foomka hoose.
  - Had iyo jeer marka hore la xiriir Adeega Macmiilka YCCO si aad ugula hadasho waxa caymiskooda la daboolayo. Haddii aad hesho biil, fadlan isla markiiba la xiriir Adeega Macmiilka YCCO.
  - Tusaalooyinka qaarkood ee adeegyada aan caymiskooda la daboolin:
    - Daaweynta qaarkeed, sida daawooyinka meel kasta laga iibsan karo, ee loogu talagalay xaaladaha aad wax kaga qaban karto guriga ama iskood u bogsooda (hargabka, hargabka fudud 'mild flu', maqaarka dhintay 'corns', maqaarka adag 'calluses' iyo iwm.)
    - Qalliinada is qurxinta ama daaweynta ee muuqaal kaliya looga dan leeyahay.
    - Adeegyada kaa caawinaya in aad uur yeelato.
    - Daaweynta aan guud ahaan waxtarka lahayn.
    - Daaweynta toosinta ilkaha 'orthodontics', marka laga reebo ilkaha aan isku toosanayn ee wax curyaaminaya 'handicapping malocclusion' si loo daaweeyo dilaaca faruurta 'cleft palate' ee carruurta.

Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan adeegyada caymiskooda la daboolo ama aan caymiskooda la daboolin, fadlan Adeega Macmiilka YCCO kala xiriir 855-722-8205 (TTY 711).

# Waxaa dhici karta in lagaa codsado in saxiixdo foomka Heshiiska Bixinta Lacagta

Oo ah heshiiska bixinta lacagta oo la isticmaalo marka aad rabto adeeg aanay caymiskiisa bixinin YCCO ama OHP. Foomka waxaa sidoo kale loo yaqaan wax iska dhaafid 'waiver'. Waxaa kaliya laguu soo diri karaa biilka adeega hadii aad saxiixdo foomka Heshiiska Bixinta Lacagta. Ma aha inaad dareento in lagugu qasbayo in aad saxiixdo foomka. Waxaad nuqulka foomkan ka arki kartaa https://bit.ly/OHPwaiver.

Ma aha in aad saxiixdo foomka Heshiiska Bixinta Lacagta haddii aadan rabin. Haddii aadan hubin in ay tahay in aad saxiixdo foomka Heshiiska Bixinta Lacagta ama hayso wax su'aalo ah oo ku saabsan haddii faa'iidadu tahay mid la daboolayo, fadlan Adeega Macmiilka YCCO kala xiriir 855-722-8205 (TTY 711) si aad u hesho caawimaad. Haddii YCCO ama daryeel bixiyahaagu kuu sheego in adeega caymiskiisa aanay bixinin OHP, waxaad weli xaq u leedahay in aad ka doodid go'aankaasi adiga oo gudbinaya rafcaan oo codsanaya dacwad dhageysi. Fiiri bogga 93.

## Waxyaabaha soo socda waa in ay run yihiin marka la eego foomka Heshiiska Bixinta Lacagta si uu u noqdo mid sax ah:

- Foomku waa in uu lahaadaa qiyaasta kharashka ee adeega. Tani waa inay la mid noqotaa sida ay ugu taal biilka.
- Adeega lagu qorsheeyay muddo 30 maalmood gudahood ah laga bilaabo taariikhda aad saxiixday foomkan.
- Foomka oo sheegaya in OHP aanay bixin caymiska adeega.
- Foomka oo sheegaya in aad oggolaanayso in adiga laftaadu aad bixiso biilka.
- Aad codsatay in aad si gaar ah u bixiso lacagta adeeg la daboolo. Haddii aad go'aansato in aad tani samayso, waxaa dhici karta in daryeel bixiyuhu biilka kuu soo diro haddii uu hore kuugu sii sheego kuwa soo socda:
    - Adeega oo caymiskiisa la daboolay oo YCCO ay si buuxda u bixin doonto adeega la daboolay.
    - Qiyaasta kharashka, oo ay ku jiraan dhammaan kharashka la isku soo dalaco ee la xiriira, qaddarka ay YCCO u bixin doonta adeega. Daryeel bixiyuhu kuuma soo diri karo biilka qaddar ka badan inta ay YCCO bixinayso; oo
    - Adiga oo ogsoon iyo si ikhtiyaari ah u oggolaada in aad bixiso lacagta adeega la daboolay.
- Adeeg bixiyaha oo diiwaanka u geliya qoraal ahaan, oo uu saxiixay adiga ama wakiilkaagu, in ay ku siiyeen macluumaadka kor ku qoran, oo ay:
    - Ku siiyeen fursad aa ku weydiiso su'aalo, ku hesho macluumaad dheeraad ah, oo kula tashato shaqaalahaaga kiiska ama wakiilkaaga.
    - Aad oggolaato in aad si gaar ah u bixiso lacagta. Adiga ama wakiilkaagu saxiixdeen heshiiska oo leh dhammaan macluumaadka lacag bixinta gaarka ah.
    - Daryeel bixiyuhu waa in uu ku siiyaa nuqulka heshiiska la saxiixay. Daryeel bixiyuhu sheegasho uma gudbin karo YCCO oo loogu talagalay adeega la daboolay ee ku qoran heshiiska.

# Biilasha loogu talagalay daryeelka degdega ah ee laga fog yahay guriga ama ka baxsan gobolka

Iyada oo sababtu tahay daryeel bixiyayaasha xaaladaha degdega ah ee qaarkood ee ka baxsan nidaamka caymiska 'out-of-network' oo aan aqoon lahayn xeerarka OHP Oregon (Medicaid), waxaa dhici karta in ay biil kuu soo diraan. Waa in aan laguu soo dirin biilka xaalada degdega ah ama daryeelka isbitaal is dhigista ka dib. La xiriir Adeega Macmiilka YCCO haddii aad hesho biil. Waxaan leenahay ilo si aan wax u caawino.

**Isla markiiba na soo wac haddii aad hesho wax biilal ah oo ka socda daryeel bixiye ka baxsan gobolka.** Daryeel bixiyayaasha qaarkood ayaa biilasha aan la bixin u dira hay'ada soo ururinta lacagta waxaana dhici karta in ay xataa dacwad u gudbiyaan maxkamadda si lacagta loo siiyo. Way adag tahay in la xalliyo dhibaatada marka ay taasi dhacdo. Isla marka aad hesho biil:

- Ha iska indho tirin biilasha caafimaad.
- Sida ugu dhakhsaha badan Adeega Macmiilka YCCO ugala xiriir 855-722-8205 (TTY 711). Saacadaha: Isniinta ilaa Jicmaha, 8:00 subaxnimo ilaa 5:00 galabnimo.
- Haddii aad hesho warqado maxkamadeed oo ku saabsan biilka, isla markiiba wac. Waxaad sidoo kale wacdaa qareen ama Khadka Gargaarka Dadweynaha ee 800-520-5292 si aad u hesho talo sharci ah. Waxaa jira sharciyo macaamiishu leeyihiin oo ku caawin kara marka si khalad ah biil laguugu soo diro adiga oo ah xubin ka tirsan OHP.
- Haddii aad heshay biil iyada oo sababtu tahay sheegashadaadii oo ay diiday YCCO, la xiriir Adeega Macmiilka. Ogow waxyaabo dheeraad oo ku saabsan diidmada, xuquuqda aad u leedahay racfaanka, iyo waxa la sameynayo haddii aadan nagu raacsanayn oo ku qoran bogga 93.
    - Waxaad sidoo kale qaadan kartaa rafcaan adiga oo warqad u diraya YCCO sheegaysa in aadan ku raacsanayn biilka iyada oo sababtu tahay adiga oo ka tirsanaa OHP wakhtigii adeega.

## Talooyin muhiim ah oo ku saabsan bixinta lacagta adeegyada iyo biilka

- Waxaanu si adag kugu boorinaynaa in aad wacdo Adeega Macmiilka ka hore inta aadan oggolaan in aad lacag siiso daryeel bixiye.
- Haddii daryeel bixiyuhu kaa codsado in aad bixiso lacagta copay-ga, ha bixin iyada! Ka codso shaqaalaha xafiiska in uu waco YCCO.
- YCCO waxay bixisaa dhammaan a deegyada caymiskooda la daboolo iyada oo la raacayo Liiska Muhiimada la siiyay ee Adeegyada Caafimaadka, fiiri bogga 34.
- Liiska kooban ee faa'iidooyinka iyo adeegyada caymiskooda la daboolo ee hoos yimaada faa'iidooyinkaaga OHP ee lala leeyahay YCCO, oo sidoo kale daboola caymiska maamulka kiiska iyo isku duwida daryeelka, fiiri bogga 34. Haddii hayso wax su'aalo ah oo ku saabsan waxa caymiskiisa la daboolayo, waxaad weydiin kartaa PCP-gaaga ama wac adeega macmiilka YCCO.
- Ma jiro daryeel bixiyaha YCCO oo ka tirsan qorshe caafimaad 'in-network provider' ama qof u shaqeynaya iyagu oo biil u diri kara qof xubin ah, ama biilka qofka xubinta ah u diri kara hay'ada soo ururinta lacagta, ama joogteyn kara dacwado la gudbiyo 'civil action' oo ka dhan ah xubinta si loo soo ururiyo wixii lacag ee ay YCCO wax ku leedahay ee loogu talagalay adeegyada aadan mas'uulka ka ahayn daboolistooda.
- Xubnaha marnaba laguma soo dalaco lacagta gaadiid raacida lagu tagayo ballamaha caymiskooda la bixiyo. Fiiri bogga 65. Xubnuhu waxay codsan karaan in ay helaan lacago la isku soo celinayo oo loogu talagalay baabuur u kaxaysiga booqashooyinka caymiskooda la bixiyo ama in ay helaan tikidhada bas raacida si ay ugu isticmaalaan baska lagu tagayo booqashooyinka caymiskooda la bixiyo.

- Iska ilaalinta in biil la isku soo diro waxay kaliya khusaysaa haddii bixiyaha caafimaadku ogaa ama ay tahay in uu ogaado in aad leedahay OHP. Sidoo kale, waxay kaliya khusaysaa daryeel bixiyaha la shaqeeya OHP (laakiin inta badan daryeel bixiyayaashu sidaasi ayay sameeyaan).
- Mararka qaarkood, daryeel bixiyahaagu si sax ah uma buuxiyo warqada. Marka ay tani dhacdo, waxaa dhici karta in aan iyaga la siinin lacag. Taasi macnaheedu ma aha in aad lacagta bixiso. Haddii aad isla hadaba heshay adeega oo aan diidno in aan lacag siino daryeel bixiyahaaga, daryeel bixiyahaagu weli kuuma soo diri karo biilka.
- Waxaa dhici karta in aad ogeysiin naga hesho sheegaysa in aanan bixin doonin lacagta adeega. Ogeysiintaasi macnaheedu ma aha in aad lacagta bixiso. Daryeel bixiyahaaga ayaa meesha ka saari 'write off' doona lacagaha la isku soo dalaco.
- Haddii YCCO ama daryeel bixiyahaagu kuu sheego in adeega caymiskiisa aanay bixinin OHP, waxaad weli xaq u leedahay in aad ka doodid go'aankaasi adiga oo gudbinaya rafcaan oo codsanaya dacwad dhageysi. Fiiri bogga 93.
- Haddii ay timaada xidhitaanka YCCO, mas'uul kama tihid bixinta lacagta adeegyada aan daboolno ama bixino.

# Xubnaha leh OHP iyo Medicare

Dadka qaarkood ayaa isku wakhti haysta OHP (Medicaid) iyo Medicare. OHP waxay caymiskooda bixisaa waxyaabaha aanay Medicare caymiskooda bixin. Haddii aad leedahay labbadoodaba, Medicare waa caymiskaaga caafimaad ee muhiimka ah. OHP waxay lacagtooda bixin kartaa waxyaabaha sida daawooyinka ayna Medicare bixin caymiskooda.

**Haddii aad leedahay labbadoodaba, mas'uul kama tihid:**

- Co-pay-yada
- Lacagaha caymiska laga jaro 'deductibles'
- Bixinta lacagta caymiska ee la wadaago 'co-insurance' ee loogu talagalay adeegyada Medicare, lacagahan la isku soo dalaco waxaa caymiskooda bixinaya OHP.

Waxaa dhici karta in aad u baahato in aad bixiso co-pay-ga kharashyada daawooyinka la isku qoro qaarkood.

Waxaa jira wakhtiyo ay dhici karto in aad bixiso lacagta caymiska ee la iska jaro, lacagta caymiska ee la wadaago 'co-insuranc', ama co-pay-yada haddii aad doorato in aad aragto daryeel bixiye ka baxsan nidaamka. La xiriir Barnaamijka Dadka Waayeelka ah ee Naafada ah (APD) ee degaankaaga ama xafiiska Hay'ada Dadka Waayeelka ah (AAA). Waxay kaa caawin doonaan in aad wax badan ka ogaato sida loo isticmaalo faa'iidooyinkaaga. Isku xirnaanshaha Ilaha Dadka Waaweyn iyo Naafada (ADRC) ka wac 855-673-2372 si aad u hesho lambarka telefoonka xafiiska APD ama AAA ee degaankaga.

Wac Adeega Macmiilka si aad u ogaato waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan kuwa ay yihiin faa'iidooyinka ay lacagtiisa bixiso Medicare iyo OHP (Medicaid), ama sida loo helo caawimaada helitaanka daryeel bixiye iyo sida loo helo adeegyo.

**Daryeel bixiyayaashaadu waxay biilka u diri doonaan Medicare aad leedahay iyo YCCO-gaaga.**
YCCO waxay la shaqeysaa Medicare waxayna leedahay heshiis ah in sheegashooyinka oo dhan la diri doono si aan u bixin karno.

- Daryeel bixiyahaaga sii lambarkaaga Aqoonsiga OHP oo u sheeg in ay caymiskaaga daboolayso YCCO. Haddii uu weli yiraahdo lacag baa lagugu leeyahay, Adeega Macmiilka ka wac 855-722-8205 (TTY 711). Waan ku caawin karnaa.
- Wax ka ogow waqtiyada gaarka ah ee daryeel bixiye uu kuu soo diri karo biil oo ku qoran bogga 80.

Xubnaha leh Medicare waqti kasta ayay beddeli karaan ama ka tegi karaan CCO ay u isticmaalaan daryeelka jirka. Si kastaba ha ahaatee, xubnaha leh Medicare waa in ay u isticmaalaan CCO-ga daryeelka ilkaha iyo caafimaadka hab-dhaqanka.

# Beddelaada CCO iyo daryeelka guuritaanka

## Waxaad xaq u leedahay in aad beddesho CCO-yada ama ka tegto CCO.

Haddii aanad lahayn CCO, OHP aad leedahay waxaa loo yaqaan Kharashka Adeega 'Fee-For-Service' ama kaarka furan. Kani waxaa loo yaqaan kharashka adeega "fee-for-service" sababta oo ah gobolka ayaa daryeel bixiyayaasha siiya kharash lacageed oo loogu talagalay daryeel kasta oo ay bixiyaan. Xubnaha ka tirsan kharashka adeega 'fee-for-service' waxay helaan noocyo la mid ah faa'iidooyinka jirka, ilkaha, iyo caafimaadka hab-dhaqanka sida xubnaha CCO oo kale.

CCO aad leedahay wuxuu ku xiran yahay halka aad ku nooshahay. Xeerarka ku saabsan beddelaada ama ka tegida CCO way kala duwan yihiin marka uu jiro hal CCO oo kaliya oo ka jira degaanka iyo marka ay jiraan CCO-yo badan oo ku yaala meel.

**Xubnaha leh Medicare iyo OHP (Medicaid)** waqti kasta ayay beddeli karaan ama ka tegi karaan CCO ay u isticmaalaan daryeelka jirka. Si kastaba ha ahaatee, xubnaha leh Medicare waa in ay u isticmaalaan CCO-ga daryeelka ilkaha iyo caafimaadka hab-dhaqanka.

**Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alaska ee haysta caddeynta Dhaxalka Hindida Maraykanka** ee raba in ay daryeel ka helaan meel kale. Waxay daryeel ka heli karaan xarunta Adeegyada Caafimaadka Hindida Maraykanka ah, rugta caafimaadka qabiilka/barnaamijka, ama xarunta caafimaadka ee magaalooyinka iyo kharashka adeega 'fee-for-service' ee OHP.

### Degaanada adeega laga bixiyo ee leh hal CCO oo kaliya:

Xubnaha leh hal CCO oo kaliya oo ka jira degaankooda adeega laga bixiyo waxaa dhici karta in waqti kasta laga codsado in laga saaro diiwaanka (ka baxaan) CCO oo daryeel ka helaan kharashka adeega 'fee-for-service' ee OHP mid ka mid ah sababaha soo socda "with cause":

- CCO waxay leedahay diidmada damiir ahaaneed iyo diimeed oo ku saabsan adeega aad rabto.
- Waxaad leedahay sabab caafimaad. Marka adeegyada la xiriira aan laga heli karin nidaamka dhexdiisa 'in network' oo daryeel bixiyahaaguna yiraahdo in helida si gooni ah loo helayo adeegyadu ay ka dhignaan doonaan halis aan loo baahayn. Tusaale: qaybta qalliinka dhalmada Caesarean iyo tuubada lagu xirayo dumarka 'tubal ligation' oo isku waqti ah.
- Sababa kale waxaa ka mid ah, balse aanan ku koobnayn, daryeel liita, helitaan la'aanta adeegyo caymiskooda la daboolo, ama helitaan la'aanta nidaamka daryeel bixiyayaasha oo khibrad u leh baahiyahaaga daryeelka caafimaad ee gaarka ah.
- Adeegyada oo aan lagu bixin luqad aad doorbidayso.
- Adeegyada oo aan lagu bixin hab dhaqan ahaan ku habboon; ama
- Adiga oo halis ugu jira jiritaan la'aanta daryeel joogto.

Haddii aad u guurto goob aanu u adeegin barnaamijkaaga CCO aad leedahay, waad beddelan kartaa qorshaha isla marka aad guuridaada u sheegto OHP. Fadlan OHP ka wac 800-699-9075 ama isticmaal koontadaada dhanka internet-ka ee ONE.Oregon.gov.

## Degaanka adeega laga bixiyo oo leh wax ka badan hal CCO:

Xubnaha leh wax ka badan hal CCO oo ka jira degaankooda adeega laga bixiyo waxay waqti kasta codsan karaan in ay ka baxaan ama u beddeshaan CCO kale mid ka mid ah kuwa soo sababaha soo socda "with cause":

- Waxaad ka guurtay degaanka adeega laga bixiyo.
  - Haddii aad u guurto goob aanu u adeegin barnaamijkaaga CCO aad leedahay, waad beddelan kartaa qorshaha isla marka aad guuridaada u sheegto OHP. Fadlan OHP ka wac 800-699-9075 ama isticmaal koontadaada dhanka internet-ka ee ONE.Oregon.gov.
- CCO waxay leedahay diidmada damiir ahaaneed iyo diimeed oo ku saabsan adeega aad rabto.
- Waxaad leedahay sabab caafimaad. Marka adeegyada la xiriira aan laga heli karin nidaamka dhexdiisa 'in network' oo daryeel bixiyahaaguna yiraahdo in helida si gooni ah loo helayo adeegyadu ay ka dhignaan doonaan halis aan loo baahayn. Tusaale: qaybta qalliinka dhalmada Caesarean iyo tuubada lagu xirayo dumarka 'tubal ligation' oo isku waqti ah.
- Sababa kale oo ay ka mid yihiin, balse aanan ku koobnayn, daryeel liita, helitaan la'aanta adeegyo caymiskooda la daboolo, ama helitaan la'aanta nidaamka daryeel bixiyayaasha oo khibrad u leh baahiyahaaga daryeelka caafimaad ee gaarka ah.
- Adeegyada oo aan lagu bixin luqad aad doorbidayso.
- Adeegyada oo aan lagu bixin hab dhaqan ahaan ku habboon; ama
- Adiga oo halis ugu jira jiritaan la'aanta daryeel joogto.

**Xubnaha leh wax ka badan hal CCO oo ka jira degaankooda adeega laga bixiyo waxay sidoo kale waqti kasta codsan karaan in ay ka baxaan ama u beddeshaan CCO kale mid ka mid ah sababaha soo socda "with cause":**

- Muddo 30 maalmood gudahood ah ee diiwaangelinta haddii:
    - Aadan rabin qorshe aad ka diiwaan gashanayd, ama
    - Aad codsatay qorshe gaar ah oo gobolkuna ku geliyay mid gooni ah.
- 90-ka maalmood ee u horreeya ka dib marka aad ku soo biirto OHP ama
    - Haddii gobolku kuu soo diro warqada caymiska "coverage" oo sheegaysa in aad qayb ka tahay CCO ka dib taariikhdaada bilowga, markaa waxaad haysataa 90 maalmood taariikhda warqadaasi ka dib.
- Ka dib markii aad la joogtay CCO isku mid ah muddo 6 bilood ah.
- Marka aad dib u cusboonaysiiso OHP aad leedahay.
- Haddii aad lumiso OHP in ka yar 2 bilood, oo dib iskugu diiwaan geliso CCO, oo aad seegtay fursadaadii aad ku dooran lahayd CCO marka aad dib u cusbooneysiin lahayd OHP aad leedahay.
- Marka CCO laga joojiyo in lagu daro xubno cusub.
- Ugu yaraan hal mar 12 bilood ee kasta haddii kala doorashooyinka kor ku xusan aysan khuseyn.

Waxaad kala doorashooyinkan ku weydiin kartaa telefoon ahaan ama qoraal ahaan. Fadlan Adeega Macmiilka OHP ka wac 800-273-0557 ama email u dir Oregon.Benefits@odhsoha.oregon.gov.

## Sida loo beddelo ama looga tego CCO-gaaga

**Waxyaabaha kale ee la tixgeliyo:** YCCO waxay rabtaa in ay xaqiijiso in aad hesho daryeelka ugu wanaagsan. YCCO waxay ku siin kartaa adeegyada qaarkood oo FFS ama kaarka furan uusan ku siin karin. Marka aad dhibaato ku qabto helida daryeelka saxda ah, fadlan na tijaabi in aan ku caawin karno iyo inkale ka hor inta aadan ka tegin YCCO.

Haddii aad weli rabto in aad ka tegto, waa in uu jiraa CCO kale oo laga heli karo degaankaaga adeega laga bixiyo si aad beddesho qorshahaaga.

**U sheeg OHP haddii aad rabto in aad beddesho ama ka tegto CCO-gaaga.** Adiga iyo/ama wakiilkaaga ayaa Adeega Macmiilka OHP ka wici kara 800-699-9075 ama Adeega Macmiilka OHP 800-273-0557 (TTY 711) laga bilaabo Isniinta ilaa Jimcaha, 8 subaxnimo ilaa 5 galabnimo. PT. Waxaad koontadaada dhanka internet-ka ka isticmaali kartaa ONE.Oregon.gov ama email u dir OHP Oregon.Benefits@odhsoha.oregon.gov.

Waxaad heli kartaa daryeel inta aad ka beddelayso CCO-gaaga. Fiiri bogga 84 si aad u ogaato waxyaabo dheeraad ah.

## YCCO waxay kaa codsan kartaa in uga baxdo sababaha qaarkood

Waxaa dhici karta in YCCO ka codsato OHA in ay kaa saarto qorshahayaga haddii aad:

- Dhibaato ku hayso, aadan wada shaqeyn lahayn, ama carqalad ku hayso shaqaalahayaga ama daryeel bixiyayaashayada aan ka ahayn hab-dhaqanka oo uu sabab u yahay baahidaada daryeelka caafimaad oo gaar ah ama naafanimo.

- Wax isdaba mariso ama falal sharci darro ah oo kale sida adiga oo qofkale u oggolaanaya inuu isticmaalo faa'iidooyinka daryeelkaaga caafimaad, beddelaada daawo la isku qoro, xatooyo, ama falal dembiyeed.
- Tahay qof rabshad leh ama ku hanjabaya dagaal.  Tani waxay noqon kartaa mid ku aadan daryeel bixiye caafimaad, shaqaalahooda, bukaanada kale, ama shaqaalaha YCCO. Marka ficil ama ku hanjabaada dagaal si halis ah u wiiqayso awooda YCCO u leedahay in adeegyo ku siiso adiga ama xubnaha kale.

Waa in aanu gobolka ka codsano (Maamulka Caafimaadka Oregon) in uu dib u eego oo oggolaado in lagaa saaro qorshahayaga.    Waxaad heli doontaa warqad haddii codsiga CCO ee in diiwaanka lagaa saaro (iska saaro) la oggolaaday.   Waxaad samayn kartaa cabasho haddii aadan ku faraxsanayn nidaamka ama haddii aanad ku raacsanayn go'aanka.  Fiiri bogga 93 sida loo sameeyo cabasho ama loo codsado rafcaan.

## YCCO ma codsan karto in ay kaa saarto qorshahayaga iyada oo sababtu tahay sababa la xiriira (balse aanan ku koobnayn):

- Xaaladaada caafimaad oo ka sii darta.
- Adiga oo aan isticmaalin adeegyada.
- Adiga oo isticmaala adeegyo badan.
- Adiga oo ku dhow in aad isticmaasho adeegyo ama lagu geliyo xarun daryeel (sida xarunta daryeelka muddada fog ama Xarunta Daaweynta Dhimirka ee La degan yahay)
- Hab-dhaqanka baahiyaha gaarka ah oo noqon kara carqalad ama wada shaqeyn la'aan.
- Dabaqadaada la dhowray, xaaladaada caafimaad ama taariikheed oo ka dhigan in ay u badan tahay in aad u baahan doonto adeegyada mustaqbalka oo badan ama adeegyada mustaqbalka oo qaali ah.
- Xaaladaada jireed, maskaxeed, korriin ama naafanimada maskaxda.
- Adiga oo ku jira haysashada ODHS Child Welfare.
- Adiga oo sameeya cabasho, ku raacsayn go'aanka, codsada rafcaan ama dacwad dhageysi.
- Adiga oo gaaray go'aan ku saabsan daryeelkaaga ay YCCO diidan tahay.

Wixii macluumaad dheeraad ah ama su'aalo ah ee ku saabsan sababaha kale ee lagaaga saari karo diiwaanka 'disenrolled', iska reebida diiwaan gelinta ku meel gaarka ah ama iska reebida diiwaan gelinta, YCCO ka wac 855-722-8205 ama Adeega Macmiilka OHP 800-273-0557.

Waxaad heli doontaa warqad ay la socoto xuquuqdaada diiwaan iska saarida 'disenrollment' ku heli doontaa ugu yaraan 60 maalmood ka hor inta aadan u baahan in aad dib u cusbooneysiiso OHP aad leedahay.

# Daryeelka inta aad beddelayso ama ka baxayso CCO

Xubnaha qaarkood ee beddesha waxaa dhici karta in ay weli helaan adeegyo isku mid ah, caymiska daawooyinka la isku qoro oo arkaan daryeel bixiyayaal isku mid ah xataa haddii uusan

ahayn daryeel bixiye aan ahayn qorshe caafimaad ‘in-network’. Taasi macnaheedu waa in daryeelka la isku diwida doono marka aad beddelayso CCO-yada ama ka wareegayso kharashka adeega ‘fee-for-service’ ee OHP oo u soo wareegayso CCO. Tani waxaa mararka qaarkood loo yaqaan “Transition of Care.”

Haddii aad qabto dhibaatooyin caafimaadka oo halis ah, u baahan tahay daryeelka isbitaalka ama daryeelka caafimaadka dhimirka ee bukaan-jiifka, qorshayaashaada cusub iyo kuwii hore waa in ay ka wada shaqeeyaan sidii loo xaqiijin lahaa in aad hesho daryeelka iyo adeegyada aad u baahan tahay.

## Marka aad u baahan tahay daryeelka isku mid ah inta la beddelayo qorshayaasha

Caawimaadani waxaa loogu talagalay marka aad qabto dhibaatooyin caafimaadka oo halis ah, u baahan tahay daryeelka isbitaalka, ama daryeelka caafimaadka dhimirka ee bukaan-jiifka. Halkan waxaa ku qoran tusaalooyinka qaarkood marka aad heli karto caawimaadani:

- Daryeelka xanuunka kelyaha ee marxaladii u dambeysay ku jira.
- Aad tahay ilme caafimaad ahaan nugul.
- Aad helayso barnaamijka daaweynta kansarka naasaha iyo/ama makaanka ee xubnaha.
- Aad helayso Caawimaada Daryeelka iyada oo sababtu tahay HIV/AIDS.
- Daryeelka beddelka xubnaha jirka ka hor ama beddelka xubnaha jirka ka dib.
- Aad uur leedahay ama hadda uun ilmo yeelatay.
- Aad helayso daaweynka kansarka.
- Xubin kasta oo haddii uusan helin adeegyo sii socda ay dhici karto in uu la kulmo waxyeello halis ah oo soo gaarta caafimaadkiisa ama halis ugu jiro in uu u baahdo daryeelka isbitaalka ama meelaha la isku hayo ‘institution’.

## Waqtiga loo qabtay in daryeelkani socdo waa:

| Nooca Xubinimada | Inta ay le’eg tahay muddada aad qaadan karto daryeel isku midka ah |
|---|---|
| OHP leh Medicare (U qalma Faa’iidada Buuxda ee Labada ah) | 90 maalmood |
| OHP kaliya | 30 maalmood oo loogu talagalay caafimaadka jirka iyo afka*<br>60 maalmood oo loogu talagalay caafimaadka hab-dhaqanka* |

*Ama ilaa daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah (PCP) ee cusub dib u eego qorshahaaga daaweyn.

Haddii aad ka tegayso YCCO, waxaanu la shaqeyn doonaa CCO-gaaga cusub ama OHP si loo xaqiijiyo in aad heli karto adeegyadan isku midka ah ee hoos ku qoran.

Haddii aad u baahato daryeel inta aad ka beddelayso qorshayaasha ama qabto su’aalo, fadlan Adeega Macmiilka YCCO ka wac: 855-722-8205 (Dadka isticmaala, wac 711) Saacadaha: Isniinta ilaa Jicmaha, 8:00 subaxnimo ilaa 5:00 galabnimo. PST

### YCCO waxay xaqiijin doontaa in xubnaha u baahan daryeelka isku mid ah inta la beddelayo qorshayaasha helaan:

- Helitaan joogto ah oo la xiriira daryeelka iyo gaadiid u raacida daryeelka.
- Adeegyo ka socda daryeel bixiyahooda xataa haddii uusan ahayn nidaamka YCCO ilaa mid ka mid ah kuwani ka dhacayo:
  - Laga dhammeytirayo koorsada isku daaweynta daawada la isku qoro ee ugu yar ama la ansixiyay, ama
  - Daryeel bixiyahaaga oo go’aansada in daaweyntaada aan hadda ka dib loo baahnayn. Haddii uu daryeelku yahay mid uu sameeyo qof takhasus leh, qorshaha daaweynta waxaa dib u eegi doona daryeel bixiye u qalma.
- Noocyada qaarkood ee daryeelku way sii socon doonaan ilaa laga dhammeystirayo daryeel bixiyaha hadda. Noocyadan daryeel waa:
  - Daryeelka ka hor iyo ka dib marka aad uurka leedahay/ilmo dhasho (dhalashada ilmaha ka hor iyo dhalmada ka dib).
  - Adeegyada beddelka xubnaha jirka ilaa laga gaarayo sanadka u horreeya ee beddelka xubnaha jirka ka dib.
  - Isku daaweynta shucaaca ama chemotherapy (daaweynta kansarka) oo loogu talagalay koorsadooda daaweynta.
  - Daawooyinka leh koorsada ugu yar ee daaweynta oo la qeexay oo ka badan waqtiga loo qabtay isbeddelka daryeelka ee kor ku qoran.

Waxaad heli kartaa nuqulka Siyaasada Isbeddelka Daryeelka ee YCCO adiga oo Adeega Macmiilka ka waca 855-722-8205. Wuxuu sidoo kale ku jiraa websit-kayaga ee bogga dokumentiyada iyo foomamka ee ka tirsan qaybta siyaasadaha xubnaha oo laga helo https://yamhillcco.org/members/documents-and-forms/. Fadlan wac Adeega Macmiilka haddii aad hayso su’aalo.

# Go’aanada soo afjarida nolosha

## Dardaaranka caafimaadka

Dhammaan dadka waaweyni waxay xaq u leeyihiin in ay gaaraan go’aano ku saabsan daryeelkooda. Tani waxaa ka mid ah xuquuqda ah in la oggolaado ama la diido daaweynta. Jiro ama dhaawac ayay dhici kartaa in ay kaa ilaaliyaan in aad dhakhtarkaaga, xubnaha ka tirsan qoyskaaga ama wakiilkaaga u sheegto daryeelka aad rabto in aad hesho. Sharciga Oregon ayaa kuu oggolaanaya in aad hore u sii sheegto rabitaankaaga, waxyaabaha aad aaminsan tahay, iyo hadafkaaga, ka hor inta aadan u baahan daryeelka noocaasi ah. Foomka aad isticmaasho

waxaa loo yaqaan **'advance directive'**.

Waxaad heli kartaa nuqulka Siyaasada Dardaaranka Caafimaadka ee YCCO adiga oo Adeega Macmiilka ka waca 855-722-8205. Wuxuu sidoo kale ku jiraa websit-kayaga ee bogga dokumentiyada iyo foomamka ee ka tirsan qaybta siyaasadaha xubnaha oo laga helo https://yamhillcco.org/members/documents-and-forms/.

Dardaaranka caafimaadku 'advance directive' wuxuu kuu oggolaanayaa in:

- Wadaagto qiyamkaaga, waxyaabaha aad aaminsan tahay, hadafkaaga iyo rabitaankaaga ee loogu talagalay daryeelka caafimaadka haddii aad awoodi waydo in aad naftaada u muujiso iyaga.
- In aad magacawdo qof si uu gaaro go'aanada daryeelka caafimaadkaaga haddii aadan adigu u gaari karin naftaada. Qofkani waxaa loo yaqaan wakiilkaaga daryeelka caafimaad, waa in uu ku dhaqmaa doorkan.
- Xuquuqda lagu wadaagayo, diidayo ama lagu aqbalayo noocyada daryeelka caafimaadka iyo xuquuqda lagu wadaagayo go'aanadaada ku saabsan daryeelkaaga caafimaad mustaqbalka.

## Sida loo helo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Dardaaranka Caafimaadka

YCCO waxay sidoo kale bixisaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dardaaranka caafimaadka oo ku jira website-kayaga halkan https://yamhillcco.org/members/benefits-and-rights/.

Tilmaamaha Isticmaalaha Dardaaranka Caafimaadka ayaa la heli karaa. Waxay bixisaa macluumaad ku saabsan:

- Sababta loogu talagalay Dardaaranka Caafimaadka.
- Qaybaha ku jira foomka Dardaaranka Caafimaadka.
- Sida loo buuxiyo ama loo helo caawimaada buuxinta Dardaaranka Caafimaadka.
- Cidda ay tahay in la siiyo nuqulka Dardaaranka Caafimaadka.
- Sida isbeddelo loogu sameeyo Dardaaranka Caafimaadka.

Si loo soo dejiyo nuqulka Tilmaamaha Isticmaalaha Dardaaranka Caafimaadka ama foomka Dardaraanka Caafimaadka, fadlan booqo: https://www.oregon.gov/oha/ph/about/pages/adac-forms.aspx

## Macluumaad kale oo waxtar leh oo ku saabsan Dardaraanka Caafimaadka

- Buuxinta dardaaranka caafimaadku waa ikhtiyaar aad adigu leedahay. Haddii aad doorato in aadan buuxin isla markaana saxiixin dardaaranka caafimaadka, caymiskaaga caafimaad ama helidaada daryeelku sidoodii hore ayuu ahaanayaa.
- Si kale kuula dhaqmi mayso YCCO haddii aad go'aansato in aadan buuxin oo aadan saxiixin dardaaranka caafimaadka.

- Haddii aad buuxiso dardaaranka caafimaadka xaqiiji in aad iyada kala hadasho qoyskaaga iyo daryeel bixiyahaaga oo siiso nuqulo.
- YCCO way ixtiraami doontaa kala doorasho kasta oo aad ku qortay Dardaarankaaga Caafimaadka ee aad buuxisay ee saxiixday. Haddii dhakhtar aad la shaqeyso diidmo dhanka damiirka ah ka qabo ixtiraamka Dardaarankaaga Caafimaad, fadlan Adeega Macmiilka YCCO kala xiriir 855-722-8205 TTY 711). Adeega Macmiilka ayaa kaa caawin karta in aad hesho daryeel bixiye kale oo kugu habboon.

## Sida loo soo sheego haddii YCCO aanu raacin shuruudaha dardaaranka caafimaad

Waxaad cabasho u gudbin kartaa Xafiiska Ruqsad Bixinta Caafimaadka haddii daryeel bixiyahaagu uusan sameyn waxa aad ku codsato dardaarankaaga caafimaad.

**Xafiiska Ruqsad Bixinta Caafimaadka**
503-370-9216 (Dadka isticmaala TTY, fadlan wac 711)
Saacadaha: Isniinta ilaa Jimcaha, 8 subaxnimo ilaa 5 galabnimo. PT
Cabashada boosta ugu dir:
1430 Tandem Ave NE, Suite 180
Salem, OR 97301
Email-ka: hlo.info@odhsoha.oregon.gov

Dhanka Internet-ka: https://www.oregon.gov/oha/PH/HLO/Pages/File-Complaint.aspx

Waxaad cabasho u gudbin kartaa Xafiiska Ruqsad Bixinta Caafimaadka iyo Barnaamijka Shahaadada Aqoonsiga haddii xarunta (sida isbitaalku) uusan sameyn waxa aad ku codsato dardaarankaaga caafimaad.

**Health Facility Licensing and Certification Program**
Boosta ugu dir: 800 NE Oregon Street, Suite 465
Portland, OR 97322
Email-ka: mailbox.hclc@odhsoha.oregon.gov
Fax: 971-673-0556
Dhanka Internet-ka:
https://www.oregon.gov/oha/PH/PROVIDERPARTNERRESOURCES/HEALTHCAREPROVIDERSFACILITIES/HEALTHCAREHEALTHCAREREGULATIONQUALITYIMPROVEMENT/Pages/complaint.aspx

Adeega Macmiilka YCCO ka wac 855-722-8205 (TTY 711) si aad u nuqulka warqada ee foomka cabashada ee aad rabto.

## Sida Loo Joojiyo Dardaaran Caafimaad

Si aad u joojiso, codso in lagu soo celiyo nuqulada dardaarankaaga caafimaad si uu daryeel bixiyahaagu u ogaado in aanay shaqeynayn. Jeex jeex ku ama ku qor WAA LA JOOJIYAY xarfo waaweyn, saxiix oo taariikhdana ku qor iyaga. Wixii su'aalo ah ama macluumaad dheeraad ah Go'aanada Caafimaadka Oregon kala xiriir 800-422-4805 ama 503-692-0894 (TTY 711).

# Waa maxay farqiga u dhexeeya POLST iyo dardaaranka waalidka?

**Amarka La qaadan karo ee Daaweynta Taageerada Nolosha (POLST)**

POLST waa foom caafimaad oo aad isticmaali karto si aad u xaqiijiso in rabitaankaaga daaweynta ee ku dhow soo afjarida nolosha ay raacaan bixiyayaasha caafimaadku. Marnaba lagaagama baahna in aad buuxiso POLST, laakiin haddii aad qabto jirooyin ama sababo kale oo aadan u rabin dhammaan noocyada daaweynta caafimaad, waxaad ogaan kartaa waxyaabo dheeraad oo ku saabsan foomkan. POLST wuu ka duwan yahay Dardaaranka Caafimaadka:

| | Dardaaranka Caafimaadka | POLST |
|---|---|---|
| Muxuu yahay? | Dokumenti sharci ah | Dalab caafimaad |
| Yay tahay in ay helaan? | Dhammaan dadka waaweyn ee da'doodu ka weyn tahay 18 jir | Dadka qaba jiro halis ah ama da'doodu weyn tahay ee jilicsan ayay dhici kartaa in aysan rabin dhammaan daaweynta |
| Miyuu adeeg bixiyahaygu u baahan yahay oggolaansho/saxiix? | Uma baahna oggolaansho daryeel bixiye | Wuxuu u baahan yahay in uu saxiixo oo uu ansixiyo daryeel bixiye caafimaad |
| Goorma ayaa la isticmaalaa? | Daryeelka mustaqbalka ama xaalada | Daryeelka hadda jira iyo xaalada |

Si aad u ogaato waxyaabo dheeraad ah, booqo: **https://oregonpolst.org/**

Email u dir: polst@ohsu.edu ama Oregon POLST ka wac 503-494-3965.

# Ku dhawaaqida Daaweynta Caafimaadka Dhimirka

Oregon waxay leedahay foom aad ku qorto rabitaankaaga daryeelka caafimaadka dhimirka. Foomkan waxaa loo yaqaan Ku dhawaaqida Daaweynta Caafimaadka Dhimirka. Foomkan waxaa loogu talagalay marka aad qabto dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka oo aad gaari kari weydo go'aano ku saabsan daaweyntaada caafimaadka dhimirka. Waxaad haysataa ikhtiyaar aad ku buuxiso foomkan, marka aan lagu jirin dhibaato, oo wax fahmi karto oo go'aano ka gaari karto daryeelkaaga.

## Muxuu foomkani ii qaban karaa?

Foomku wuxuu sheegayaa waxa uu yahay nooca daryeel ee aad rabto haddii aad marnaba awoodi weydo in aad iskaa go'aano u gaarto. Kaliya maxkamad ama laba dhakhtar ayaa go'aan ka gaari kara haddii aad awoodi waydo in aad go'aano ka gaarto caafimaadkaada dhimirka.

Foomkani wuxuu kuu oggolaanayaa in aad sameyso kala doorashooyin ku saabsan noocyada daryeelka aad rabto iyo kuwa aadan rabin.   Waxaa la isticmaali karaa magaca qof wayn si uu go’aano uga gaaro daryeelkaaga.   Qofka aad magacawday waa in uu oggolaadaa in uu adiga kuu hadlo oo raacaa rabitaankaaga.  Haddii rabitaankaagu uusan qoraal ahayn, qofkan ayaa go’aan ka gaari doona waxa aad rabto.

Foomka ku dhawaaqidu wuxuu kaliya soconayaa ilaa 3 sano.  Haddii aad awoodi waydo in aad go’aan ku gaarto inta lagu jiro 3-dan sano, foomkaagu wuu dhaqan geli doonaa.  Waxay noqon doontaa mid dhaqan gal ah ilaa iyo inta aad mar kale gaari karayso go’aano.  Waad joojin kartaa ku dhawaaqidaada marka aad sameyn karto kala doorasho ku saabsan daryeelkaaga.  Waa in aad foomkaaga siisaa PCP-gaaga ama qofka aad u magacawday labadoodaba si ay adiga ga’aano kuugu gaaraan

Si aad waxyaabo dheeraad ah uga ogaato Ku dhawaaqida Daaweynta Caafimaadka Dhimirka, website-ka Gobolka Oregon ka booqo https://aix-xweb1p.state.or.us/es_xweb/DHSforms/Served/le9550.pdf

Haddii daryeel bixiyahaagu aanu raacin rabitaankaaga ku qoran foomkaaga, waad caban kartaa. Foom loogu talagalay kani ayaa laga helayaa www.healthoregon.org/hcrqi. Cabashadaada u soo dir:

**Health Care Regulation and Quality Improvement**
800 N.E. Oregon St., #465
Portland, OR 97232
Email-ka: Mailbox.HCLC@odhsoha.oregon.gov
Telefoonka: 971-673-0540 (TTY: 971-673-0372)
Fax-ka: 971-673-0556

# Soo sheegida Musuqmaasuqa, Hanti luminta, iyo Ku tagri falida

Waxaan nahay qorshaha caafimaadka bulshada, waxaanan rabnaa in aanu xaqiijino in daryeelka caafimaadka lagu kharash gareeyo sidii xubnaheenu looga caawin lahaa in ay noqdaan kuwo caafimaad qaba oo fayow. Waxaan u baahanahay caawimaadaada si aan taasi u sameyno.

Haddii aad u maleynayso in musuqmaasuq, hanti lumin ama ku tagri falid dhacday u soo sheeg sida ugu dhakhsaha badan.  Waxaad u soo sheegi kartaa si aan magac la socon.  Sharciga macluumaad bixiyuhu ‘whistleblower’ wuxuu ilaaliyaa dadka soo sheega musuqmaasuqa, hanti luminta, iyo ku tagri falida. Ma lumin doontid caymiskaaga haddii aad sameyso wax soo sheegid. Waa mid sharci darro ah in la dhibaateeyo, loo hanjabo, ama la takooro qof soo sheega musuqmaasuq, hanti lumin ama ku tagri falid.

## Musuqmaasuqa Medicaid wuxuu ka soo horjeedaa sharciga iyada oo ay YCCO tani u qaadato si dhab ah.

### Tusaalooyinka qaarkood ee musuqmaasuqa, hanti luminta iyo ku tagri falidu waa:

- Daryeel bixiye kugu soo dalacaya lacagta adeegyo ay daboosho YCCO
- Daryeel bixiye diraya biilka adeegyo aadan helin
- Daryeel bixiye ku siinaya adeeg aadan u baahnayn iyada oo lagu saleynayo xaaladaada caafimaad

### Tusaalooyinka qaarkood ee musuqmaasuqa, hanti luminta iyo ku tagri falida uu sameeyo xubintu waa:

- In loo tago dhakhaatiir badan si la iskugu qoro daawooyin loogu talagalay daawo horeba laguugu qoray
- Qof isticmaalaya Aqoonsiga qof kale leeyahay si uu u helo faa’iidooyin

**YCCO waxaa ka go’an ka hortagga musuqmaasuqa, hanti luminta, iyo ku tagri falida. Waxaan raaci doonaa dhammaan sharciyada la xiriira, oo ay ku jiraan Xeerka Sheegashada Beenta ah ee Gobolka iyo Xeerka Sheegashada Beenta ah ee Federaalka.**

## Sida loo sameeyo soo sheegida musuqmaasuqa, hanti luminta, iyo ku tagri falida.

Waxaad u sameyn kartaa soo sheegida musuqmaasuqa, hanti luminta, iyo ku tagri falida siyaabo dhowr ah:

Wac, fax u dir, ka gudbi dhanka internet-ka ama si toos ah ugu qor YCCO. **Waxaan dhammaan musuqmaasuqa la tuhunsan yahay, hanti luminta, iyo ku tagri falida ay ku kacaan daryeel bixiyayaasha ama xubnaha u soo sheegnaa hay’adaha gobolka ee hoos ku qoran.**

Soo wac khadkayaga: 844-989-2845
Fax-ka: 503-857-0767
Warbixin ka gudbi dhanka internet-ka ee http://yamhillcco.ethicspoint.com/ ama
U qor **Yamhill Community Care**
C/O Compliance Officer
807 NE Third St
McMinnville, OR 97128

**AMA**

Musuqmaasuqa, hanti luminta, iyo ku tagri falida qofka Xubinta ah u soo sheeg adiga oo soo wacaya, fax diraya ama u qoraya:

**ODHS Fraud Investigation Unit**
P.O. Box 14150
Salem, OR 97309
Dhanka internet-ka: https://www.oregon.gov/dhs/abuse/Pages/fraud-reporting.aspx
Khadka: 1-888-FRAUD01 (888-372-8301)
Fax-ka: 503-373-1525 Attn: Khadka

AMA (u gaar ah daryeel bixiyayaasha)

**OHA Office of Program Integrity**
500 Summer St. NE E-36 Salem, OR 97301
Email-ka: opi.referrals@oha.oregon.gov
Khadka: 1-888-FRAUD01 (888-372-8301)
Website-ka: https://www.oregon.gov/oha/FOD/PIAU/Pages/Report-Fraud.aspx

AMA

**Medicaid Fraud Control Unit (MFCU)**
Oregon Department of Justice
100 SW Market Street
Portland, OR 97201
Khadka: 971-673-1880
E-mail-ka: Medicaid.Fraud.Referral@doj.state.or.us
Dhanka internet-ka: https://www.doj.state.or.us/consumer-protection/sales-scams-fraud/medicaid-fraud/
Fax-ka: 971-673-1890

### Si aad musuqmaasuq uga soo sheegto dhanka internet-ka:

https://www.oregon.gov/dhs/abuse/Pages/fraud-reporting.aspx

## Cabashooyinka, Tabashooyinka, Rafcaanada iyo Dacwad Dhageysiga Caddaalada ah

YCCO waxay xaqiijisaa in dhammaan xubnuhu heli karaan nidaamka tabashada (cabashooyinka, tabashooyinka, rafcaanada iyo dacwad dhageysiga). Waxaan isku daynaa in aan u fududeyno xubnaha in ay gudbiyaan cabasho, tabasho, ama rafcaan iyo in ay helaan macluumaad ku saabsan sida looga gudbiyo dacwad dhageysi lala leeyahay Maamulka Caafimaadka Oregon.

Nala soo socodsii haddii aad caawimaad uga baahan yahay qayb ka mid ah cabashada, tabashada, rafcaanka, iyo/ama nidaamka dacwad dhageysiga. Waxaan sidoo kale ku siinaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sidaan wax uga qabano cabashooyinka/tabashooyinka iyo rafcaanada. Nuqulada tusaalooyinka ogeysiintayada ayaa sidoo kale la helayaa. Haddii aad u baahan tahay caawimaad ama aad jeclaan lahayd macluumaad dheeraad oo ka baxsan waxa ku jira buug-gacmeedka, nagala soo xiriir:

- Telefoonka: 833-257-2192
- Fax-ka: 503-765-9675
- Boosta: Yamhill Community Care
  Attn: Khabiirka Tabashada
  PO Box 5490
  Salem, OR 97304
- Email-ka: appeals@yamhillcco.org
  Waxaa dhici karta in aad yeelato macluumaad shakhsi ahaaneed oo ku jira email-kaaga. Geli “secure” saddarka mawduuca, si macluumaadkaagu u noqdo mid la ilaaliyo.

# Waxaad sameyn kartaa cabasho

- **Cabasho** waxay kula socodsiinaysaa in aadan ku qanacsanayn.
- **Khilaaf** waa marka aadan ku raacsanayn YCCO ama daryeel bixiye.
- **Tabasho** waa cabasho aad sameyn karto haddii aadan ku faraxsanayn YCCO, adeegyadaada daryeelka caafimaadka, ama daryeel bixiyahaaga.  Khilaaf wuxuu sidoo kale noqon karaa tabasho.

Si loo fududeeyo, OHP waxay erayga **cabasho** u isticmaashaa tabashooyinka iyo khilaafaadka, sidoo kale.

Waxaad xaq u leedahay in aad sameyso cabasho haddii aadan ku faraxsanay qayb ka mid ah daryeelkaaga.  Waxaan isku dayi doonaa in aan wax wanaajino.  Kaliya Adeega Macmiilka ka wac 855-722-8205, TTY 711. Haddii aad u baahan tahay caawimaad ku qoran luqaddaada, kaliya u sheeg Adeega Macmiilka.  Waxaad sidoo kale gudbin kartaa cabasho aad la leedahay OHA ama Mas'uulka Wax u dooda.   Waxaad OHA kala xiriiri kartaa 1-800-273-0557 ama Mas'uulka Wax u dooda 1-877-642-0450.

ama

U qor:

Yamhill Community Care
Attn: Khabiirka Tabashada
PO Box 5490
Salem, OR 97304
Email-ka: complaints@yamhillcco.org
Waxaa dhici karta in aad foomka cabashada ka hesho
https://yamhillcco.org/members/documents-and-forms/

Waxaad gudbin kartaa cabasho ku saabsan arrin kasta oo aan ka ahayn diidmada adeega ama faa'iidooyinka waqti kasta kaasi oo ah dhanka afka ah ama qoraal ahaan ah.  Haddii aad cabasho u gudbiso OHA, waxaa loo sii gudbin doonaa YCCO.

## Tusaalooyinka sababaha aad u gudbin karo cabasho ayaa ah:

- Dhibaatooyinka sameynta ballamaha ama helitaanka gaadiid raacida
- Dhibaatooyinka helitaanka adeeg bixiye u dhow halka aad ku nooshahay
- In aan la dareemin ixtiraam ama wax fahmeen daryeel bixiyayaasha, shaqaalaha daryeelka bixiyaha, darawaliinta, ama YCCO
- Daryeel aadan hubin, laakiin aad heshay si kastaba ha ahaatee
- Biilasha loogu talagalay adeegyo aadan oggolaan in aad lacagtooda bixiso
- Khilaafaan ku saabsan soo jeedinta muddo kordhinta YCCO si loo sameeyo go'aano wax oggolaansho
- Badbaadada darawalka ama baabuurka
- Tayada adeega aad heshay

Wakiil ama daryeel bixiyahaaga ayaa sameyn kara (gudbin kara) cabasho isaga oo kaa wakiil ah, oo haysta oggolaanshahaaga oo qoraal ah si uu sidaasi u sameeyo.

Waan eegi doonaa cabashadaada oo kula soo socodsiin doonaa waxa la qaban karo sida ugu dhakhsaha badan ee uu caafimaadkaagu u baahan yahay. Tani waxaa lagu sameyn doonaa muddo 5 maalmo shaqo gudahood ah laga bilaabo maalinta aan helnay cabashadaada.

Haddii aanu u baahanahay waqti dheeraad ah, waxaanu warqad kuugu soo diri doonaa muddo 5 maalmo shaqo gudahood ah.  Waxaan kuu sheegi doonaa sababta aanu ugu baahanahay waqti dheeraad ah.  Waxaan kaliya codsan doonaa waqti dheeraad ah haddii uu yahay mid adiga kuu dan ah.  Warqadaha oo dhan waxaa lagu qori doonaa luqadda aad doorbidayso. Waxaanu warqad kuugu soo diri doonaa muddo 30 maalmood gudahood ah marka aan helo cabashada oo sharraxaysa sida aan wax u maareyn doono iyada.

Haddii aadan ku faraxsanayn sida aan wax uga qabanay cabashadaada, taasi waxaad la wadaagi kartaa Qaybta Adeega Macmiilka ee OHP oo laga helo 1-800-273-0557 ama fadlan la xiriir Barnaamijka Mas'uulka Wax u dooda ee OHA. Ombuds waxa wax u doodayaal u dooda xubnaha ka tirsan OHP waxayna sameyn doonaan intii karaankooda ah si ay kuu caawiyaan. Fadlan email u dir OHA.OmbudsOffice@odhsoha.oregon.gov ama farriin ku dhaaf 877-642-0450.

Ilo kale oo loogu talagalay taageerooyinka iyo adeegyada ka jira bulshadaadu waa 211 Info. Wac 2-1-1 ama booqo website-ka www.211info.org wixii caawimaad ah.

## YCCO, qandaraaslayaasheeda, qandaraaslayaasheeda hoose, iyo daryeel bixiyayaasha ka qayb qaadanaya ma:

- Joojin karaan qof xubin ah oo kama joojin karaan isticmaalka qayb kasta oo ka mid ah nidaamka cabashada iyo rafcaanka ama ma qaadi karaan tallaabo ciqaab leh oo ka dhanka daryeel bixiye codsada natiijo la soo dedejiyay ama taageera rafcaanka xubinta.
- Dhiirigelin karaan ka noqoshada cabashada, rafcaanka, ama dacwad dhageysiga hore loo gudbiyay; ama ma
- Isticmaali karaan gudbinta ama natiijada cabashada, rafcaanka, ama dacwad dhageysiga sabab la xiriirta falcelin ka dhan ah xubinta ama in la codsado ka saarida 'disenrollment' xubinta.

# Waxaad naga codsan kartaa in aan beddelno go'aan aan qaadanay.  Tani waxaa loo yaqaan rafcaan.

Waad wici kartaa, u qori kartaa, oo buuxin kartaa foom sharraxaya sababta ay tahay in qorshuhu u beddelo go'aankiisa ku saabsan adeega.

Haddii aan diidno, joojino, ama yareyno adeega caafimaadka, ilkaha, ama hab-dhaqanka caafimaadka, waxaanu kuu soo diri doonaa warqad diidmo ah oo wax kaaga sheegaysa go'aankayaga.  Warqadan diidmada waxaa sidoo kale loo yaqaanaa Ogaysiinta Go'aaminta

Gargaarka Aan Wanaagsanayn (NOABD). Waxaanu sidoo kale daryeel bixiyahaaga la soo socodsiin doonaa go'aankayaga.

**Haddii aadan ku raacsanayn go'aankayaga, waxaad xaq u leedahay in aad naga codsato in aan beddelno iyada.** Tani waxaa loo yaqaan rafcaan sababta oo ah waxaad rafcaan ka qaadanaysaa go'aankayaga.

## Kuma raacsanid miyaa go'aankayaga?

**1 — Codso rafcaan**
Waa in aad ku codsataa muddo 60 maalmood gudahood ah ee taariikhda

**2 — Sug jawaabtayada**
Waxaanu haysanaa 16 maalmood si aan u soo jawaabno. Ma u baahan tahay jawaab degdeg ah? Codso

**3 — Akhri go'aankayaga**
Weli kuma raacsanid miyaa? Waxaad gobolka ka codsan kartaa in uu dib u

**4 — Codso dacwad dhageysi**
Waa in aad ku codsataa muddo 120 maalmood gudahood ah laga bilaabo taariikhda warqada go'aanka

| Ogow waxyaabo dheeraad oo ku saabsan tallaabooyinka lagu codsado rafcaan ama dacwad dhageysi | |
|---|---|
| **Tallaabada 1** | **Codso rafcaan.**<br>Waa in aad ku codsataa muddo 60 maalmood gudahood ah laga bilaabo taariikhda warqada diidmada (NOABD). |

| | |
|---|---|
| | Naga soo wac 833-257-2192 (TTY 711) ama isticmaal foomka Codsiga in Dib u eegid Lagu sameeyo Go'aanka Daryeelka Caafimaad. Foomkani waxaa lala soo diri doonaa warqada diidmada. Waxaad sidoo kale ka heli kartaa https://bit.ly/request2review.<br><br>Waxaad foomka boosta ama codsi qoraal ugu soo diri kartaa:<br>Yamhill Community Care Grievance Specialist<br>PO Box 5490<br>Salem, OR 971304<br><br>Waxaad sidoo kale foomka fax ama codsi qoraal ah ugu soo diri kartaa 503-765-9675.<br><br>**Ayaa codsan kara rafcaan?**<br>Adiga ama qof haysta oggolaansho qoraal ah si uu kuugu hadlo. Kaasi wuxuu noqon karaa dhakhtarkaaga ama wakiil la oggol yahay. |
| **Tallaabada 2** | **Sug jawaabtayada.**<br>Marka aan helno codsigaaga, waxaan eegi doonaa go'aankii rasmiga ahaa. Dhakhtar cusub ayaa eegi doona diiwaankaaga caafimaad iyo codsiga adeega si loo ogaado haddii aynaan si sax ah u raacayn xeerarka. Waxaad na siin kartaa wixii macluumaad dheeraad ah ee aad is leedahay in ay naga caawin doonaan in aan dib u eegno go'aanka.<br><br>Si loo taageero rafcaankaaga, waxaad xaq u leedahay in aad:<br>• U bixiso macluumaadka iyo marqaatinimada si shakhsi ahaaneed ama qoraal ahaan.<br>• U sameyso dood sharci oo dhab ah si shakhsi ahaaneed ama qoraal ahaan.<br><br>Waa in aad waxyaabahan ku sameysaa waqtiyada loo qabtay gudahooda ee ku qoran hoosta.<br><br>**Muddo intee le'eg ayay idinku qaadanaysaa in aad dib u eegtaan rafcaankayga?**<br>Waxaanu haysanaa 16 maalmood si aan dib ugu eegno codsigaaga oo u soo jawaabno. Haddii aanu u baahanahay wakhti dheeraad ah, waxaanu kuu soo diri doona warqad. Waxaanu haysanaa ilaa 14 maalmood oo dheeraad ah oo aanu ku soo jawaabno.<br><br>**Maxaa dhacaya haddii aan u baahanahay jawaab degdeg ah?**<br>Waxaad codsan kartaa rafcaan degdeg ah. Tani waxaa sidoo kale loo yaqaanaa rafcaan la soo dedejiyay. Naga soo wac 833-257-2192 ama fax noogu soo dir foomka codsiga 503-765-9675. Foomkani waxaa lala soo diri doonaa warqada diidmada. Waxaad sidoo kale ka heli kartaa https://bit.ly/request2review. Codso rafcaan degdeg ah haddii sugitaanka |

| | |
|---|---|
| | rafcaanka caadi ah uu khatar gelin karo noloshaada, caafimaadkaaga, ama awoodda aad u leedahay in aad shaqeyso. Waanu ku soo wici doonaa waxaanan warqad kuugu soo diri doonaa, muddo 1 maalin shaqo gudaheed ah, si aan kuula socodsiino in aanu helnay codsigaagii rafcaan degdeg ah.<br><br>**Muddo intee le'eg ayuu rafcaan degdeg ah qaataa?**<br>Haddii aad hesho rafcaan degdeg ah, waxaan go'aankayaga u gaari doonaa sida ugu dhakhsaha badan ee uu caafimaadkaagu u baahan yahay, wax aan ka badnayn 72 saacadood laga bilaabo marka codsiga rafcaanka degdega ah la helay. Waanu isku dayi doonaa intii karaankayaga ah in telefoon ahaan lagula soo xiriiro adiga iyo adeeg bixiyahaaga sii aan kuula socodsiino go'aankayaga. Waxaad sidoo kale heli doontaa warqad.<br><br>Codsigaaga ama haddii aanu u baahanahay waqti dheeraad ah, waxaa dhici karta in aan kordhino waqtiyada loo qabtay ilaa 14 maalmood.<br><br>Haddii rafcaan degdeg ah la diido ama waqti dheeraad ah loo baahdo, waanu ku soo wici doonaa waxaanad ogeysiin ku heli doonaa muddo laba maalood gudahood ah. Codsiga rafcaan degdega ah oo la diiday wuxuu noqon doonaa rafcaan caadi ah waxaana loo baahan yahay in lagu xalliyo 16 maalmood ama suurtagalnimada in la kordhiyo 14 maalmood oo dheeraad ah.<br><br>Haddii aadan ku raacsayn go'aanka in la kordhiyo waqtiyada loo qabtay rafcaanka ama haddii rafcaan degdeg ah la diido, waxaad xaq u leedahay in aad gudbiso cabasho. |
| **Tallaabada 3** | **Akhri go'aankayaga**<br><br>Waxaanu kuu soo diri doonaa warqad wadata go'aankayaga rafcaanka. Go'aankan rafcaanka waxaa sidoo kale loo yaqaanaa Ogeysiinta Xallinta Rafcaanka (NOAR). Haddii aad ku raacsan tahay go'aanka, ma aha in aad wax sameyso. |
| **Tallaabada 4** | **Weli kuma raacsanid miyaa? Codso dacwad dhageysi**<br><br>Waxaad xaq u leedahay in aad gobolka ka codsato in uu dib u eego go'aanka rafcaanka. Tani waxaa loo yaqaanaa codsiga dacwad dhageysi. Waa in aad dhageysi dacwada ku codsataa muddo 120 maalmood gudahood ah laga bilaabo taariikhda warqada go'aanka rafcaanka (NOAR).<br><br>**Maxaa dhacaya haddii aan u baahanay dacwad dhageysi degdeg ah?**<br>Waxaad codsan kartaa dacwad dhageysi degdeg ah. Tani waxaa sidoo kale loo yaqaanaa dacwad dhageysi la soo dedejiyay. |

| | |
|---|---|
| | Isticmaal foomka dacwad dhageysiga dhanka internet-ka oo laga helayo https://bit.ly/ohp-hearing-form si aad u codsato dacwad dhageysi caadi ah iyo dacwad dhageysi degdeg ah.<br><br>Waxaad gobolka ka wici kartaa 800-273-0557 (TTY 711) ama isticmaal foomka codsiga ee lala soo diray warqadani. Foomka ka hel https://bit.ly/request2review. Waxaad foomka u soo diri kartaa:<br><br>OHA Medical Hearings<br>500 Summer St NE E49<br>Salem, OR 97301<br>Fax-ka: 503-945-6035<br><br>Gobolka ayaa go'aansan doona haddii aad yeelan karto dacwad dhageysi degdeg ah 2 maalin shaqo ka dib marka la helo codsigaaga.<br><br>**Ayaa codsan kara dacwad dhageysi?**<br>Adiga ama qof haysta oggolaansho qoraal ah si uu kuugu hadlo. Kaasi wuxuu noqon karaa dhakhtarkaaga ama wakiil la oggol yahay.<br><br>**Maxaa dhacaya marka la joogo dacwad dhageysiga?**<br>Marka la joogo dacwad dhageysiga waxaad Qareenka Maamulka Sharciga ee Oregon u sheegi kartaa sababta aadan ugu raacsanayn go'aankayaga ku saabsan rafcaankaaga. Xaakimka ayaa gaari doona go'aanka kama dambeysta ah. |

## Su'aalaha iyo jawaabaha ku saabsan rafcaanada iyo dacwad dhageysiga

| **Maxaa dhacaya haddii aanan helin warqad diidmo? Weli ma codsan karaa rafcaan?** |
|---|
| Waa in aad heshaa warqad diidmo ka hor inta aadan codsan karin rafcaan.<br><br>Daryeel bixiyayaashu waa in aysan diidin adeeg. Waa in ay weydiiyaan YCCO haddii in aad heli karto oggolaansho loogu talagalay adeeg.<br><br>Haddii daryeel bixiyahaagu yiraahdo in aadan yeelan karin adeeg ama ay noqoto in aad bixiso lacagta adeega, waxaad naga codsan kartaa warqad diidmo (NOABD). Marka aad haysato warqada diidmada, waxaad codsan kartaa rafcaan. |
| **Maxaa dhacaya haddii YCCO buuxin waydo wakhtiga la qabtay rafcaanka?** |

Haddii ay nagu qaadato in aanu muddo ka badan 30 maalmood kaga soo soo jawaabno rafcaankaaga, waxaad gobolka ka codsan kartaa dib u eegis. Tani waxaa loo yaqaan dacwad dhageysi. Si aad u codsato rafcaan, waxaad gobolka ka wacdaa 800-273-0557 (TTY 711) ama isticmaal foomka dacwad dhageysiga dhanka internet-ka oo laga helayo https://bit.ly/ohp-hearing-form

**Miyuu qof kale igu matali karaa ama iga caawin karaa dacwad dhageysiga?**

Waxaad xaq u leedahay in aad yeelato qof kale oo aad dooratay oo kugu matala dacwad dhageysiga. Tani waxay noqon kartaa qof kasta sida saaxiib, xubin ka tirsan qoyska, qareen, ama daryeel bixiyahaaga. Waxaad xaq u leedahay in aad naftaada matasho haddii aad doorato. Haddii aad qareen qabsato, waa in aad bixisaa kharashkiisa.

Si aad u hesho talo iyo matalaad aan wax lacag ahi kaaga baxayn, Khadka Gargaarka Dadweynaha ka wac 1-800-520-5292; TTY 711. Khadku waa iskaashi ka dhexeeya Gargaarka Sharciga ee Oregon iyo Xarunta Sharciga Oregon. Macluumaad ku saabsan taageerada dhanka sharciga ah ayaa sidoo kale laga heli karaa OregonLawHelp.com

**Weli ma heli karaa faa'iidada ama adeega inta aan ka sugayo go'aan?**

Haddii aad helaysay faa'iidada ama adeega la diiday oo aanu joojinay in aanu bixino iyada, adiga, ama wakiilkaaga la oggol yahay ama adeeg bixiyahaaga, oo haysta oggolaanshahaaga oo qoraal ah ayaa naga codsan kara in aanu sii wadno inta lagu jiro nidaamka rafcaanka iyo dacwad dhageysiga.

**Waxaad u baahan tahay in aad:**

- Ku codsato tani muddo 10 maalmood gudahood ah laga bilaabo taariikhda ogeysiinta ama taariikhda uu go'aanku dhaqan galo, hadba tii dambaysa. Waxaad ku codsan kartaa telefoon ahaan, warqad ahaan, ama fax ahaan.
- Waxaad naga soo wici kartaa 833-257-2192 (TTY 711)
  ama
- Isticmaal foomka Codsiga in Dib u eegid Lagu sameeyo Go'aanka Daryeelka Caafimaad. Foomkani waxaa lala soo diri doonaa warqada diidmada. Waxaad sidoo kale ka heli kartaa https://bit.ly/request2review.
- **Ku jawaab "haa" su'aasha ku saabsan sii wadida adeegyada ee ku qoran sanduuqa 8 ee bogga 4 ee foomka *Codsiga in Dib u eegid Lagu sameeyo Go'aanka Daryeelka Caafimaad*.**

Waxaad foomka boosta ugu soo diri kartaa:
Yamhill Community Care Grievance Specialist
PO Box 5490
Salem, OR 97304

**Miyay tahay in aan bixiyo lacagta adeegyo sii socda?**
Haddii aad doorato in aad weli hesho faa'iidada ama adeega la diiday, waxaa dhici karta

| |
|---|
| in aad bixiso lacagtiisa. Haddii aanu beddelno go'aankeena inta lagu jiro rafcaanka, ama haddii garsooruhu kugu raaco marka la joogo dacwad dhageysiga, ma bixin doontid lacagta.<br><br>Haddii aanu beddelno go'aankeena oo aadan helayn adeega ama faa'iidada, waxaan u ansixin doonaa ama u bixin doonaa adeega ama faa'iidada sida ugu dhakhsaha badan ee uu caafimaadkaagu u baahan yahay. Waxaanu qaadan doonaa wax aan ka badnayn 72 saacadood laga bilaabo maalinta aan helno ogeysiinta ah in go'aankayagii laga noqday. |
| **Maxaa dhacaya haddii aan sidoo kale leeyahay Medicare? Ma leeyahay xuquuqda rafcaanka oo badan?** |
| Haddii aad leedahay YCCO iyo Medicare labbadoodaba, waxaa dhici karta in aad yeelato xuquuqda rafcaanka oo ka badan kuwa kor ku qoran. Adeega Macmiilka ka wac 855-722-8205 (TTY 711) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah. Waxaad sidoo kale Medicaid ka wici kartaa 800-633-4227 si aad u ogaato waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqdaada rafcaanka. |
| **Maxaa dhacaya haddii aan rabo in aan arko diiwaannada loo isticmaalay in lagu gaaro go'aan ku saabsan adeegayga(yadayda)?** |
| Waxaad YCCO kala xiriiri kartaa 833-257-2192 (TTY 711) si aad u codsato dhammaan nuqulada warqadeed oo lacag la'aan ah ee loo isticmaalay si loo gaaro go'aankani. |

# Ereyada ay tahay in la Ogaado

**Rafcaanka** – Marka aad codsato in qorshahaagu beddelo go'aan aadan ku raacsanayn oo ku saabsan adeeg uu dhakhtarkaagu dalbay. Waad wici kartaa, u qori kartaa, oo buuxin kartaa foom sharraxaya sababta ay tahay in qorshuhu u beddelo go'aankiisa. Tani waxaa loo yaqaan gudbinta rafcaan.

**Dardaaranka Caafimaadka** – Oo ah foom sharci ah oo kuu oggolaada in aad muujiso rabitaankaaga daryeelka soo afjarida nolosha. Waxaad dooran kartaa qof aad la hadasho si loo gaaro go'aanada daryeelka caafimaadka haddii aadan naftaada u gaari karin.

**Qiimeynta** – Dib u eegida macluumaadka ku saabsan daryeelka bukaanka, dhibaatooyinka daryeelka caafimaadka iyo baahiyaha. Tani waxaa loo isticmaala si loo ogaado haddii baahiyaha daryeelka loo baahan yahay in la beddelo iyo qorsheynta daryeelka mustaqbalka.

**Balance bill (biilka aan la filayn) -** Biilka baaqiga ah 'balance billing' waa marka biil aad ka hesho daryeel bixiyahaaga oo ah qaddarka lacageed ee soo hara. Tani waxay dhacdaa marka uusan qorshahu daboolayn dhammaan kharashka adeega. Tani waxaa sidoo kale loo yaqaanaa biil aan la filayn. Daryeel bixiyayaasha OHP ma aha in ay biilka baaqiga ah 'balance bill' u diraan xubnaha.

**Caafimaadka hab-dhaqanka** – Kani waa caafimaadka dhimirka, xanuunka maskaxda, balwada, iyo dhibaatooyinka isticmaalka mukhaadaraadka. Wuxuu beddeli karaa dareenkaaga niyadeed, fikirkaaga, ama sida aad u dhaqanto.

**Copay ama Copayment** – Oo ah qaddar lacageed oo qofka yahay in uu lacagtooda bixiyo adeegyada sida daawooyinka la isku qoro ama booqashooyinka. Xubnaha ka tirsan OHP ma laha copay-yada. Caymiska caafimaad oo gaar ah iyo Medicare mararka qaarkood waxay leeyihiin copay-yada.

**Isku duwida Daryeelka** – Oo ah adeeg ku siinaya waxbarasho, taageero iyo ilaha bulshada. Waxay kaa caawisaa in aad ka shaqeyso caafimaadkaaga oo aad hesho habkaaga nidaamka daryeelka caafimaadka.

**Civil Action** – Oo ah dacwad la gudbiyo si aad u hesho lacag bixin. Tani ma aha dacwad la gudbiyo oo loogu talagalay dembi. Tusaalooyinka qaarkood waa dhaawaca shakhsi, soo ururinta biilashada, tacadiyada caafimaad, iyo musuqmaasuqa.

**Co-insurance –** Qaddarka lacageed ee qof yahay in uu siiyo qorshe caafimaad oo loogu talagalay daryeel. Inta badan waa qiyaasta boqolkiiba ee kharashka, sida boqolkiiba 20%. Caymiska ayaa bixiya lacagta inta soo hartay.

**Sharciyada Macmiilka –** Xeerar iyo sharciyo loola jeedo in ay lagu ilaaliyo dadka oo lagu joojiyo hab-dhaqanka ganacsi ee aan daacada ahayn.

**Daryeelka urruradu iska kaashadeen (CCO)** – CCO waa qorshaha degaanka ee OHP oo kaa caawiya in aad isticmaasho faa'iidooyinkaaga. CCO-yadu waxay ka kooban yihiin dhammaan noocyada daryeel bixiyayaasha caafimaadka ee ka jira bulshada. Waxay ka wada shaqeeyaan daryeelka xubnaha ka tirsan OHP ee ku nool degaanka ama degaan ka tirsan gobolka.

**Dhibaato –** Oo ah waqti adag, dhib lagu jiro, ama khatar. Waxay keeni kartaa xaalad degdeg ah haddii aanan wax laga qaban.

**Ku dhawaaqida Daaweynta Caafimaadka Dhimirka –** Oo ah foom aad buuxin karto marka aad qabto dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka oo aadan gaari kari karin go'aano ku saabsan daryeelkaaga. Waxay tilmaamaysaa kala doorashooyinka ku saabsan daryeelka aad rabto iyo kuwa aadan rabin. Wuxuu sidoo kale kuu oggolaadaa in aad magacawdo qof weyn si uu go'aano uga gaari karo daryeelkaaga.

**Lacagta la iska jaro –** Qaddarka lacageed oo aad bixiyo oo loogu talagalay adeegyada caymiskooda la daboolay ka hor inta uusan caymisku bixin lacagta inta soo hartay. Tani waxaa kaliya loogu talagalay Medicare iyo caymiska caafimaad oo gaar ah.

**Qalabka loogu talagalay wax baxnaaninta 'habilitation' iyo dhaqancelinta** – Agab si ay kaaga caawiyaan adeegyada daaweynta ama hawlaha maalinlaha ah ee kale. Tusaalooyinka waxaa ka mid:

- Qalabka socodka ‘walkers’
- Ulaha
- Usha lagu socdo ‘crutches’
- Qalabka lagula socdo glucose-ka
- Qalabka faleebooyinka
- Qalabka jirka lagu rakibo ‘prosthetics’ iyo qalabka cagaha/lugaha ‘orthotics’
- Qalabka aragga hoose kordhiya
- Qalabka isgaarsiinta
- Kuraasta naafada ee matoorka leh
- Mishiinka qalabka la adeegsado neefta

**Wax ogaanshaha** – Marka daryeel bixiye ogaado dhibaatada, xaalad, ama cudur.

**Qalabka caafimaad ee waara (DME)** – Waxyaabaha sida kuraasta naafada, qalabka socodka ‘walkers’, sariiraha isbitaalka oo waara muddo dheer. Looma isticmaalo sida agabka caafimaad.

**Barnaamijka Baaritaanka Hore & Xilliyeedka ee Ogaanshaha iyo Daaweynta ee (EPSDT) -** Barnaamijka Baaritaanka Hore & Xilliyeedka ee Ogaanshaha iyo Daaweynta ee (EPSDT) wuxuu adeegyada daryeelka caafimaad oo dhammeystiran iyo ka hortagga siiyaa dadka ay da’doodu ka yar tahay 21 jir ee uu caymiskooda daboolo Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP). EPSDT wuxuu bixiyaa EPSDT Caafimaad ahaan Lagama maarmaanka ah iyo EPSDT Caafimaad ahaan Ku habboon ee adeegyada Medicaid-daboosho si loo daaweeyo xaalada jirka, ilkaga, aragga, korriinka, nafaqada, iyo caafimaadka maskaxda iyo hab-dhaqanka. Caymiska loogu talagalay EPSDT waxaa ka mid ah dhammaan adeegyada la dabooli karo sida uu dhigayo Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP), marka EPSDT Caafimaad ahaan Lagama maarmaanka ah iyo EPSDT Caafimaad ahaan Ku habboon yahay qofka ah EPSDT.

**Xaaladaha ilkaha ee degdega ah** – Oo ah dhibaato caafimaad oo ilkood oo ku saleysan astaamahaaga. Tusaalooyinku waa xanuun daran oo iliga haleela ama barar.

**Xaalada caafimaad ee degdega ah** – Oo ah jiro ama dhaawac isla markiiba u baahan daryeel. Kani waxaa ka mid ah dhiig bax aan joogsanayn, xanuun daran ama lafo jabay. Wuxuu noqon karaa wax sababa doona in qayb ka mid ah jirkaagu joojiso shaqada. Xaalada caafimaadka dhimirka oo degdeg ah waa dareenka qofka oo iscelin kari waaya ama dareenka ah in aad waxyeello u geysan karto naftaada ama qof kale.

**Gaadiidka caafimaad ee degdega ah** – Isticmaalka ambalaaska ama Life Flight si aad u hesho daryeel caafimaad. Farsamayaqaannada xaalada caafimaad ee degdega waxay bixiyaan daryeel inta lagu gudo jiro gaadiid raacida ama duulimaadka

**ER ama ED** – Waxaa loola jeedaa qolalka gargaarka degdega ah ama waaxda xaalada degdega ah. Tani waa meel ku taala isbitaalka halkaasi oo aad ka heli karto daryeel loogu talagalay caafimaad ama xaalada caafimaadka dhimirka ah ee degdega ah.

**Daryeelka qolka gargaarka degdega ah** – Daryeel aad heli karto marka aad qabto dhibaato caafimaad oo halis ah oo aysan ammaan ahayn in la sugo. Tani waxay ka dhici kartaa ER-ka.

**Adeegyada degdega ah** – Daryeel wanaajiya ama xasilliya xaaladaha caafimaad ee halista ah ama caafimaadka dhimirka ee degdega ah.

**Adeegyada la iska reebay** – Waxa qorshe caafimaad uusan lacagtiisa bixin. Tusaale: OHP ma bixiso lacagta adeegyada lagu wanaajinayo sida aad u eg tahay, sida qalliinka is qurxinta ama waxyaabaha iskood u bogsooda, sida hargabka.

**Xeerka Sheegashada Beenta ah ee Federaalka iyo Gobolka** – Sharciyada dembi ka dhiga in qof si ula kac ah u sameeyo diiwaan been ah ama u gudbiyo sheegasho been ah oo loogu talagalay daryeel caafimaad.

**Tabashada** – Oo ah cabasho rasmi ah oo aad sameyn karto haddii aadan ku faraxsanayn CCO-gaaga, adeegyadaada daryeelka caafimaadka, ama daryeel bixiyahaaga. OHP waxay tani ugu yeertaa cabasho. Sharciga ayaa oranaya in CCO-yadu ay tahay in ka soo jawaabaan cabasho kasta.

**Adeegyada wax baxnaaninta iyo qalabka** – Adeegyada iyo qalabka dadka bara xirfadaha nolol maalmeedka. Tusaale ayaa ah daaweynta hadalka oo loogu talagalay ilme aanan bilaabin in uu hadlo.

**Caymiska caafimaad** – Oo ah barnaamij lacagtiisa bixiya daryeelka caafimaad. Ka dib marka aad isku diiwaan geliso, shirkad ama hay'ad dowladeed ayaa bixiya lacagta adeegyada caafimaadka ee caymiskooda la daboolo. Barnaamijyada caymiska qaarkood ayaa u baahan tahay lacag bixinta bishii, oo loo yaqaan *premiums*.

**Qiimeynta Khatarta Caafimaad** – Oo ah ra'yi ururin ku saabsan caafimaadka xubinta. Ra'yi ururintu waxay wax ka weydiinaysaa caafimaadka niyadeed iyo jireed, hab-dhaqanka, xaaladaha nololeed iyo taariikhda qoyska. CCO-yadu waxay u isticmaalaan in ay xubnaha ku xiraan caawimaada iyo taageerada saxda ah.

**Daryeelka Caafimaadka Guriga** – Adeegyo aad ku hesho guriga si lagaaga caawiyo in aad si fiican u noolaato ka dib qalliin, jiro ama dhaawac. Iska caawinta daawooyinka, cuntooyinka iyo qubeyska waa qaar ka mid ah adeegyadani.

**Adeegyada Hospice** – Adeegyada lagu dejinayo qof dhimanaya iyo in la caawiyo qoyskiisa. Hospice waa mid dabacsan waxayna noqon kartaa daaweynta xanuun, la talin, iyo daryeelka nasashada.

**Daryeelka b ukaan-socodka ee isbitaalka** – Bukaan-socodka: Marka qalliin ama daaweyn laga sameeyo isbitaalka oo aad ka dibna baxdo. "Daryeelka ka dhaca isbitaalku sida caadiga ah uma baahna in habeen la joogo."

**Isbitaal la is dhigay** – Marka qof uu istibaal u yimaado daryeel.

**Medicaid** – Oo ah barnaamij qaran oo gacan ka geysta kharashyada daryeelka caafimaad ee loogu talagalay dadka uu dakhligoodu hooseeyo.  Marka la joogo Oregon, waxaa loo yaqaanaa Qorshaha Caafimaadka Oregon.

**Caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah** – Adeegyo iyo agab loo baahan yahay si looga hortaggo, loo ogaado ama loo daaweeyo xaalad caafimaad ama astaamaheeda.    Waxay sidoo kale macnaheedu noqon karaa adeegyada daaweynta caadiga ah.

**Medicare** – Oo ah barnaamijka daryeelka caafimaad ee federaalka oo loogu talagalay dadka ay da'doodu tahay 65 ama ka weyn tahay. Wuxuu sidoo kale caawiyaa dadka qaba naafanimada qaarkood ee da'kasta leh.

**Nidaamka** – Daryeel bixiyayaasha caafimaadka, caafimaadka dhimirka, ilkaha, farmashiyaha iyo qalabka oo heshiis la leh CCO.

**In-Network ama Daryeel Bixiye Wax ka qayb qaadanaya** – Daryeel bixiye kasta oo la shaqeeya CCO-gaaga.  Waxaad daryeel bixiyayaasha ka tirsan qorshe caafimaad 'in-network providers' ku arki karta si lacag la'aan ah.  Dadka takhasuska u leh nidaamka qaarkood waxay u baahan yihiin gudbin.

**Out-of-Network Provider** – Oo ah daryeel bixiye aan heshiis la saxiixan CCO.  CCO lacag ma bixiso lacagta xubnaha si ay u arkaan iyaga.     Waa in aad heshaa oggolaansho si aad u aragto daryeel bixiye ka baxsan degaanka caymiska laga bixiyo 'out-of-network'.

**Iska dhaafida Heshiiska Bixinta Lacagta ee OHP (OHP 3165 ama 3166)** – Oo ah foom aad saxiixdo haddii aad oggolaanayso in bixiso lacagta adeeg OHP aanay lacagtiisa bixin.   Wuxuu kaliya yahay mid shaqeynaya oo loogu talagalay adeega iyo taariikhda saxda ah ee ku qoran foomka.  Waxaad foomka wax iska dhaafida oo bannaan ka heli arki kartaa https://bit.ly/OHPwaiver. Ma hubtid miyaa haddii aad saxiixday foomka wax iska dhaafida? Waxaad weydiin kartaa xafiiska daryeel bixiyahaaga.   Luqadaha dheeraadka ah, fadlan booqo: www.oregon.gov/oha/hsd/ohp/pages/forms.aspx

**Adeegyada dhakhtarka** – Adeegyo aad ka hesho dhakhtar.

**Qorshe** – Oo ah urur caafimaad ama CCO oo bixisa  lacagta adeegyada daryeelka caafimaadka ee xubnaheeda.

**POLST** – **Amarka La qaadan karo ee Daaweynta Taageerada Nolosha (POLST).** Oo ah foom caafimaad oo aad isticmaali karto si aad u xaqiijiso in rabitaankaaga daryeel ee ku dhow soo afjarida nolosha ay raacaan bixiyayaasha caafimaadku

**Adeegyada Xasillinta Ka dib –** Adeegyo la helo ka dib xaalad degdeg ah si lagaaga caawiyo in lagaa dhigo qof xasilloon, ama  kor u qaadida ama hagaajinta xaaladaada

**Oggolaanshaha hore (oggolaansho hore, ama PA)** – Oo ah dokumenti sheegaya in qorshahaagu uu bixin doono lacagta adeeg.  Qorshayaasha iyo adeegyada qaarkood ayaa u baahan PA ka hor inta aadan helin adeega.   Dhakhaatiirta ayaa qaban doona tani.

**Premium** – Kharashka caymiska.

**Caymiska daawooyinka la isku qoro** – Caymis caafimaad ama qorshe oo gacan ka geysta bixinta lacagta daawooyinka.

**Daawooyinka la isku qoro** – Daawooyin uu dhakhtarkaagu kuu sheego in aad qaadato.

**Daryeelka ka hortagga ama ka hortagida –** Daryeel caafimaad oo kaa dhiga in aad caafimaad qabto. Tusaalooyinku waa qaadashada tallaalka hargabka ama baaritaanka la maro sanad kasta.

**Daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah (PCP)** – Oo ah xirfadlaha caafimaadka ee daryeela caafimaadkaaga. Sida caadiga waa qofka ugu horeeya ee aad soo wacdid marka aad qabtid dhibaatooyin caafimaad ama u baahan tahay daryeel. PCP aad leedahay wuxuu noqon karaa dhakhtar, kalkaaliso khibrad leh, kalkaaliye dhakhtar, dhakhtarka lafaha/muruqa ama mararka qaarkood daaweynta bedelka ah ‘naturopath’.

**Dhakhtarka daryeelka aasaasiga ee ilkaha (PCD)** – Dhakhtarka ilkaha ee aad sida caadiga u tagto ee daryeela ilkahaaga iyo ciridkaaga.

**Adeeg bixiye**– Qof kasta ama hay’ad kasta oo bixisa adeegyo daryeelka caafimaad

**Gudbin** -- Gudbintu waa amar qoraal ah oo ka socda daryeel bixiyahaaga oo xusaya baahida loo qabo adeeg. La shaqee daryeel bixiye wixii la xiriira is gudbin.

**Adeegyada dhaqancelinta** – Adeegyo kaa caawiya in aad caafimaad buuxa ku soo noqoto. Kuwani waxay sida caadiga ah ku caawiyaan ka dib qalliinka, dhaawaca, ama isticmaalka mukhaadaraadka.

**Wakiilka** – Oo ah qof loo doortay in uu ku matalo ama kuu hadlo.

**Baaritaanka** – Oo ah ra’yi ururin ama baaritaan lagu hubinayo xaaladaha caafimaad iyo baahiyaha daryeelka.

**Daryeelka kalkaalisada xirfada leh** – Caawimaad laga helo kalkaaliso oo leh daryeelka boogta, daaweyn ama qaadashada daawadaada. Waxaad daryeelka kalkaalisada xirfada leh ku heli kartaa isbitaal, guri la isku xannaaneeyo ama guri kuu gaar ah oo leh daryeelka caafimaadka.

**Qof takhasus u leh** – Oo ah bixiye caafimaad oo tababar gaar ah leh si uu u daryeelo qayb ka mid ah jirka ama nooc jiro.

**Isdilka –** Ficil qofka nafta iskaga qaadayo.

**Telehealth** – Daryeel dhanka muuqaalka ah ama daryeelka dhanka telefoonka ah halkii uu ka ahaan lahaa xafiiska daryeel bixiyaha.

**Isbeddelka daryeelka** – Xubnaha qaarkood ee beddesha qorshayaasha OHP waxay weli heli karaan adeegyo isku mid ah oo arki karaan daryeel bixiyayaal isku mid ah. Taasi macnaheedu waa in daryeelku uusan isbeddeli doonin marka aad beddelayso qorshayaasha CCO ama u wareegto/ka soo wareegto kharashka adeega 'fee-for-service' ee OHP. Tani waxaa loo yaqaan isbeddelka daryeelka. Haddii aad qabto dhibaatooyin caafimaadka oo halis ah, qorshayaashaada cusub iyo kuwii hore waa in ay ka wada shaqeeyaan sidii loo xaqiijin lahaa in aad hesho daryeelka iyo adeegyada aad u baahan tahay.

**Shaqaalaha Caafimaadka Dhaqan ahaaneed (THW)** – Oo ah shaqaalaha caafimaadka dadweynaha oo la shaqeeya daryeel bixiyayaasha caafimaadka si loogu adeego bulsho ama xarun caafimaad. THW waxay xaqiijisaa in xubnaha loola dhaqmo si cadaalad ah. THW-yada oo dhan aqoonsi kama haystaan gobolka Oregon. Waxaa jira lix nooc oo kala duwan oo ah THW-yada oo ay ku jiraan:

- Shaqaalaha caafimaadka bulshada.
- Qof takhasus u leh caafimaadka dadka isku faca ah
- Hagaha caafimaadka shakhsi ahaaneed
- Qof takhasus u leh taageerada dadka isku faca ah
- Birth doula
- Shaqaalaha Caafimaadka Dhaqan ahaaneed ee Qabiilka

**Daryeelka degdega ah** – Daryeel aad u baahan tahay isla maalintaasi oo loogu talagalay xanuun daran. Waxaa sidoo kale ka mid ah daryeelka lagaga ilaalinayo dhaawac ama jiro in ay ka sii darto ama si looga hortaggo luminta shaqada qayb ka mid ah jirkaaga.

**Whistleblower** – Qof soo sheega hanti lumin, khiyaano, ku tagri falid, musuqmaasuq, ama khatar ku ah caafimaadka iyo badbaadada dadweynaha.